# WAAGA CUSUB

Jan.—Mar. — Sanadkii 1aad — L. 1aad waa Wargeys 3dii bilood mar soo baxa waxaana soo saara W. W. iyo H. U. ee J. D. S.



## KAL-FADHIGII 3AAD EE G. DHEXE EE XHKS



# ISBAHAYSIGA SHAQAALAHA IYO BEERALEYDA





F.A.

# TUSMO


FAALLO . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 1 — 3

Toddobo Sano ee Waayo-aragnimo ah . . . . . . . . . . 4 — 21

Kalfadhigii 3aad ee XHKS . . . . . . . . . . . . . . 22 — 31

Jaalle Siyaad: Kacaan labad waa lama huraan . . . . . . . . 32 — 33

Taageero buuxda ee XHKS . . . . . . . . . . . . . 34 — 35

Horumarka Shaqaalaha iyo midnimada Beeraleyda . . . . . . . 36 — 38

Toddobaadkii Isbahaysiga beeraleyda iyo Shaqaalaha . . . . . 39 — 40

Warqad Murtiyeed . . . . . . . . . . . . . . . . . 41 — 42

Yaa loo dejiyey Xeerka qoyska . . . . . . . . . . . . 43 — 45

Waxbarashadu waa asaaska horumarka . . . . . . . . . . . 46 — 47

Miisaaniyadda 1977 . . . . . . . . . . . . . . . . 48 — 49

Heer kama dambeys ah ayuu marayaa halgankii Simbabwe . . 50 — 54

Heer sare ayay maraysaa Kubbadda Cagta ee dalkeenna . . . . 55 —



WAAGA CUSUB (New Ara) qiimaha Sh. S0. 1 midkiiba

Waa wargyes bil walba soo baxa waxaana soo saara W. W. iyo Hanuuninta Ummadda ee

J.D.S. Maamulka iyo Xafiisyada — Tel. 3057 S.B. 1178 — MUQDISHO

Dibedda waxaan ugu tala galnay afafka Ingiriisiga, Talyaaniga, iyo Carabiga

Tifaftire Sare (Chief Editer) Saciid Cabdisalaam

Kaaliye Tifaftire (Ass. Chief Editer) Shariif Maxamed Axmed

Qorayaasha (Editer) Caasha Axmed Maxamed, Saciid Cumar Cabdi

Garaacidda Makiinadda Liinotaybka: Muuse Maxamed Cosoble

Iskudibbarridka Farsamada: Axmed Shariif Xasan

Kaaliyaha Iskudubbarridka Farsamada: Cusmaan Nuur

# FAALLO

# Taageerada Joogtada

Tiir Tiirarka Siyaasaddeenna dibedda ka mid ah waa taageerada buuxda oy Soomaaliya siiso dhaqdhaqaaqyada Gobannimadoonka mabda'an oo lagu caddeeyey xaashidii koowaad ee kacaanka waxaa kaloo lagu xusay barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed. Waa taas tan keenaysa in, mar kastoo fadhiyada caalamiga ah lagaga xaajoonayo arrimaha ku saabsan xoraynta Ummadaha gacanta gumeysiga iyo midabtakoorka ku jira, inay Soomaaliya si aad ugu dhawaaqdo taageerada ay taageerayso halganka madaxbannaanida iyo xornimada lagu doonayo.

Iyadoo ay mabda'an hirgelinayso Soomaaliya waxay safka hore kaga jirtaa halganka ay Afrika ku jirto siday xornimo kaamil ah ku gaari lahayd Cidina ma beenin karto guulaha ay Afrika dhinacaas ka soo hoysay, laakiinse waxaa weli loo baanhanyahay dadaal dheeraad ah si lagu dhabeysiiyo himilada weyn oo gobanimobuuxda. Dadka Afrikada koofureed, Namibiya, Sambaabuwa iyo gaar ahaan wallaalaheena Xeebta Soomaaliyeed, waxay weli wadaan halganka liddiga ku ah cadandiska midabtakoorka iyo gumeysiga. Soomaaliya, iyadoo ku kalsoon in dagaalkaas lib laga keeni doono, waxay dhawr jeer caddeysay baahida loo qabo in dadkaas kifaaxaya la siiyo taageero hiil iyo hooba leh si halgankaas ku noqdo mid miro si dhaqso ah u dhaliya waxaan ogson nahay in danaha imbeeriyaaliyadda la mid yihiin kuwa kooxda taliska midabtakoorka iyo gumeysiga, sidaas awgeed ayey xoogagga imberyaaliyadda si kastaba ugu ayidaan kooxahaas ka taliya koonfurta Arfika, Xeebta Soomaaliyeed iyo Jasiiradaha Mayootte oy Faransiisku u diideen inay ku biirto dalka Hooyo (Jasiiradaha Komooro).

Afrika waxaa hortaagan sannadkan 1977, Ummdahaas, laakiinse nasiib wanaag, Afrika waxay tahay mid meel ka soo wadajeeda oo midaysan, isu soo dhowaanshaha Afrikaanka iyo carabtuna aad bay wax u tartay dedejinta dhammaadka gumeysiga. Dhibaatooyinku waxay sii darnaayeen markay Afrikada Koonfureed oo dhammi ku wada jirtay gacanta gumeysiga iyo midabtakoorka.

Libta ay shacbiga Angoola iyo Mosambiik ka keeneen gumeystaha Bortuqiiska oo si muuqata looga adkaaday waxay dhintay xooggii is haystay oo ku fidsanaa dhinacaas Qaaradda Arfika oo dhan, taasoo si wa-

# Ah oy soomaaliya siiso

naagsan u saameysay arrinta ku saabsan xoraynta Xeebta Soomaaliyeed oo Faransiisku qasab ku noqotay inay aqoonsadaan himilada dadweynaha xeebta Soomaaliyeed oo doonaya gobannimadooda, markaasna noqotay inay Faransiisku qaadaan tallaabooyin ku habboon sidii gumeysiga dalkaas looga saari lhaa.

Tan waxay ina xusuusinaysaa inaan qaadanno oo aan hoos xarriiqno mawqifka cad oy Soomaaliya ka qaadatay arrintaas iyadoo taageeraysa dadweynaha Xeebta Soomaaliyeed oo u halgamaya gobannimadooda. Soomaaliya waxay si aan mugdi ku jirin u caddaysay inay xeebta la doonayso gobannimo buuxda, iyadoo aan marna ku oggolayn xalli nooca gumeysiga cusub. Waxaa badiba gacan weyn ka geysatay Soomaalida kacaanka ah hadday waayahan dambe Faransiisku muujiyeen inay gobannimada siiyaan dalkaas iyagoo waan-waan la yeeshay dadka runtii matalayo dadweynaha Xeebta sida kuwa ka socda Xisbiga Dadka Arfikaanka ee gobannimada (LPAI),

Dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka xeebta Soomaaliyeed (FLCS) iyo qaybta ugu weyn waxay tahay in Xeebtu gobannimadeeda ku haleesho si nabadgelyo leh iyadoo dadweynuhu isku duuban yihiin, Soomaaliya waxay weligeed ku dadaaleysay oo haddana ku halgamaysaa in sidaas wax u dhacaan si Xeebtu u noqoto mid xoriyaddeeda ku gaarta si dimuqraadiyad leh iyadoo la yeelanayso xiriir wax wadaqabsi oo ku salaysan xushmaynta xorriyadda Dawladda cusub ee Xeebta Soomaaliyeed.


Hadday Faransiisku si dhab ah u hirgeliyaan habka xoraynta Xeebta oo la mariyo jidkii Soomaaliya ay tilmaantay markay wadahallada la yeelatay wafdigii Faransiiska oo Xamar Yimid oo uu hoggaaminayey Xoghayaha Dawladda ee Wariirka Arrimaha Dibedda ee Faransa, Mr. Piere Cristan Taihinger , waxaa hubaal ah in Faransiisku ay u suurtoobi doonto inay xiriir wax wada qabsi wanaagsan la yeeshaan Xeebtoo kelıya ma aha xataa Soomaaliya, wax wadaqabsigaas oo ku salaysnaanaya ıs xushmeyn iyo is daneyn. Xiriirkaas wax wada qabsiga oo ku fidi doona dalalka Afrikaanka kale oo maanta safka hore kaga jira taageerka halganka dadweynaha cadaadiska ku jira oo gobannimo doonaya.

Haddii dhinaca Faransiiska laga filan karo inay si xasılan ku dhammeeyaan arrinta xoreynta Xeebta, haddaan raacno mawqifka ay Faransiisku qaateen siduu sheegay Mr. Taihinger intay socdeen wada hadalladii uu madaxda Soomaaliyeed Xamar kula yeeshay, waxaa dhacda in

# Gobannimadoonka

kooxihii midab-takoorrada ay madax u yihiin Voster iyo Iyan Smith ay ku dhaqaaqeen waxay muujiyeen inaysan oggolayn wax alla wixii suurta-gelin lahaa xallil xasilan oo awoodda siinaya dadka Afrikaanka ah oo badan. waxay keenaysaa in la xoojiyo halganka hubka ah oo lagu qaado Roodeesiya, Namiibiya iyo Sambabwe, Fashilkii uu fashilmay fadhigii Jineeva oo lagaga xaajoonayey aayaha dambe ee Roodeesiya taasoo u sabab ahayd diidmadii uu Iyan Smith diiday inuu oggolaado mabda' awoodda siinaya Afrikaanka oo iyaga dhulka u badan xukunka sharci darrada ah oo weli kooxda midabtakoorka koonfurta Afrika ku dhaqo Namiibiya, iyadoo si aada ugu xad gudbeysa go'aannadii Qaramada midoo-bay; taageerada uu Voster taageerayo siyaasadda cadaadiska ah oo uu iyen Smith halyayada Sambaabawe kula kacayo, taageerada Brctooriya oy taageerayo xaliiga nooca gumeysiga cusub oo ay soo jeedisay salisburi oo ku saabsan aayaha dambe ee Rodeesiya, Ingiriiskoo u liicaya dhi-naca gumeystaha iyen Smith taasoo caddaatay markay socdeen hawlihii fadhiga Jineeva; taasoo dhan waxay muujinayaan inuu dheeraan mid dhibaato lehna noqon doono jidka xornimada naamibiya koonfur Afrika iyo Sambaabuwe loo marayo, wuxuuna u baahnaan doonaa in la kordhiyo dagaalka hubka ah kaasoo waafaqsan «Warkii caddaa ee Muqdisho»

Waxaa kolleyba la hubaa in libta ay qaadan doonaan dadweynaha u dagaallamaya inay xornimadooda helaan inkastoo ay xoogagga cadowga ahi ay fursad weyn leeyihiin. Waxaa tusaale weyn naga siinaya in isbed-delka taariikhig ahi la hakin karin guulihii ay gaareen dagaalyahannadii reer Angoola, Mosambiik iyo Vitnaam oo ka raayey gumeysi iyaga si kastaba uga xoog roon oo ka hub badan oo haysta taageerada imberiyaaliyadda caalamiga ah iyo guusha ay gaareen dadweynaha Xeebta Soomaaliyeed oo Faransiiska, oo kortii doonaysay in arrinta xallil gumeysi cusub ku dhammeyso ku qasbay inay dad iyaga matalaya kala xaajooto sidii xorni-mo buuxda Xeebta lagu siin lahaa.



# TODDOBO SANO EE WAAYO ARAGNIMO KACAAN AH: XISBIGA HANTIWADAAGGA KACAANKA SOOMAALIYEED

JAALAYAAL,

Waxay ii tahay farxad weyn inaan ku kulanno halkan, dabbaaldeeggii 7 guurada Kacaankii 21 Oktoobar dabadii. Kacaankaas oo inkastoo tallaabadii mudneyd ay qaadeen Ciidammada Qalabka Sida, ahaa mid ka dhashay halgankii dheeraa ee Ummaddeenu kala soo horjeeday imberyaaliyadda, gumeysiga iyo gumeysiga cusub. Sidaa darteed ayuu dadweynaha xoogasatada ah ee Soomaaliyeed u teegeeray ficilkii horukaca ahaa ee Ciidammada Qalabka Sida. Taageero keli ah iskumay koobin ee si cudud iyo xoog leh ayuu dadweynaha xoogsatada ahi uga qayb qaatay dhismaha bulshada hantiwadaagga ah. Waxay libin weyn ka soo hooyeen ololayaashii iyo mashaariicdii faraha badnaa ee la hirgeliyey tan iyo 1969.

Toddobada Sano ee waayo-aragnimada kacaanku waxay sare u qaaday garaadka siyaasiga ah ee dadkeenna iyo bisaylkiisaba. Himilada kacaanku, sida ku cad axdiyadiisii 1aad iyo 2aad, waxay ahayd in la abuuro bulsho hantiwadaag ah ee dadweynuhu maamulo. Innagoo og in ahabbaha taa lagu gaadhay dheer tahay, wuxuu Kacaanku qaaday tallaabooyin fara badan oo isdaba jooga dhinac walbana taabanaya. Giddigood tallaabooyinkaasu waxay higsanayeen abuuridda nidaamka cusub, waxay u gogol dhigayeen samaynta Xisbiga Hantiwadaagga nuxurkooduna wuxuu ahaa aragtida hantiwadaagga Kacaanka ah. Si kasta ah u fara badnaadeene. waxay ujeedeen tallaabooyinkaasu dhallan—rogga sal iyo saynsaabaka dhismaha ee aan ka dhaxalnay gumeysiga iyo sare u qaadidda garaadka siyaasiga ah ee dadka. Haddii aan wax ka taabanno tallaabooyinkaasu sidii ay isugu taxnaayeen waxan tilmaan ahaan uga soo qaadan karnaa dhowr. Billowgii Kacaankaba ilaa ayaamihii u dambeesay intii aan Xis-

bigu la wareegin xilka, Madaxweynaha Golihii Sare ee Kacaanka, Xildhibaannadii GSK iyo Xoghayayaashiiba waxay dadweynaha u jeedinayeen, iyagoo isla markaa kuwareegaya dalka meel kasta, khudbado qaayo leh oo ay ku baraarujinayaan dadka wax wadaqabsi isku duubnaan iyo kalgacayl.

In Kacaanka himiladiisu wadajir tahay wuxuu ku muujiyey iskudarkii labada Gole (Golihii Sare ee Kacaanka iyo kii Xoghayayaasha), Bilowgii kacaanka waxa jirtey, nidaamkii hort laga dhaxlay, in waxgaradka niyadda san ee Ciidammada Qalabka Sida iyo kuwa ka tirsan rayidka aanay aad is dhexgelin oo markaa si kala duwan wax loo arkaayey, mid waliibana ka kala dareen beena ka qabay. Kacaanka ujeedadiisa caddayd waxay ahayd inuu Ummadda oo dhan isku duubo sida ul iyo diirkeed. Taasina ma suurtowdayso haddii marka hore madaxda Kacaanku Ciidan iyo sibilba wadajir meel wax uga wada abbaarin. Taasaa keentay in laysku daro Labada Gole, waana lagu iibaanay.

Waxa kale oo uu Kacaanku ku muujiyey wadajir wax u qabadkaa qawaaniintii faraha badnaa ee loo soo saaray si dadweynuhu uga qayb qaato hawlaha siyaasadda iyo maamulka ee dalka ka socda; abuuriddii Gobollo iyo degmooyin cusub si maamulka dawladdu dadkoo dhan u gaadho, gaar ahaan reer guruuga; Maxkamadihii oo markii u horreysay ilbaabada u furay dadweynaha; iyo lawareeggii meelaha mudan ee dhaqaalaha dalka, ballaadhintooda iyo abuuridda kuwo cusubba si loo baabi'iyo dadweynaha shaqaalaha ah markaana la tirtiro shaqo la'aanta. Waxaa xusid gaar ah mudan abuuriddii Xafiiska Xidhiidhka dadweynaha oo isu beddelay Xafiiska Siyaasadda. Sida la ogsoon yahay waxa xafiiska waajibaadkiisa ka mid ahaa nidaaminta hanuuninta dadweynaha heeganka ah, kicinta iyo abaabuliddooda, iyo ku dhiirrigelintooda hawlaha dalka gaar ahaan shaqooyinka iskaa wax u qabso iyo ololayaasha. Waxa ka dhex dhashay golayaashii Hanuuninta, Guddiyadii badnaa ee dadka kuwa shaqaalaha, dhallinyarada, haweenka iyo Guuldawayaasha. Tababarro iyo aqoon-iswedaarsi looga danleeyahay in lagu helo kaadir siyaasi ah ayaa lagu dhaqaaqay, magaalo Madaxda iyo Gobolladaba. Waxaa dibedda loo diray dad door ah oo lagu soo xulay tababarradaas. Waeea kale oo aan xusuusannahay dawrkii uu Dugsiga Xalane ka qaatay hanuuninta shaqaalaha Xafiisyada dawladda iyo ardayda dugsiyada dhamaysatay, ha ahaadeen dugsiyada sare ama jaamaciyiinba. Ugu dambeyntii waxa la furay Machadka Siyaasiga ah oo isagu si habaysan u guda galay waxbarashada kaadirka.

Iyadoo haa iyo jeer aan ku baraarugsanayn lagama maarmaannimada in la hirgeliyo ballanka loo qaaday dadweynaha, waxaynnu ku dhaqaaqnay 21kii Oktoobar 1974 Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka ee ahaa in la abuuro Xisbi siyaasi ah oo hantiwadaag ah marka ugu horreysa ee uu suuragal noqdo. Tababarradii, aqoon-iswediirsigii, iyo shirarkii faraha badnaa waxay ahaayeen kudo lagu qyiaasi karo heerka uu marayo garaadka siyaasiga ah ee dadweynaha kacaanka ahi. Waxaa taa u daliil ah in shirwtynihii la qabtay Noofember 1975 uu si cad, oo muran ma doonto ah, u muujiyey in dadweynaha Soomaaliyeed taageersan yahay go'aankii Golaha Sare kacaanka ee ahaa si Xisbi gakna 1,Kqama dalka. Waxaa caddaatay in hanuunintii habaysneyd ee isdabajoogga ahayd ay dhalisay midhaheedii. Wuxuu dadkeennii aad u yiqiinsaday kala duwanaanta axsaabtii hore ee waqtigii hore ee waqtigii gumeysiga cusub ee dhuuni raaca ahayd, iyo baahida loo qabo Xisbi cusub oo horseeda, udubdhexaadkiisuna ay tahay dimuqraadiyada iyo ismaqal.

Waxaa markaa la gaadhay goortii la isugu yeedhi lahaa lahaa shirweynihii Asaaska Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kaasoo sida aynu wada ogsoonyahay dhammaaday 26kii Juun ilaa 1dii Luuliyo. wuxuu Golihii Sare ee Kacaanku, markale oofiyey ballan ka mid ah ballamihii waaweynaa ee uu u qaaday dadweynaha Soomaliyeed. Isagoo ku dhawaaqaya **tallaabo ku cusub taariikhda.**
**Ummadddeenna, adduunweynaha laftiisana aan hore** loo arag, ayuu intuu si-baaba,shay, awooddiisi oo idilna ku wareejiyey XHKS si uu u hoggaamiyo Kacaanka Soomaaliyeed. Tallaaaabadana GSK qaaday waxay beenisay xantii uu war-xuma tashiilku in badan la meerasanayey. Waxaynnu ka war qabnaa in had iyo jeer la la isweyndiin jirey «goormaa la dhisayaa Xisbi? Maxaa se loo dhisi waayey? Badanaaba su,aalahaasi waxay ahaayeen qaar ah caam oo dadka Soomaaliyeed iyo dadqalaadba soo jeedin jireen. Maxaa kale oo dhab ahayd in dadka su,aalahaa tuurtuurayey qaarkood ujeedda xumi waddey. Waxay u dan lahaayeen inay dadweynaha jahawareer ku ridaan, kala fogeysiyaan isaga iyo madaxdiisa Kacaanka ah, shaki kaga ridaan dadweynaha in GSK aan weligiis xukunka ku wareejin doonin. Nasiib wanaag waxaa jirty dad badan oo kacaan ah oo ka hortegey arrintaasi. Dadkaas Kacaanka ahi iyagoo sida ul iyo diirkeed ula shaqaynaya madaxda, waxay dadweynaha ka dhaadhicinayeen iaaney dhismaha Xisbiga nooca cusubi wax fudud ahayn, ee ay u baahan tahay waqti

iyo dadaal. Sidaa darteed aan hubsadka iyo shaqada haqada habeysan ee Kacaanku ugu kuur jirey arrinta aan loo qaadan karin baLan-kaga bax ama daacad darro laga qabo dhismsaha hay,adaha dimoqaraadiyadda hantiwadaagga. Wx la koobi karo maha dhibaatooyinka uu Kacaandiidku isku deyey inuu hordhigo halgankeenna. Dacaayadaha beenta ka sakow wuxuu galay dagaal dhaqaale iyo siyaasadba ah, ilaayuu ka gaadhay inuu ka koco laba afgambi. Waxbase kama naasacaddaan. Kacaanka iyo dadweynaha isku duuban ayaa libinta lahaa lehna, lahaanna doona.

Sida magaciisaba ka muuqatay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waa xisbi tawri ah.Wuxuu isu arkaa inuu yahay xubin diirdiiran oo ka mid ah dhaqdhaqaaa Kacaanka adduunweynaha. Wuxuu ka dhashay halgan dabaqadeed, oo dalkeenna gudihiisa iyo axwaasha taagan, qaadanayey qaab waddani ah. Halgankaan usoo marnay gobonnimada, iyo kaan kula jirno gumeysiga cusub, waa qaabab ka mid ah halganka dabaqiga ah ee caalamiga ah ee lagula jiro imberyaaliyadda iyo hantigoosiga ka amar-ku-taagleeya adduunka.

Halganka jaadkaas ahi wuxuu tusaa dhaqdhaqaaqa waddani ah inuu maro tubta hantiwadaagga si uu u rumeeyo himilooyinkiisa. Wey muuqatay markaa, inaanay inoo suuragal ahayn inaan horumar ku gaadhno dhabbaha hantigoosiga. Innaga, iyo dalalka kale oo addoonsi soo marayba, hantiwadaaggu wuxuu u yahay waayaarag taariikhi ah oo lama huraan ah. waxaanu ugu faraxsanahay in dalal badan ay runtani u muuqatay toddobadii sano ee inna soo dhaaftay. Waxaannu kaloo ku imaan qabnaa indalal badan oo kale taariikhdu tusi doonto in mustaqbalku yahay dhabbha hantiwadaagga cilmiga ah.

Run ahaan waxaan ku nool nahay qarnigii kala wareega taariikhda min hantigoosi ilaa hantiwadaag Xoogagga isbedoelkaa taariikhiga ah wada waxa ka mid ah dalalkii la addonsan jiray si ay gobannimo buuxda, siyaasi ahaan iyo dhaqaale ahaanba, gaadhaan qaadanaya dhabaha hantiwadaagga, iyo dhaqdhaqaaqyad halganka dimoqaraadiga iyo horusocodka ah ka dhex wada dalalka hantigoosiga gudahooda. Labdaa Xoogba waxay ku tiirsan yihii tiirka aan la loodin karin ee nidaamka hantiwadaagga ah ee maanta janjeedhiyey miisaankii xoogagga adduunka. Xisbiga hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, mar haddii uu yahay Xisbi ku dhaqma mabda'a hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, wuxuu ka mid yahay, sidaan horayba u sheegnay xoogagga horusocodka dunida ka dhalinaya, wuxuuna ka abuurayaa Soomaaliya bulsho ku qotanta shaqo, sinaan caddaalad iyo nabad.

Waxaase nala gudboon in la iloobin dhibta iyo adayga uu leeyaha dhismaha hantiwadaagg. Iyadoon cadowga gudaha iyo dibedda midna aanu ka raali ahayn ayaa la beddelayaa dhismihii bulshada sal iyo saynsaabba.Wax-soo-saarkii oo xiriir cusub ku qotama, ayaa ayaa la rabaa in sare loo qaado, iyadoo weli aan laga wadafrufurmin kuxiriirnaanta dhinaca ganacsiga dhaqaalaha hantigoosiga ee adduunka. Waa la garan karaa culayska ay arrimahaasi leeyihiin, waxaana lagaga bixikaraa halgan isku-duuban adkeysi, naf-hurid iyo hoggaan tiisan oo cuskanaya aragtida hantiwadaagga cilmi ah.

## 1. ARRIMAHA XISBIGA

JAALLAYAAL,

Sidaan ka warqabno Xisbigu wuxuu dhashay 1da Luuliyo markii Shirweynihii Asaasku doortay Golaha, Dhexe Guddiga Baarista, Guddiga Siyaasadda, iyo Xoghayaha Guud.

Golaha Dhexe Fadhigiisi 1aad ee ahaa saddaxda kulan- 30kii Juun, 2dii iyo 4tii Luuliyo-wuxuu fuliyey hawlaha soo socoda:-

1. Wuxuu isu qaybiyey 17 Hoggaan si uu si faacan ugu guto hawlaha badan ee kala beegan noolasha Ummadda iyo Xisbigaba. Kala-qaybiskaasi wuxuu fududeynayaa sidii Golaha Dhexe u hoggaamin lahaa waaxyaha siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqancay Wasaaradaha Madaxdooda.
kaba. Waxay taasi keentay isbeddel sahlan oo ku dha

2. Wuxuu Golaha Dhexe doortay Guddiga Kormeerka oo hawshiisu tahay inuu hubiyo in shaqada Xisbiga loo qabanayo sida Keerku dhigayo iyo in la ilaaliyo is- maqalka iyo is-maamulka waajibaadka Xisbiga ka mid ka ah.

3. Waxaa tusmo loo dhigay hawlaha Hoggaamada Golaha Dhexe ee kala duwan, meelaha ay ku kulmayaan iyo hay,adaha dawlada ee ay la shaqeynayaan.

4. Waxa la faraya Guddiga Siyaasiga iyo Hoggaamada inay u hawl galaan sidii dhismaha Xisbigu ugu fidi lahaa Gobollada, Degmooyinka, Tuulooyinka iyo heerka unugyada.

5. Hoggaamadu waxay dejisteen qorsho iyo barnaamijyo ay ugu tala galeen waqti gaaban iyo waqti dheer. Barnaamijyadaas waxa loo soo bandhigay fadhiyadii Hoggaamada oo waa laga hadlay. Qodobodo laga dooday waxa ka mid ahaa sidii Hoggaamaddaasi loogu dejin lahaa waxa ay u baahan yihiin dhinaca farsamada iyo tan dadkaba si ay hawshoodu si habsami ah uga hirgasho. aa

Muddadii gaabnayd ee ka soo wareegtay fadhigii 1aad ee Golaha Dhexe ee Xisbiga qaab-dejintiisa iyo maamulkiisa dhexe hawlo badan ayaa laga qabtay:-

1. Bilawgiiba waxa xubnihii Aasaasyaasha loo furay tababarro ku saabcan xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga. Tababarradaas loo furay xubnaha Gobollada, Degmooyinka iyo magaala-Madaxda Muqdisho, barashada iyo dhuuxidda qodobada iyo ujeedooyinka barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga ka sakow, waxay dadkaas u suurta geliyeen inay kumaan, isbartaan, wada doodaan oo ay markaas sii adkaato isku duubnaanta xubnaha Xisbiga ee meelaha kala durugsan ka kala yimid. Iskuaragtida ay tababaradaas ka korodhsadeen, shaki la,aan, waxay fududtysay waxatar weynna u tartay xubnahaas marka ay damcaan inay dadka xubno ka noqan doonaanxisbiga ka dhaadhiciyaan mas,aladaha xisbiga oo idil.

2. Si aad ah ayaa loogu dadaalay in dadweynaha laga dhaadhiciyo dhismaha iyo hawlaha Xisbiga cusub ee horusocodka ah. Sidaanu dhawr jeer oo hore u tilmaanay xisbigu ma gudan karo waajibaadkiisa haddii aannu si adag ug-u xirneyn dadweynaha. fulinta arrintan waxa laga xilsaaray qalabka warfaafinta. Xubnihii Aasaasayaasha ahaa qayb weyn ayey ka ciyaareen markii ay ku laabteen meelahoodi. Waxaa intaas wehliyey in dhawr Wasiir oo ku jira Golaha ee XHKS, iyagoo hoggaaminaya wufuud Goballada iyo Degmooyinka u baxay ay dadweynaha u sharaxeen kaalinta XHKS iyo marxaladda cusub ee Kacaanka Soomaaliyeed foodda la galay.

Booqashooyinkaas oo u dhexeeyey muddadii Juulay iyo Oktoobar waxay si baliaaran u faafiyeen qoraalkii uruursanaa (Dokumentigii) ee ku saabsanaa Barnaamjka iyo Xeerka XHKS ku dhaqmayo.

3. Madaxda iyo madax-Xigeenka Hoggaamada Golaha Dhexe ee Xisbiga ayaa iyana 3dii bilood ee u dambeeyey u ambabaxay Gobollada iyo Degmooyinka iyagoo wadciga iyo duruufta ka taagan darsaya sidii loogu sii gool xaari lahaaa dhismaha ururrada xisbiga heerar gobol iyo kuwa degmaba.

Marka halkaas la marayo, waxaa habboon in lagu hakado arrin ku saabsan Xisbiga xubnihiisa waqtigan bilowa ah. Waxaa inoo cad in dadweynaha Soomaaliyeed halgan dheer soo maray, halgankaas oo abuuray kaadir rag iyo haweenba leh oo Bilaw siyaasadda u bislaaday. Muran kuma jiro in muddadii 7da sano ee tjaabada Kacaameed dalkeenna ka socotay ay inaga kaalmaysay hubinta Kacaannimada Jaallayaasha Xisbiga ka tirsan. Toddoobdaaas sano halgan iyo hawl weyn ayaa iasoomaray, waxaanalagaaray guul badan. Ololayaal dhib badan iyo iyo mashaariic qaayo leh ayaa la hirgeliyey. Dabiicadda qudheeda waxa laga muutay wacdaro xoog leh, sida abaarihii dalkeenna ku baahay. Olalayaal ku saabsan fidinta barashada siyaasadda ayaa dalka oo idil oo la gaarsiiyey. Arrintaas oo dhammi waxay dedejiyeen bislaynta garaadka siyaasiga ee hormooka hawlwadeenka ahi. In badan oo dhabbada inala haysay tan iyo 1969 ayaa gaabis noqotay oo dhexda inakaga hadhatay. Hase yeeshee, tijaabadii adkayd ee aynuu soo marnay waayo-aragnimada taariikhiga ahyad, waxay keentay in aynu xulad wanaagsan saldhig uga dhigno aasaasidda Xisbiga. Xuladkaas oo ka koobnaa daa dhan 5,732 qof. kuwaas oo ka soo qayb galay shirweynihii aasaaska Xisbiga.

Hubaal waxa ah in Kacaanyahanka taariikhda Ummaddeennu abuurtay uu aad uga badan yahay tiradaas ka qayb gashay shirweynihii xisbi-aasaaska. Suu,aasha markaas ina hor imanaysa waxay tahay, miyaanay xaq ahayn oo habboonayn in dadkaasi ku soo biiraan Xisbiga jawaabtu waa haa ! ! Sida loo xulay iyo meelaha laga keenayo iyo sida loogu soo carayo xisbiga, dhammaan waxay ahaayeenhawlihii loo xilsaaray madaxda Hoggaamada aan qodobada 3aad kaga soo warannay. qaabkii iyo tallaabooyinkii hawshaas loo marayey waxay ahaayeen kuwan soo socoda:-

a — marka laga billaabo 16.8.76, xubnihii Golaha Dhexe ee Xisbiga ee hawshaasi ku taxaluqay, waxay u kala baxeen Gobollada iya degmooyinka dalka. Waxay ku dhaqaaqeen sidii ururrada looga dhisi lahaa meelahaas. Qodobka 12 ee Xeerka Xisgiba ayaa si cad u dhigaya qaayaha arrintaasi loo xilsaaray Golaha Dhexe ay ku fadhido. Maanta waxaynu sheegi karnaa in heer qaran ka sokow, Xixbigu ka furan yahay 16ka gobol iyo 82da degmo ee dalka idil. Tirada dadka maanta Xisbiga ku jiraana waa 13,501.

b — Habka loo soo xulay aasaasayaasha dame waxay ahayd arrin aad u culus oo ay keentay dhaqsaha loo baahnaa in xisbigu dalka ku fido. Waxaanu loo gutay hawshaas sidii ugu dugboonayd intii karaan ah. Iyagoo cuskanayty tacliimada laga siiyey xarunta waxay wafuuddii Gobollada u baxday la shireen mas'uuliinta, sida Guddoomiyayaashii, Wakiilladii hore ee Xafiiska Siyaasadda, madaxda nabadsugidda; waxay kale oo ay shirar la yeesheen xubnaha xisbiga ee joogay halkaas, ururrada bulshada, iyo guud ahaanba dadweynaha degmada. degmada shirarkaas oo dhan waxay wufuuddu ku baadi-goobayeen inay helaan magacyada dad huran, daacad ah; karti leh, kacaankana la soo halgamay, haatanna heegan u ah. Waxii u soo baxay ayuu wafdi waliba kula soo naqday Golaha Dhexe, halkaas oo iyana hufid dambe loogu noqday. Markii natiija go'an la gaadhay ayaa wufuuddii degmooyinkii iyo Gobolladii ku noqdeen, halkaasoo aasaasayaashii hore iyo kuwii dambeba fadhi yeesheen si loo guddoomiyo Guddiyada Xisbiga. Xubnaha Gudiyadaas loo doortay waxay isugu jireen qaar uu soo xulay Golaha Dhexe, gaar ahaan xafiiska fulinta, iyo kuwo

loo xilsaaray wufuudkii iyo shirka asaaska Xisbiga ee degmadu inuu doorto. Taasina waxay la timid in xeerka Xisbiga qodobbada qaar la beddelo, iyadoo ay kalliftay duruufta adag ee Xisbigeenna cusub dhismihiisu la imanayo. Qodobbadaasna waxa la idiin soo horldhigi doonaa go'aan ahaan si cad u oggolaataan.

Arrinta tababarka kaadirka siyaasiga waxa loo waajahay si habaysan oo nidaam leh. Machadka siyaasadda sare ayaa loo qaaday waana la ballaadhiyey. Wuxuu awood u helayaa Machadku inuu ruduus kala duwan siiyo dad heerka tacliintoodii hore u kala bax-do ka dhexe, sare iyo Jaamicliba. Duruus gaaban iyo kuwo dhaadheer oo hal (1) sano iyo labo (2) sano ahiba way isbarbar soconayaan. Waxa jiraya duruus guud iyo kuwa takhasuus leh oo loola dan leeyahay kaadirid xisbiga ee ka shaqayn doona meelaha kala duwan sida wargeysyada, waxbarashada, ururrada dadweynaha dhinacyada dhaqaalaha (iskaashatooyinka, wakaaladaha, qorshaha iwm).

Iyadoo laga tilmaan qaadanayo wareegtadayadii lambarkeedu ahaa XHKS .XG.058.76 ee soo baxday 21kii Oktoobar, 1976 waxaa la diyaariyey barnaamijka waxbarashada habaysan ee siyaasadda iyo Idiyoloojiyada ah ee xubnaha xisbiga, heer walba. waa inaan teello loo dhigan sidii loola dagaallami lahaa afkaarta burjiwaasiga ah, kuwa qabiilika ah, iyo kuadeegadka loola dan leeyahay in diinteenna iyo hiddeheenna loogu adeegto si dib u socodnimo ah.

Si hawshaas si xilkas ah loogu guto waa in si habboon loogu shaqqeeyaa qalabka warfidinta — Idaacadda, wargeysyada, iwm,waa in la hagaajiyaa horena loo dhigaa barnaamijka waxbarashada dugsiyada heer walba; waa in la sameeyaa duruus iyo aqoon isweydaarsi xisbiyeed, heer hoose iyo heer sareba. Hawlahaas oo dhammi waxay u baahan yihiin cilmi baarid iyo kutubqorid dalka oo dhan lagaga isticmaalo. Waxa farxad weyn inoo ah inuu wargeyskii rasmiga ahaa ee Golaha Dhexe, HALGAN, uu soo baxay kuna beegmay 7-guuradii Kacaanka, isagoo ku qormay afafka Soomaaliga,

Carabiga iyo Ingiriiska Sidaad ka warqabtaan xisbi aan wargeys lahayn waa xisbi la'. Wargeysku wuxuu baahiyaa garashada aydiyoloojiyada, wuxuu isku xidhaa xisbiga iyo hay'adihiisa, isagoo dareensiinaya waayo-aragnimada dadkeenna iyo ta adduunweynaha horusocodka ahba. Si uu waajibaadkiisaas ah waxbaridda kaadirka iyo dadweynaha si fiican ugu guto, wargeyska HALGAN waa in lagu kordhiyaa qoraalkii, dhaliilkii iyo isdhaliilkii waxtar ah oo dhan. Wuxuu inaga mudan yahay in aad loo akhriyo, dadweynaha lagu baahiyo. Sidoo kale waxan ku dhiirrinaynaa ururrada xisbiga ee gobollada inay meeshii iyo markii suuragal ah samaystaan wargeysyadooda, sida naga soo gaadha gobolka Waqooyi — Galbeed.

## URURADA BILLAWGA AH WAA GUNDHIGGA XISBIGA

Unugyada xisbigu waxay matilayaan ururrada bilawga ee XHKS. Unugyada waxa la amray in laga dhiso oo idil. dhaqangelinta hawshaas oo wada dhammeystiran. ka hor fadhiga ee Golaha Dhexe waa arrin qiima weyn u leh gudashada dambe xisbigu gudanayo xilkiisa. Unugyada daxay gutaan waajibaad wejiya badan leh:

Sida:

I— Waxay iqtiraacaan xubnaha cusub ee soo gelaya xisbiga;

II — waxay tababar ku saabsan mabaadi'da iyo hirgeilnta hantiwadaagga cilmiga ku dhisan siiyaan dadka xisbiga ku jira iyo kuwa raba inay soo galaanba.

III — Waxay si haw.karnimo leh uga dhex shaqeeyaan dadweynaha iyagoo ficinaya dacaayadda xisbiga iyo urursanaanta hawlihiisa.

IV — Waxy ku dhaqaaqday kicinta dadweynaha si loo kordhiyo wax soo saarka iyo xaqiijinta qorshaha dalka loo dejiyey, iyagoo adkaynaya nidaamka, hawl-wadidda iyo tacab kordhinta waafaqsan habka **hantiwadaagga.**

V — Waxay kormeeraan, ilaaliyaan, kana warbixiyaan sida talooyinka iyo tusaalooyinka xisbiga iyo dawladdu uga dhaqan gelayaan meelaha ay joogaan. Waxay ka warramaan oo kale wixii dhaliil ama khaladaad ah ee ay la kulmaan. Waxay ku dadaalaan sidii kor loogu dhigi lahaa nolosha dadweynha xoogsatada ah.

IV — Waxay kaalmo weyn u geystaan xubnaha sare ee xisbiga si ay hawshooda ugu guuleystaan. mar walbana warbixin sugan ayey u soo tebiyaan.

Intaas oo idil waxa innooga caddaan kara sida guusha iyo fashilaadaba looga arki karo wax qabadka Unugyada Xisbiga. Taasaana ka dhigtay dhismaha Unugyada arrinta maanta ugu qaayo weyn ee inna hor taalla.

Unugyada Xisbiga oo hawshoodu isku dubbarridan tahay waxay hubaal siinayaan xididdadii uu ku taagnaan lahaa iyo saamayntii uu si wax ku ool ah u saamayn lahaa nolosha dadweynaha. Waxaynnu

wada xusuusannahay, markii la dhisay Golaha Dhexe ee Xisbiga, Guddiga siyaasiga iyo Guddiga kormeerka, waxay afmiinshaarku faafiyeen in Xisbigeennu madax leeyahay, jidhse aanu qabin. Intaas waxa soo raaca, markii ak arki waayeen innagoo makroofan dadka la dhex yaacayna oo ka cadsanayno in qof walba Xisbiga soo galo. inay isku dayeen inay jaahwareer ku ridaan dadweynaha iyagoo ka faa'iideysanaya qabyaaladaii iyo qaskii ay ku kici jireen axsaab ku sheeggii jirey Kacaanka ka hor. Waxaynu wada ogsoonnahay in axsaab ku sheeggaasi aanay dadkii ku jirey siin wax tacliin siyaasi ah, inaanay ku dhiirrigelin in wax soo saarka la kordhiyo, in la hubiyo in tallooyinka Xisbigu si habboon u hirgasho, iwm. Dhammaantood ma qabin urur cilmi ah oo ku dhisan habka Unugyada ee ah ururrada billawga ee Xisbigeenna.

Arrimahaas oo dhan awgeed, ayaa marka aynu dhammeystirno dhisidda Unugyada dalka oo idil, ay quusan doonaan afmiishaar kasta iyo intii kacaanka liddi ku ah oo idil. Halkay ugu fadhiyeen inay arkaan dad iska horjeeda, iyo makrafoonno lala dhex xulayo magaalada, waxay ku argagixi doonaan dhismt Unugyo oo aynu ka hirgelinno meela yowga laga shaqeeyo, dugsiyada, hay'adaha kala duwan, iyo wakaaladaha Dawladda, iskaashatooyinka, Warshadaha, Beeraha, Ciidammada Qalabka Sida iyo Golayaasha Xaafadaha. Xubnaha Unugyada iyo dad ka u sharxani waxay helayaan fursado wacan oo ay si dhab ah garaadkooda siyaasiga ah ku kordhiyaan, ugana qayb qaataan mashaariicda iskaa wax u qabso, si ay tacab kordhinta gacan weyn uga geystaan, si ay u tababaraan Jaallayaasha cusub ee Xisbiga ku soo booray. Hawshaa adag iyo habkaas cilmiga ahi waa mid aanay dib u socodka ka soo horjeeda kacaankeenna waxba ka aqoon. Muddo aan dheerayn, dadweynaha Soomaaliyeed beenaha xisbiga laga faafiyo way ku qosli doonaan; waxa u caddaan doonta in xisbigeennu leeyahay madax aqoon, xilkasnimo iyo hawlkarnimo leh iyo xubno dhismay oo hawshooda ka soo dhalaala dalka oo idilna ku firirsan gees ka gees. Dhismaha Unuqyadaasi waxay si lixaad leh ugu adeeganaya sidii mabaadi'da guud ee u dejisan hawlwadidda xisbigu u u dhaqan geli lahayd. waxay dhammaantood ku hiranayaan mabda'a dimuqraadiyadda Guddoonka dhexe ee dhextaalka u ah fulinta hawsha xisbiga iyo kala dambaynta loo baahan yahay si nidaamka suubban waafaqsan. Waxay dimuqraadiyaddaas runta ahi baraysaa xubnaha xisbiga oo idil inay si cad oo geesinnimo leh, iyagoo u madax bannaan uga qayb qaadan doodda, muranka, intaan go'aan la gaarin. Marse haddii go'aan la gaaro waa in xubnaha xisbiga meel kasta ha joogeen eh loo wada dhaqan geliyaa sidii qof keliya. Taas micnaheedu wuxuu yahay in hay'adaha hoose ee Xisbigu u hoggaansanaadaan kuwa sare, tirada yarina u hoggaansanaato tirada badan ee doodda kaga raysay.

Nidaamka dishibiliinka, ama kala dambaynta noocaan ahi wax weyn ayey ka taraysaa hawsha iyo waxqadabka xisbiga. Hadaï badan oo aan go'aan adag lahayni wuxuu Xisbiga u rogayaa meel lagu murmo oo keliya, oo aan nacfi taariikheed lahayn. Sidoo kale, haddii aannu jirin wada tashi iyo wada hadal xilkas ahi, wuxuu noqonayaa dhismaha xisbigu biroqraariyad qallafsan oo go'doon ka ah dadweynaha.

Unugyada xisbiga waxaa kaloo la gudboon inay si aad ah u fidiyaan ku dhaqanka mabda'a dhaliilka iyo isdhaliilka. Waa in la dabargooyaa dhammaan wixii coodooyin iyo dhaqan-xumo laga dhaxlay gumeysigii. Unugyada waa inay bartaan in kulammadooda ay si cad u soo bandhigaan ra'yi iyo talo waxay qaaban. Qawlka lays dhaafsanayaa waa inuu noqdaa mid mas'uul oo xilkas ah sida marka laga hadlayo waxtarka ama waxtar la'aanta uu leeyahay qof Xisbiga xubin ka ahi Qofka codsada soo geliin Xisbiga u soo qortaa goobjoog aynu ka noqon karaa fadhiga lagaga doodayo aqbalaaddiisa, faa'iido ma laha in kulanka iyo fadhiyada Xisbiga ururradiisa wax la kala qarsado; ka bacdina maqaayadaha iyo meelaha fagaaraha ah laysku xanto ama dib ka hadal ka dhaco. Marka qof gef galo waxa habboon in si cad oo daacad ah oo naasax ah loogu sheego, oo laga koro wejikala- qarsadka ku imaan karta, saaxiibtinnimo, xigtonnimo, iwm, iyadoo la tixgelinaayo in xilkasdarrada noocaas ahi dhaawac weyn u leedahay xubnaha Xisbiga ee arrintu khuseyso iyo xisbiga guur ahaanba. Fadhiyada ururrada unugyada waa dugsi lagula dagaallamo waxyaalaha fiisha xun ee liddiga ku ah sharafta, sumcadda iyo xil-gudashada xisbiga. Ma aha oo keliya in dadka ku jira iyo kuwa soo gelayaba la baro inay si habboon wax u dhaliilaan ee isla markii waa inay bartaan in la qaato dhaliilka iyaga ku saabsan, taasoo layska dhaafayo gunuunaca iyi gujo hoosaadka aan macnaha lahayn. ku camal falka mabda'a toosan ee ah «dhaliilka iyo isdhaliilka» waxay tusaysaa sida Xisbigeennu uga duwan yahay, gun iyo guudba axsaab-ku-sheeggii iyo ururradii taarkhda Ummaddeena soo maray. Inta hawsha lagu xadfan yahay, khalad iyo gefba waa dhacayaa. Waase in lagu dadaalo in uunu dhicin, hadduu dhacose waa in la baaraa, degdegna loo saxaa. Unuqyadu waa inay xubnaha xisbiga baraan inay yeeshaan

dhiirani iyo wax- abuur. Hagaajinta Hawluhu, ha ah-aato siyaasad, dhaqaale amaba daafaca kacaanka ah. waxay u baahan tahay in haika mushkiladdu ka dhacday xılkeedii laga helo. Taasina waxay keenay-saa in xubnuhu wax is-baraan, waayo-aragnimo iyo wax-akhrisba. Midhahaasna waa inay u gudbin karaan dadweynaha xoogsatada. Sidaas ayuu Xisbi-gu ku kasban karaa ixtiraamka iyo qaddiraadda dad-weynaha. Sidaas ayuu ku mudan karaa magaca «hor-seedka runta ah ee dadweynaha»

Xisbiga gudihiisa waa in laga xoreeya keli ahaan-shaha oo lagu fidiyaa wadajirnimo iyo ısku-tiirsa-naanta xubnaha oo idil. Ururrada Xisbigu waa inay xubnaha oo dhan ku tababaraan feejignaanta iyo sidii ay hay'adaha sare ee Xısbiga uga soo gudbin lahaayeen waxa khaıadaadka, gefafka, iyo dhibaha aynaan awood u lahayn inaynu inagu aragno. Xisbigu waa inuu dhammaan xubnihiisa oo idil isku-duubı karaa si aynu u noqonno itaal kacaanka dhaqso gaar-siin kara ujeeddadiisa ah dhismaha bulsho Soomaali-yeed ee hantiwadaag ah oo horumarsan.

## XISBIGA IYO DADWEYNAHA

Barnaamijka Xisbigu wuxuu ku nuux-nuuxsaday in ay dhalanteed iyo riyo ahaan lahayd, haddii loo qaato in xisbiga oo qur ahi kari karo inuu dhi-so bulsho cusub.

Hantiwadaagg waxaa la dhisi karaa oo keli ah, markii dadweynuhu raacsan yahay Xisbiga. Si loo fuliyo gebi ahaan waajibaadka dhısmaha hantiwa-daagga, Xisbigu wuxuu cuskanayaa shaqaalaha, bee-raleyda, raacatada, ganacsatada yaryar, Ciidammada Qalabka Sida iyo Aqoonyahannada horusocodka ah. Xoogga Xisbigu wuxuu ku jiraa, kuna xiran yahay sida hadba loogu xiro dadweynaha».

Taas micnaheedu waa ın xubnaha Xisbigu ısu qaataan inay yihiin horseed dhab ah, horseednima-dooda ku muujiyaan shaqo, dhab iyo naf hurnimo ah, inay kor u qaadaan nolosha dadweynaha dhinac-a maadiga, bulshada, dhaqanka iyo dhınaca nabad-gelyadaba. Xubnaha xisbigu waa ınay ku xirnaan dadweynaha oo kaashadaan xushmaddiisa, helaanna kalsoonidiisa. Si ay taas ku gaaraanna waa in ay du-sha u ritaan culayska hawl iyo xilkasta oo adag. Xubnaha xisbigu waa ın ay iska ilaaliyaan dan gaar ah, waana ın ay ka fogaadaan xukun jacayı iyo wax kasta oo iyaga iyo dadka kala fogeynaya. Xubin-ta xisbiga ee ammaanta mudan tusaalana laga qaa-dan karaa waa xubinta kartideeda isugu geysa kor u dhigidda tacabka, horumarınta waxbarashada iyo caafimaadka dadka. Ma aha xubinta xısbigu tu xa-fiis iyo amar laga bixiyo oo keli ah ku eg. dham-maan xubnaha Xisbiga waa in ay xil dheeraad ah dusha ku qaadaan xılkaasoo ka siyaado ah shaqa-dooda gaar ahaaneed. Xisbiguna waa ın aanu xubni-hiisa ugu dul yeelan haddii ay ka qayb qaadan waayaan hawlaha tacab dhalinta, waxbarashada iyo nolosha bulshadaba. Haddii arrimahaas oo kale oggo-laado horseednimadiisii buu dib uga dhacayaa, dad-weynaha wuu ka go'ayaa.

Xisbigu waa inuu dadweynaha la yeeshaa xiriir adag oo kicın iyo abaabul ah. Sidaas darteed Xisbigu waa inuu fiiro gaar ah u lahaadaa hagaajinta joog-tada ah ee dhismaha iyo hawsha ururrada bulshada. Ururrada bulshada, iyaga oo mar kasta hoggaanka Xi-sbiga ku xiran, ıyaga iyo Xisbngana Hoggaanka Abaa-bulka ee XHKS, isku xıro, ayey haddana u baahan yi-hiin in loo dejiyo sharciyo cusub oo salka ku haya kaalinta ururrada bulshada laga rabo hadda in ay gu-taan, gaar ahaan ka dib markii Xisbiga la dhisay, Ma-rka sharciyadaas la dejinayo waxaa lagama maarmaan ah in loo fiiro yeesho tijaabadii Xafiiskii Siyaasadda ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka uu soo maray muddadiiuu dhisnaa. Waxa kaloo loo baa-han yahay in iyana la derso tijaabooyinka dalalka han-tiwadaagga ah kuwa hore u maray iyo kuwa inno la heer ahba.

Ka faa,iideysiga tijaabooyinka dalalka waxay innagu khasbaysaa ınaynu isla mar ahaantaa wax cusub oo ka imanaya duruufteenna gaar ahaaneed ku darno. Waa inaynnu ka foggaanno, inaynnu wax kasta dalal-ka kale ka soo min guurinno, inagoo fiiro u lahaan wixii waayaheenna u cuntamaya iyo wixii kale. Taa-soo dhibaato u keeni karta hirgelinta hantıwadaagga ee dalkeenna.

Ururrada bulshada-kuwa shaqaalaha, dhallinyara-da Haweenka iyo Guulwadayaasha-waxay u baahan yihiin in loo dejiyo sharciyo cusub iyo qorallo iyo ba-rnaamijyo ay ku shaqeeyaan. Kuwaasoo si habboon ula socda barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga Hantiwa-daagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Marka hore loo marinayo dhismaha iyo shaqada ururrada bulshada waa in mar kasta saldhig looga dhi-go mabaadi,ida dimaqaraadiyada Guddoonka Dhexe iyo kan dhaliilka iyo is-dhaliilka.

Sida Xeerka Xisbigu tilmaamayo waa in Xisbigu ma-gac dhebidda ku qoraa jagooyinka waaweyn ee ururra-da bulshada. Jagooyinkaas waa in ay qabtaan dad loo xulay oo u qalma. Jagooyinka sare ee magacdhebidda waxaa dejin doona Golaha Dhexe ee Xisbiga. Guddi-yada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay

magacdhebiddooda dejin doonaan Jagooyinka ururrada bulshada ee u dhigma.

Barnaamijyada iyo xeerarka ururrada bulshada waa in la dhammeystiro oo Golaha Dhexe ee Xisbiga la soo hardhigo shirka caadiga ah ee soo socda, si looga doodo loona guddoonsho. Arrintaas waa mid aad u muhiim ah oo taabanaysa xiriirka Xisbigeennu la leeyahay dadweynaha. Dhinaca kale ururrada bulshadu waa saldhigga Xisbigu ka qaato, had iyo jeer kaadirka cusub. Sidaa darteed waa inuu Xisbigu kor u qaadaa abuuridda kaadirka ururradaas, hawshana waxaa kaalin weyn ka qaadan doona Machadka Culuunta Siyaasadda ee hadda la ballaarin doono.

ISBEDDELKA GUDAHA EE SIYAASADDA IYO MAAMULKA

Asaasidii XHKS bishii Luuliyo, 1dii, 1976 waxay lagama maarmaan ka dhigtey in la beddelo oo hore loo mariyo dhismaha iyo maamulka dalka. dhismaha ururrada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay keentay in loo baahday in dib loogu noqdo sharciyadii Dawladaha Hoose ee hore u jirey; sharciyadaas iyo isbeddelo maamulkeeda oo kale waxaa looga jeedaa in Xisbigu si habboon gacanta ugu dhigo hoggaanka dalka dhinaca siyaasadda Dawladda iyo arrimaha bulshadaba. Xisbigu wuxuu dejin doonaa barnaamijyo iyo siyaasado cad oo waqtiga dhaw iyo fogba ku lug leh, kuna dhisan daraaso iyo baarid cilmi ah, wuxuu kormeeri doona lana socon fulinta siyaasaddaas. Siyaasadahaas mar kasta waxay taabanayaan nolosha dhaqaalaha, siyaasadda, bulshada iyo dhaqanka ee dalka. Saldhigga siyaasadahaasi mar kasta waa barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga. Habka Xisbigu Maamulka iyo arrimaha bulshada ku hoggaamiya waa qancin caddayn, tusaaleyn, garansiin , aydeoloji ah iyo abaabul joogto ah.

Inkasta oo Xisbigu hoggaanka siyaasadda dalka hayo, haddana ma beddelo, mana qabto hawsha maamulka dawldda, hay,adaha dhaqaalaha, Wakaaldaha iskashatooyinka iyo ururada bulshada . Xisbigu waa in uu suura geliyaa horumarka wax qabadka iyo kartida hay,adahaas iyo in ay iskood u muujiyeen kartidooda, waana in uu tusaaleeyaa sidii ay firfircooni ugu shaqan lahaayeen. Xisbigu waa in uu ku dadaala sidii hay,adahaasi u gudan lahaayeen xilkooda.

Habka maamulka dawladaha Hoosse waa in uu mar kasta ku soscdo Hoggaanka Xisbiga. Marka waayo-aragnimo inoo kororto Xisbiguna dalka dhammaantii ku baaho, ayaa maamulka hoose ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Tuulooyinka fiiro dambe marlabaad loo yeelan doono, taasoo kolkaas la tijaabin dhismaha Golayaasha dalka ee la dooran doono. Doorashooyinkaas waxay noqon doonaan nooc cusub ah oo ka duwan kuwii hore ee dawladihii dib-u-socodka ay dalka uga qaban jireen ee ku dhisnaa qabyaaladda. markan daneystinnimadii hore waxa beddeli doona garasho salka ku haysa dimuqraadiyadda Guddoonka Dhexe. Dhammeystirka arrimahaasi waxay suura gelin doonaan in la dejiyo dastuur cusub oo kacaan ah muujiyana astaamaha dimiqaraadiyadda hantiwadaagga ah;kuwaass oo ah:-

a — Xisbiga horseedka

b — Ururrada bulshada oo ah Xiriirka xisbiga iyo dadka

C — Habka Golayaasha dadka degmada, Gobolka iyo ummadda oo la doorto, suurto gelinayana ka qayb galka dadweynaha ee arrimaha bulshada iyo maamulka dawladda iyo guud ahaan dalkaba.

XIDHIDHKA DIBEDDA.

JAALLAYAAL,

Tan iyo intii kacaanku dhashay siyaasaddeennu dibeddu waxay ku socotay dhabbo cad oo aan wax murug ahi ku jirin haba yaraatee. Iyadoo laga iftiinqaadanayo xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee kacaanka waxaynnu si fiican u qeexnay oo u lafagurnay xaaladda adduunka taagan, xoogagga ku loollamaya, danaha la isku hayo, iyo halka aynnu kaga beegannahay arrimahaas ooidil, iyadoo isha lagu hayo isbeddelka Kacaannimo ee aan ka dhalinayno dalkeenna gudihiisa.

Munaasibad badan ayaan wax kaga taabannay qodobbada ay ku fadhido mabaadi'da siyaasaddeenna dibedda ee, sida Barnaamijka Xisbigeennu dhigayo « muraayad u ah dhuuxa iyo dulucda kacaanka ah ee siyaasadda gudaha». Ugu horreyn waxaan faahfaahin u baahnayn ee sida qorraxda u cad in kacaanka Soomaaliyeed liddi ku yahay, dagaal adagna kala horjeedo gumeysiga, imberyaaliyadda midabtakoorka, sahyuuniyadda, kaddeeka iyo isku-kor noolaadka cayn kastaba ha ahaadee. Waxan ka mid nahay lana jirnaa xoogagga horusocodka bani aadanka.

Waa kuwee xoogaggaasu? Bal aan ku bilowno bahdeenna Carbeed. Halganka dadyowga Carbeed maanta kula jiraan gumeysiga sahyuuniyadda iyo imberyaaliyadda waa mid qadhaadh. Wuxuuna taxnaa muddo dheer tan iyo dagaalladii qarniyadii dhexe ee ku magac dheeraa «dagaalladii Dunida». Isagoo diinta ku soo dhuumanaya waxay ahayd ulajeeddada

gumeysigu inuu midiidiyo ummadda Carbeed oo markaa magac iyo maamuusba ku lahayd adduunweynaha, inuu, isagoo xadaya ilbaxnimadeeda iyo astaamaha horukaceeda, iyadna halkaa ku hayo oo u diido horumar. In Carabtii berigaasi gaaritay ujeeddada dhabta ah ee gumeysiga waxa ka marag kacaya dagaalladii iyo tabihii geesigii Saalaxa Diin Al-Ayuubi oo ku aflaxay inuu mideeyo Carab, Muslin iyo Masiixiba, si ay sharaftooda iyo madaxbannaanidooda uga daafacaan gardarrada shisheeyah.

Markii ay sancada burjuwaasiyaddu gaar ahaan sancada hubku hore ugu martay ayey u suurtowday gumeysiga Yurub inuu ka lib helo Ummadda Carbeed isagoo xoogaggeedana kala firdhinaya. jillaafooyinkaa muddada dheer socday waxa midhaheedii noqdeen abuurista Israa'iil iyo gardarradii 1948kii. Tan iyo maantana waxay Israa'iil tahay daaqadda ay imberyaaliyaddu uga soo gasho Bariga Dhexe si ay u fushato danaheeda. Waxaa markaa cad, oo muran ma doonto ah, in halganka Ummadda Carbeed ugu jirto horukaceeda iyo midnimadeeda iyo dagaalka ay iska a horjeedaan sahyuuniyadda ay yihiin isla markii u noqday dhaqdhaqaaqa gobannimo doonka Geesiyaalka reer falastiin horukaca halganka dadyowga Carbeed. Iska-horimaad hubaysan oo ay iskaga horyimaaddaan Carabta iyo sahyuuniyadda, ama qas iyo qalalaase, dagaal sokeeye, oo laga dhex dhaliyaa Carabta. sidii ka dhacday dalka Lubnaan oo kale, waxa had iyo jeer salkiisu yahay xaqdarrada lagu hayo dadka reer Falastiin iyo dhiidhiga ay ka dhidhinayaan.

Dadka Soomaaliyeed isagoo garowsan xaqa iyo horukacnimada qaddiyadda Carbeed, dagaalka kulul ee ay kula jiraan cadowga sahyuuniyadda iyo gumeysiga, iyo isagoo tixgelinaya kala maarmaannimada iyo isku midnimada aayaheenna iyo aayaha Carabta guud ahaanba,, wuxuu had iyo jeer garab taagnaa halganka dadyowga Carbeed, xidhiidh qota dheerna la lahaa dal walba oo ka mid ah. Barnaamijka Xisbigeenna arrintaa iyada ah aad buu ugu nuuxnuuxsaday.

Tan iyo intii ka dambeysay fadhigii koowaad ee Golaha Dhexe waxan la yeelannay is-weydaarsi dhawr dalal Carbeed heer Xisbi iyo heer Dawladeedba.

Shirweynihii madaxda Carabta ee u dambeeyey ee lagu qabtay Magaalada Qaahira, J.D.S. waxan kaga qayb galnay wafdi lixaad leh oo uu hoggaaminayey Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. shirkaas oo ajandihiisu ahaa in xalli nabadeed oo dhab ah loo helo mashaqada ka taagan dalka Lubnaan, J.D.S. kaalin wacan ayey ka qaadatay sidii loo joojin lahaa dhiigga ku qubanayey Lubnaan.

Waxaan shaki ku jirin in booqashada lays weydaarsadaa, heer Xisbi ama heer dawlad ha ahaatee, ay keenayso sii xoojinta si afgaradka, iskaashiga, wada tashiga, dalalka iyo axsaabta Carbeed dhexdooda. Booqashooyinka isdabajoogga ahaa waxaa ka mid ahaa kuwii ay dalkeenna ku yimaadeen Madaxweynaha Jamhuuriyadda Carabta ee Yaman, Ibraahim Al-Xamdi, Xoghayaha Guud ee Midowga Ururka Siyaasiga ee Jabhadda Qowmiga ee Jamhuuriyadda Dadka Dimuqraadiga ee Yemen, Jaalle Cabdulfataax Ismaaciil, Xoghayaha 1aad ee Xisbiga Shuuciga ee Ciraaq, Jaalle Casiis Maxamed; Wasiirka Arrimaha Dibedda ee jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Dadka Yemen, Jaalle Maxamed Saalax Mudiic. Kullamadii dhex maray wufuuddaas booqashada dalkeenna ku timid iyo madaxda XHKS, waxay meel isla dhigeen sida meel looga wada jeesan lahaadagaalka lagaga horjeedo cadawga Ummadda Carbeed, iyo sidii kor loogu qaadi lahaa isweydaarsiga waayo-aragnimada dalwalba iyo Xisbi walba leeyahay. Wufuuddu muddadii ay joogeen dalkeenna waxay fursad waneegsan u helaan inay booqdaan meelo badan, dad badanna la kulmaan, taasoo si dhab ah ugu bandhigtay tijaabada kacaaneed ee JDS ka waddo Geeska Afrika. Booqashada dhammaadkeedii, waxa XHKS iyo Xisbiga Shuu«ciga ee Ciraaq kala saxeexdeen heshiis iskaashi oo ku saabsan dhinaca war-iswyedaarsiga iyo aydiyolojiyada. sidoo kale waxa heshiis dhex maray Xisbigeenna iyo ururka Siyaasiga ee Jabhadda Qowmiga ee Jamhuuriyadda Dadka Yemen, iyo ururrada bulshada ee labada dhinac. Inna kama dahsoona waxtarka weyn ee heshiisyada noocaas ahi leeyihiin Xisbiyada sida ka warqabka tabaha iyo xeeladaha cusub ee imberyaaliyadda caalamiga ah iyo dib u socodku hadba ku dhaqaaqayaan, iyo hadba qaabka ugu habboonsidii wadajir loogaga hor tagi lahaa, dadyowgeennana noloshooda loogu horumarin lahaa. Waxa iyana dhowaan booqasho ugu baxay dalal Carbeed Jaalle Axmed Suleymaan Cabdalla, Xubin Guddiga Siyaasiga, iyo Jaalle Maxamed Cumar Jees, Xubin Golaha Dhexe, iyagoo gaadhsiinaya dalalkaasi farrimo ku saabsan arrimo culus oo xidhiidhka saaxiibtinnimo ee aan dalalkaasi la leennahay ku lug leh.

Booqashooyin iyo kulamo looga gol leeyahay sidii ujeeddooyinkaas looga hirgelin lahaa Afrika gudaheeda ayaa muddadii dambe lagu dhaqaaqay. Haddii halkan qaarkood aan ku xuso waxa jirey kulankii dhexmaray innaga, Madaxweynaha dalka Tanzania, J. Neyreere, iyo Madaxweynaha dalka Muzambiik, Samooro Misheel, ee lagu qabtay magaalada Dar-es-Salaam bishii Juulay 1976. Kulankaas waxa si habsami ah loogu gorfeeyey xaaladda iyo wacyiga maanta ka taagan Koonfurta

Afrika, khiyaanooyinka la damacsan yahay in lagu badbaadiyo nidaamyada midabtakoorka iyo sida xoogagga hirusocodka ahi isaga buhaysan lahaayeen ka hortagga cadowga Afrika. Waxa tallaabadaas sii xoojiyey booqashooyinkii uu Madaxweyne Ku-xigeenka Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax ku kala fidiyey dalka Lesotho, iyo dalka Ugaadha isagoo ka qayb qaadanaya dabbaaldeeggii maalmaha qaraneed ee dalalkaas. Waxa kaloo soo raaca, martiqaadkii uu dalkeennu ku soo dhoweeyey wafdigii uu hoggaaminayey Madaxda Dhaqdhaqaaqa Gobannimodoonka dalka Simbaabwe, Jaalle Joshwa Nkomo iyo wafdigii dhallinyarada dalka Benin, ee uu hoggaaminayey Jaalle Roger Garba oo ah xubin Golaha Dhexe ee Xisbiga Tawriga ee dalka Benin.

Gacan-u-fidinta, wada tashiga iyo adkaynta xiriirka aynu la leenahya xoogagga horusocdka, kuma Afrika oo keliya. Waxa barbar socotey, in fadhigii 1aad ee Golaha Dhexe ee XHKS ka dib loogu baxay soccdaallo dalalka Aasiya iyo Yurub. Waxa hawlahaas ugu muhiimsanaa shirweynihii madaxda dawladah Dhexdhexaadka ee lagu qabtay magaalada Kolombo.bishii Juulay.

Shirweynahaas JDS waxa uga qayb galay wafdi ballaaran uu hoggaaminayey Jaalle Ismaaciil Cali Abokar, xubin Guddiga Siyaasadda ee XHKS. Waxa la wada garowsan yahy in dalalaka dhexdhexaadka ahi, maalinba maalinta ka dambeysa, sii kordhinayaan dagaalka ay ugu jiraan sidii ay dhaqaalahooda kaga xoreyn lahaayeen edegga uu rabo in gumeysiga cusubi ku hayo. Waxay shir walba ku gaaraan go,aanno faraya in dib loo derso xiriirka dhaqaaleed ee ka dhexeeya dalalka soo koraya iyo kuwa aad u horumarsan ee caalamka hantigoosiga, si loo aejiyo heshiis loo wada dhan yahay oo tixgelia danta dawladaha yar-yar ee maalin kasta lagu hayo dhaca. Kala sarraynta iyo isku kor-noolaadka maanta taagan, siyaabaha uu ku yimid iyo habka lagaga bixi karo, wafdigii JDS si cad ayuu u soo bandhigay isagoo mar walba ku nuuxnuuxsanaya in xiriirka dhaqaaluhu ku dhisnaado, sinaan, iyo iskiishi daacad ah, kana baxo amar-Kutaaleynta dawladaha hodanka ee hantigoosiga ah iyo cadaadiska imberyaaliyaddu ku hayso dawladaha soo koraya.

Iskaashi adag iyo wax wada qabsi joogta ah oo dhex mara dalalka horusocodka ah ee soo horaya iyo dalalka hantiwadaaga waa arrin aanay marna xoogagga Kacaanka caalamiga ahi ka maarmayn. Arrintaas muhiimka ah ee sida cad ugu qeexan barnaamijka XHKS, waxa aynu siinay ahmiyaddii ay mudnayd. fadhigeennii 1aad ka bacdi waxa kulan iyo wada hadal saaxiibtinnimo lala yeeshay axsaab iyo dawlado hantiwadaag ah Haddaan kuwii ugu waaweynaa ka soo qabano, waxaad xusuusan tihiin booqashadii uu wafdigii uu hoggaaminayey Jaalle Maxamed Cali Samatar (Xubin Guddiga) Siyaasadda ku tagay magaalada Mosko; wafdigii uu watay Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen ee booqday dalka Jamhuuriyadda Dimooqaraadiga ee Jarmalka iyo booqashadii uu Madaxweynaha Golaha Madaxtooyada J.D. ee Jarmalka ku yimid dalkeenna bishii Setember 1976.

Dhowaanna waxa Jaalle Maxamed Cali Samatar, Xubin Guddiga Siyaasiga ah, ka soo laabtay socdaal dheer oo uu iskugu kala bixiyey dalalka Kuuba, Jamhuuriyadda Dimoqaaraadiga ee Jarmalka, Jekosloofakia, Bulgaariya, Yuguslaafyia iyo labada Jamhuuriyadooa ee Yemen. wafdiga inna kama maqna in kulamadaasu dhidibada u aasayaan xiriirka Saaxibtinnimo ee aynu leenahay dalalka hantiwadaagga, iyo miraha hantida ee ay ka dheefayaan dadyowga horukaca noloshooda heeganka u ahi.

xiriirradaas dibedda ah la galayo, Siyaasadda Xisbigu waa inay had iyo jeer isha ku haysaa sida dunidu maanta ku sugan tahay iyo halgannada ka socda, gaarahaan caalmka Aasiya, Afrika iyo Laatiin Amerika. Geddigood dalalkaasi, oo loo yaaqaan dunida seddexaad waxay muddo dheer ku hoos jireen cadaadiska imberyaaliyadda weji kasta ha lahaatee- ha ahaado gumeysi siyaas· oo toos ah sidii qabsatay Afrika iyo Aasiya, ama gumeysi dhaqaale ah sida Laatiin Ameerika badankoodu ku jirtay.

Dadyowga dunidaasi halgan dheer ayey u soo galeen inay xoroobaan. Halgankaa dheer, ee mid hubaysan iyo mid nabadaba lahaa, mindh·hii laga filaayey in badan buu dhalay.

Maanta dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika wax yar mooyee gobannimo siyaasi wey haystaan. Ha yeeshee, iska kor imaadkii colaadda ahaa ee ka dhexeeyey dadyowga iyo imberyaaliyadda weli ma dhammaan. maxaa yeelay gumeysiga dhuuxiisu waa isku-kor noolaad dhaqaale ah. Kaasina weli waa taaganyahay. Muddadii dheeraydee imberyaaliyaddu ku amar ku taagleysa dunida ee dal walba ay gacanta ku dhigtay waxay xididda u aastay nidaamka hantigoosiga ee ay iyadu ku dhaqmaysay. Waxay meel walba ka dhiirigelisay ama ka abuurtayba, dabaqad burjuwaasi ah oo danaheedu ku xidhan yihiin kuwa imberyaaliyadda. Waxay samaysay hab tacliimeed oo dhaqan guurinaya dalalka ay haysatay, una sahlaya in isku kor noolaadku sii jiro.

Sababahaa ayaa keenay in markii gumeysigii gaboobay la tuuray u haddana isu rogo gumeysi cusub. Taasaana dhalisay in iska horimaadkii iyo halgankiiba halkii ka sii socdaan. Dadyowga dalalkaasi oo hig-

sanaya horumar iyo madax-bannaani buuxda, siyaasad iyo dhaqaalaha, waxay dareemeen maanta in dhabbaha toosani yahay ka hantiwadaagga. Qaar ka mid ahi way mareendhabbaha cad., oo waa kuwo horseedka u ah xoogagga horusocodka ah ee dadyowgaas. Qaarna waxaa weli u taliya dabaqadihii hantigoosiga ee maxalliga, kuna haya habkii ay abbaartay imberyaaliyaddu. Sidaas ayey u kala baxeen. ha yeeshee, maalinba maalinta kadambeysa ayuu sii xoogoobayaa oo badanayaa safka imberyaaliyadda diiddan ee horukaca ku biiraaya. Arrintaasina imberyaaliyaddii way ka argagixisay. Waxay sii kordhinaysaa maanta xeeladaheedii kala firdhiska ahaa, sida ta ay ka waddo Bariga dhexe iyo Afrika, si ay qool u geliso ama u kadiso dalalka horusocodka ah. Waxayse illowsan tahay in socodka taariikhda cilmi yahay. Cadaadiska iyo dulmiga muddo way suurowdaa inay gacanta sare yeeshaan. Had iyo jeer se waxa ka lib keena xaqa iyo horucaka. imberyaaliyadda waxad muddaa inaaney u caqli celin halgannidii ay ku jebiyeen iyada dadyowga Aljeeriya, Kuuba, Fiyatnaam, Mosambiik, Angoola iyo kuwa kaleba. Ama ha caqli qaadato ama yaanay qaadan halganka dadyowgu waa kii hore u sii socda.

## DADYOWGA SOOMAALIYEED EE MAQAN

XHKS, si bayaan ah ayuu Barnaamijkiisa ugu soo bandhigay tallaabooyinka lagu gaarsiin karo ahdaafta aynnu dhigannay. Tallaabooyinkaas waxa ka mid ah in si nabadgelyo ah lagu xalliyo wixii mashaakil ah ee dadyowga addduunka dhex mara.

Khaas ahaan kuwa inaga iyo Itoobiya iyo Kiinya dhexyaal. Inaynaan oggolaan inuu innaga dhex faa'iideysto gumeysigu si uu dab dhexdeenna uga oogo. Hase yeeshee, marka la eego, wararkii dhowaan ay madaxda Itoobiya sii deysay ee aan runta waxba u ahayn waxaa nooga bixi kara in madaxda Itoobiya weli aanay ka waantoobin ama ka korin hufinta isticmaarka. Mawqifka xisbigeennu ka taagan yahay arrimaha adduunka iyo gaar ahaan kuwa ina dhexyaal innaga iyo dawladaha aynu deriska nahay waxay inoo soo jiidday magac wanaagsan, sumcad weyn iyo ixtiraam adduunka dhexdiisa. Iyadoo ay lagama maarmaan tahay in wax ailaaliyo wixii innala soo dersa ay waajib taahy inuunnu u tabaabushaysanno, ayaa haddana ay ku jirtaa insiyaasaddeenna nabad raadiska xaqa ay tahay mid uu xisbigeennu iyo Kacaankeennu ku dhaqmayo. Waxaana taas caddaynaysa markii xisbigu sii daayey maalintii ciidda El-Fitriga ee September 1976

Dhinaca xeebta Soomaaliyeed, maanta meel wacan ayey maraysaa sidii dalkaasi u hantiyi lahaa gobannimadiisa. Shakise kuma jiro in laysku dayayo in dirdiro iyo fadqalallo laga dhex abuuro axsaabta, jabhadda iyo Barlamaaniga Xeebta Soomaaliyeed si loo burburisho midnimadooda, xornimadoodana laysku hortaago. XHKS iyo dawladda kacaanka had walba waxay u guntanayd inay soo kashifto khiyaanooyinka lagu kufinayo gobannimodoonka Xeebta, mar walba talo, hiil iyo boo ayey u fidinaysay gobannimo-doonka Xeebta Soomaaliyeed. Waxaa tusaale inoogu filan booqashadii uu dhowaan Cabdalla Maxamed Kaamil, Ra'iisal Wasaaraha Jabuuti ku yimid Soomaaliya iyo tirada faraha badan ee koox walba leh ee lagu martiqaaday ka qayb qaadashada dabbaaldeggii 7-guurradii Kacaankeenna, iyo wadahadalkii kooxahaas lala yeeshay. Waxaa hubaal ah in arrintaas ay ka dhalinayso is afgarad, iskaashi, wada tishi iyo wax wada qabsad dhex mara dadka Xeebta Soomaaliyeed si ay dhaqso ugu gaaraan madaxbannaanidooda.

## XAGGA DIFAACA.

Halkudhag ay caan kutahay afkaarta horusocodka ee Hantiwadaagga cilmiga ku dhisan wuxuu qabaa: «Kacaankastaa waxba kuma fadhiyo haddii uusan is daafici karin».

Waxaa jirta marka dibusocodka lagala wareego xukunka, ama ku timaado si dagaal ah, ama si nabadgelyo, inay hubaal tahy inuusan marnaba oggolaaneynin inuu is dhiibo, ee waa kan ku dhaqaaqa hab kasta oo uu danihiisa ku gaaro iyo ujeeddadiisa ah in mar labaad xukunka uu soo ceshado.

Xeerkaas waa xeer taariikhi ah waana tusaale laga hayo waayo—aragnimada Kacaannada adduunka iyo duruussta Kacaannadaas horusocodka ah laga faa'iideystay.

Haddaba Kacaankeenna Soomaaliyeed wuxuu maanta guda galay marxalad cusub isagoo ku guuleystay goobo dagaal oo fara badan, wuxuuna ka meel gaarey taabbagelinta balanqaadyadiisa kuwii ugu waaweynaa. Dhisidda xisbi horseed ah waqtigaan Kacaaneed ayaa lagama maarmaan ka dhigaya si heer tayeed loo gudbo, markasta ayadoo la tixgelinaayo duruufta khaaska ah iyo awooddeenna dhaqaale. Sida la ogsoon yahay barwaaqeynta waddanka iyo kor u dhigidda nolosha iyo dhaqaalaha dadka waa in loo helaa xasillooni iyo nabadgeliyo.

Mar haddii la damacsan yahay in tiirar adag loo sameeyo dhaqan dhqaale cusub oo horukac leh daryeelayana danaha dadweynaha kana soo horjeeda tan imperyaaliyadda, rajciyada iyo dabadhilifkeeda waxaa lama huraan ah in hawshaasi xag tiro iyo xag tayaba

looga tabaabusheysto.

Waxaa la ogson yahay oo aan muran ku jirin in halganka Xisbigu uu maanta wadaa yahay ku caalami ah oo ay isaga soo horjeedaan hantigoosadka iyo xoogsatada adduunweynuhu.

Laga bilaabo dhalashadii Kacaanka illaa haatan oo mas'uuliyadda uu la wareegay Xisbiga horseedka ah isagoo sii wada halganka dabaqeed, tilmaan uma baahna qaybta lixaadka leh ee Ciidammada Qalabka sida ku dhaqaaqayaan dhinaca hirgelinta mabaadii'da xisbiga iyo daafacaadda miraha Kacaanka.

Kaalinta taariikhiga ah iyo waxtarka lama ilaawaanka ee Ciidammadeenna, kuna qoran qa... ...ahab ah, waxaa si cad tifaftiran oo markhaati ma doonta ah loogu muujiyey Barnaamijka XHKS.

JAALLALAAL.

Ciidammada Qalabka sida waajib aad u ballaaran ayaa ka saaran hirgelinta mabda'a iyo daafacaadda miraha Kacaanka ay iyagu hormood u ahaanyeen curashadiisa, waxay kaloo yihiin gaarhayayaaasha Xeerka, Barnaamijka xisbiga, dalka iyo danta dadweynaha.

Gudashada waajibaadka kor ku xusan ayaa kh sab ku dhigay in la xoojiyo awooddooda mileteriga ah lana kordhiyo garaadkooda siyaasiga ah. Waxaa hubaal ah, Soomaaliya inay ka mid noqotay adduunweynaha horusocodka ah, garab taagan tahayna xooggagga gumeysi-diidka, hiil iyo hooba siinayso Gobannimodoonka ah, si qaraarna uga horjeedo kuwa addoonsiga iyo kadeedka wada ee xasilloon-darrada iyo khalkhalka ka abaabulaya meelo badan ee adduunka ka mid ah. imberyaaliyaddu isku dayday inay ka fidiso Kacaankeenna dicaayad been ah, ee lagu yiqiinnay, waxay kaloo waayahan dambe xoojiyeen abaabulidda saldhigga ay ka dhisatay badweynta Hindiya ujeeddaduna tahay in baqdin lagu abuuro dadka horusocodka ah ee ka halgamaya geestan Afrika, iyo in afkaarta qiimaha leh ee a h, d a r y e e l i d d a iyo sare u q a a d i d d a x o r n i m a d a hakto, iyo ay baaba'shaan afkaarta Kacaankeenna, xisbigeenna kaasoo ah kii tallaalka siinayey Ummaddaha ku nool Afrikada Bari.

Arrimahaasi aanu kor ku soo sheegnay ayaa, innagoo jecel nabadgelyo, xasilooni, iyo in Ummaddahu wax wada qabsadaan inkasta oo habkooda dhaqan-dhaqaale uu kala duwan yahay, ka dhigay lama huraan in aynu awooddeenna daafaca xoojino.

Waxaa tusaale ahaan loo bixin karaa intii Kacaanku jirey, habeynta Ciidammada iyo sare u qaadidda xirfadda militeriga iyo tan siyaasiga ah oo heer sare la gaarsiiyey.

Waxaa kale oo iyadana u baahan in la muujiyo, markii la guda galay hawshii loogu tabaabulsheysanayey dhisidda Urur siyaasi ah ay barbar socotay hawl adag oo laga fuliyey Ciidammada dhexdooda oo ah dhisidda ciidan hantiwadaagga ah kana soo bixi kara xilka weyn ee horyaalla.

Waxaa la dhihi karaa abuuridda Xisbiyo nooca cusub ahi waxay keentaa dhismo dhammaystiran oo ciidanno nooca cusub ah oo ka soo dhex baxay dabaqadaha saboolka ah ee u halgamaya abuurista bulsho caafimaad qabta kuna dhisan caddaalad, sinnaan, horukac siyaasadeed iyo dhaqaalahaba.

Jaalayaal,

Soo gaarsiinta heerkaasi wuxuu soo jiray muddo badan, hubaalna waxaa ah in maanta awoodda dagaaliyo feejignaantooda heer aad u sarreeya ay taagan tahay, heleenna tababar ku filan awoodna u yeesheen in ay hoggaamin karaan qalabka lagu aaminay kagana guuleysan karaan cadowgooda. Sare u qaadidda xirfada iyo aqoonta militerinimada waxaa bar-bar socotay kobcinta iyo kordhinta garashada siyaasiga ah.

mar haddii waxa la maamulayo uu yahay qofka, waa in afkaartiisa sare loo qaadaa, la baraarujiyaa, lana fahamsiiyaa meesha dantiisu ay ku jirto. Qofku marka uu halgamayo kuna jiro dagaal waxaa waajib ku ah in uu kala garto cadowga iyo saaxiibka, naftiisana u huro afkaarta uu doonayo in ay meel marto, shiishkana ku hayo cadowga dadkiisa iyo dalkiisa.

Barbaarinta iyo fidinta afkaartaasi iyo hirgelintooda waxay ciidamadu u samaysateen una xilsaareen xafiisyada siyaasadda, kuwaasoo intii Kacaanku jirey ilaa maanta fulinaayey hawshaasi adag gaarsiiyeyna bisayl siyaasi ah xubnaha ka mid ah Ciidamaad.

Waxaa la caddeyn karaa in maanta bisaylka siyaasiga ah, feejignaanta, iyo awoodda dagaalku heer wanaagsan ay marayaan, laguna talo jiro in la sii kordhiyo si cadowgeennu marnaba u damcin inuu soo weeraro Jamhuuriyadda Dimoaarqddiga ee Soomaalya, iyo in loo gogol dhigo amni baaxa iyo nabadgelyo, awood u soosa ummaddeenna dhisidda bulsho cusub ee hantiwadaagga ah.

## XAGGA NABABGELYADA

Maxaynu ka qabanay Nabadgelyada?

Dalka Soomaaliyeed iyo dadkiisuba waqtigii gumeysiga iyo musuqmaasuqa ma aqoon dhadhanka nabadda. Haddii aynu dib u fiirinno taariikhdiisii dheerayd waxaa inoo muuqanaaya inay ahayd oy ka buuxday colaad, dagaal iyo isweerar ka dhexeeya

qabiilooyinka iyo dadka isku degmada ah iyo kuwa kala fogba. Arritani waxay ahayd mid meel kasta tiillay oo ka dhici jirtay miyi iyo magaaloba. Goobaha laysku galo waxa ku qudh bixi jiray kumanyaal qof oo Soomaali ah, oo dhalinyaro ahaa oo haddii si kale looga faa'iideysan lahaa ay suurta geli lahayd inay soo hooyn lahaayeen guulo ballaaran oon qiyaaslahayn. Taasi nasiib darro waxay noqotay mid aan marnaba dhicin. Waxa haddaba saldhig u ahaa, Jaaallayaal, dhiigga badan ee qulqulaayey aqoon darida iyo jahliga haystay ummadeena iyadoo intooda badani ahayd dad reer guuraaya oo xoolahooda iyo dabeecadda qalafsani xukumi jireen. Xagga kale gumeysigii dhulkeenna haystay muddada dheer, ee u kala qaybiyey shanta waaxood ilaa iyo iminkana qaarkood ku hoos nool yihiin, dani uguma jirin xasilloonaan, is afgarad iyo nabad ka dhex aloosanta dadkeenna iyo dalkeenna, waayo halku—dhegiisaaba ahaa «Qaybi oo Xukun.»

JAALLAYAAL

Xarakadii gobannimodoonka waddaniga ahayd ee dabayshiisii gaadhay cidhif kasta oo dalkeenna ka mid ah waxay isu soo duday, midaysayna dadkii Soomaaliyeed.

Waxaa la soo maray wagti dhallaan iyo waayeelba ka xanaaqo qabyaaladda iyo asaaska colaadda-kuna abtirsado Soomaali weyn. Lama ilaabaan taariikheed waxaa ah inay ummaddeenna qaarkeed ku gaadhay midnimadaa gobanimadeedii siyaasiga ahayd isla markasna ay halkaa kaga adkaatay gumeystihii Ingiriiska iyo kii Talyaaniga ee Gobollada dalkeenna qaarkiis fadhiyey.

Hase yeeshe nabaddii, xasilloonaantii iyo midnimadii waxay noqdeen waxaan sii waarin, oo ay hadh cad dabaysha raaciyaan talisyadii dalka xukunkiisa gacanta ku dhigay. Waxay qolofta ka qaadeen boogihii iyo nabaradii colaadeed ee waayadii hore. Waxaynuu wada xusuusannahay dagaalada, qaska, qalaanqalka, boobka, dhaca iyo tuugnimada ka dhici jirtey geyigeenna idilkii ay magaalo madaxdu ugu horreyso-Soomaaliduna waxay ku mahmaahdaa «Geel duqdiisii durdurisay Maxaad aarankiisa mooday.»

JAALLAYAAL

Arrintani waxay ka m id ahayd sababaha ay Ciidammada Qalabka sida u sameeyeen Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii si ay u badbaadiyaan jiritaanka ummada ay cadawyada badan ee naxariista darani hareereeyeen: Gumeysi, dib-u-socod, iyo dib—u—dhac ohaqaale, aqoon darri, gaajo iwm. Haddaba si loo xoojiyo nabadgelyada, dadkuna xasillooni ku wada noolaado wuxuu Kacaanku ku dhaqaaqay hor iyo horaanba hawlo iyo barnaamijyo waaweyn oo lagu soo celinayo nabadgelyadii dalka.

Waxaynnu meel kasta oo Jamhuuriyadda ka mid ah ka oognay shirar iyo bannaan baxyo aynnu dadweynaheenna kaga dhaadhicineyno, fahamsiinaynaana waxay tahay qabyaaladdu iyo waxay ku fadhido, nuxurkeeda, dhibaatada iyo dibindaabyada soo dhaxal siisey ummaddeenna; iyo in nabadgelyada dhexdooda ahi tahay aasaaska midnimada dadweynaha dulmani ay ku haleeli karaan horumar iyo barwaaqo.
waxaynu garanay in magta iyo wixii la mid ahi adkeynayaan jirrida nabad la'aanta waayo, waxay fududeyneysaa qiimaha nafta aadamiga ah. waxa markaas Golaha Sare ee Kacaanku soo saaray sharcigii Xaaraantimaynayey magta isagoo ku beddelay qofkii naf gooya in isna qudha laga jaro.

Waxaa la baabi'iyey magacyadii Suldaan; Garaad, Islaw, Malaaq, Caaqil, Kaabo-qabiil iyo waxyaalihii kale oo ahaa hadhaaga gumeysiga, waxaynuna ku beddelnay magacyo qumman oo ay ka mid yihiin Nabadoon, Samadoon iwm. Isla markaana waxaynnu u furay duruus iyo hanuunin joogta ah.

Waxaa dalka idilkii ka dhashay oo aynu ka abuurnay Guulwadayaasha ummadda. Runtii, Jaalayaal, lama soo koobi karo kaalinta ay ka qaateen guulwadayaashu nabadgelyada iyo xasiloonaanta dalkeennu maanta ku caan baxay iyagoo aan dan gaar ah ka lahayn hawlaha laxaadka leh ee ay hadh iyo habeen u soo jeedaan. Dalka iyo ummadduna way u og yihiin waxaanay u hayaan abaal weyn.

Ciidammada N.S.S. Boliiska iyo Ciidammada Qalabka Sida oo dhammi waxay si wacan u baaxsheen kaalintii kala gudboonayd waana kuwa safka hore kaga jirey ka hortagga iyo xasuuqidda dib-u-socodka ee isku daya inay nabadgelyada jillaafeeyaan.

Waxyaabaha tiiraraka nabadgelyada si adag ugu qotomiyey dalkeenna gudihiisa waxaa kamid ah caddaaladda baahday. Waagii musuq-maasuqa ee haybadda dawladnimadu naafowday, caddaaladduna soldhada gashay, waxay ku kalliftay dadkii in nin waliba gacantiisa ku ciil baxo. Taasina waxay dhalisay dilkii iyo qalalaasihii aan kor ku soo sheegnay. Kacaanku wuxuu dhaar ku qaaday inaan dembiile fakan, ee laga gudo wuxuu galay. Waanu kaga dhabeyey dhaartaa. Waxay, markaa taasi ku abuurtay dadweynihii inay aaminaan fagaarayaasha lagu kala garbaxo, inuu kii gardarani hakado, kii xaq-jecelina uu naftiisa iyo xoolihiisa xasilooni ku haysto, inay weliba si xoog leh ugala shaqeeyaan dawladda iyo ciidammadeeda fidinta iyo waari-

dda nabadgelyada, sida ka muuqata guulwadayaasha ku baahday tuulooyinka ioy miyiga.

Dhinac kale waxaa sare u kacay wacyiga siyaasiga ah ee dadweynaha taasoo ah mid ku xidhan lana socota isbeddelka ka dhacaaya dalka guud ahaan ha ahaado xag dhaqaale ama xag dhaqan: Warshaddah beeraha, iskaashatooyinka, qorista af-Soomaaliga, ololayaasha kala duwan ee isdabajooga ah, horumarinta, dejinta reer guuraaga (Danwadaagaha) iyo guud ahaan asbaabaha aynu kor ku soo tilmaamay waxay ummadda iyo dalkaba gaarsiiyeen heer sare oo nabadeed taasina waxay keentay in dadku isu qaado iskuna gacaleeyo, walaaltinimo, isdhexgal iyo wax wada qabsi jaallanimo.

Waxaa hubaal ah in dhalashada xisbigu ay sii xoojin doono nabadgelyada.

Xisbiga H.K.S. ee wakiilka ka ah dadweynaha Soomaaliyeed (Shaqaalaha, Beeraleyda iyo danyarta) wuxuu u halgamayaa daryeelka danaha iyo himilada kacaannimo ee dadweynaha. Ujeeddadaas weyn lagama xaqiijin karo la,aan nabadeed.

Horumarka iyo barwaaqada bulshanimo waxa kala dhantaali kara oo keliya waa colaad midba kasta ha ahaatee.

Haddaba Xisbigu isagoo daafacaya danta dabaqadda bulshadu u baahan tahay wuxuu aqoonsan yahay inay jiraan cadowyaal dabaqi ahi, oo ka soo horjeeda danta guud ee uu horseedayo, ha ahaadeen imbeeryaaliyada caalamiga ama dibusocodka gudaha, kuwaasina ay waqti kasta dhowrayaan fursad ay olol iyo qas ka kiciyaan dalka dhexdiisa. Waxay kaloo xarfaan ku yihiin ballaarinta iyo afufidda dhibaatooyin yaryar oo dal kasta oo adduunka ka mid ah kumanyaal jeerka dhaca maalin kasta.

Iyadoo xisbigu iyo xubnihiisuba waajibaadka aan warbixintan xaggeeda hore ku faahfaahinay gudanayaan, waxa halkaan xusid gaar ah mudan dagaalka lagula jiro qabyaaladda. Qabyaaladdu waa saynsaabka dhaqan-dhaqaale oo ku dhisan reer- guuraanimo. Isbeddelka salka dhaqan-dhaqaalahaasi waa kii beddela saynsaabka la socday. Waxa ka mid ah isbeddelkaas hawsha aan ka wadno horukaca dhaqaalaha, kobcinta hantida dadweynaha iyo iskaashatooyinka iyo ol-ololaha tacliinta ee baahaya. Ha yeeshee inta isbedelkaasi gunta ahi socdo waa in la barbar wadaa Isbeddelka saynsaabka laftiisa sida sharciyada iyo maamulkaba. Waxa taa qasbaaya halganka oo mid dheer ah, inta uu socdana ay qabyaaladdu hadba soo laba kaclayneyso sida aan mantaba calaamaadkeeda aragno. Sidaa darteed marnaba waa inaanu debcin dagaalkaasu, xisbiguna waa inuu noqdaa hubkii cusbaa ee lagu dabargoynayey.

Sidaas darteed waxaynnu hubnaa in xisbigu door weyn oo ka baaxad ballaaran kii hore, uu ka qaadan doono sugidda nabadgelyada. Isagoo si cilmi ah ugu dhabba gelaaya darsaayana waxyaabaha lagama maarmaanka u ah hirgelinteeda iyo waaritaankeeda, ha ahaato dhinaca horumarinta bulshada, dhinaca fikraddooda ama dad la dhaqankooda guud ahaan.

Xubnaha xisbigu meel kasstoo ay joogaanba waa nabaddoonadiisa. Halkaas dadweynuhu waxay ka arki karaan in xisbigu leeyahay saldhig ballaaran oo ku nool dal nabadgelyada, horumarka iyo hantiwadaaggu astaan u yihiin,

DHINACA DHAQAALAHA.
JAALLAYAAL;

Shirweynihii Asaaska Xisbigeenna ee la qabtay 26kii Juun ilaa 1dii Luuliyo ayaa, sidaan ka warqabno, wasaarad waliba warbixin ka dhiibtay wixii waaxdeeda ka qabsaday intii Kacaanku maamulka hayey. Waxa ka soo wareegay waqtigaas muddo ku dhaw shan bilood. Sida la ogyahayna arrimaha dhaqaaluhu ma aha wax lagaga warrami karo waqti sidaas u gaaban, maxaa yeelay waxqabadkiisu inta badan wuxuu ka koobán yahay hawlo muddo dheer ku sugan. Tusaale ahaan, mashaariicda qaarkeed deriska hindisaha (feasibilitay studay) oo keliya ayaa qaata dhawr bilood. Sidaa daraadeed warbixintan waxaan wax kaga taabanayaa fulint qorshahii shanta sano (1974-78), gaar ahaan kii sannadkan 1976, halka uu marayo.

Qorsheynta shanta sano, oo ah tii labaad inta kacaanku jirey, waxa ujeeddadeedu weyni tahay in waddanka iyo dadka ku noolba hore loogu mariyo si cilmi ku fadhida oo habaysan. Taasoo oo macnaheedu yahay in salka maaddiga iyo teknikada ee bulshada la ballaadhiyo, awoodda wax- soo saarka si joogta ah sare loogu qaado, wixii soo baxana si caddaalad ah bulshada wax loogu taro, looguna qaybiyo. Himilooyinkaas waxay u baahan yihiin maal-gelin tiro badan. Si maal-gelintaass loo helo, awooddeenuna u urursanaato waxaa lama huuraan noqotay in qalabka wx-soo saark iyo qaybiskaba, gaar ahaan kuwa ugu muhiimsan, laga dhigo hanti dadweynaha. Waxa lagu billaabay toleyntii waaxyaha tilmaaman ee shisheeyuhu gacanta ku hayey sida bangiyada, warshado waaweyn iyo qaybinta shiidaalk, tallaabadaasoo la qaaday Maajio 1970. Waxaa ku xigey la wareeggii ganacsiga dibedda oo isna laba heer ahaa. Waxa barbar socday tallaabooyinkaa,

maal-gelinta oo ku shubmaysey dhinaca hantida dadweynaha sida mashaariicda waaweyn ee dawladdu gacanta ku hayso, ha ahaadeen warshado, ama beeraba, iyo kobcinta iskaashatooyinka Isbeddelkaasina wuxuu ahaanayaa mid aan kala go'in ilaa la dhammaystiro hantiwageynta qalabka tacabka iyo hantidaba.

Taas waxa raaca, in si dhaqaalaha dib loogu habeeyo tacab cusubna loogu maamulo, heerka wax soo saarkana kor loogu qaado, ay lagama maarmaan tahay in tacabka la waafjiyo casriga cusub lagana faa,ideysto natiijooyinka cilmiga iyo teknoolojiyada laga gaadhay. Sidii loo suurtagelin lahaa awooddaas cusub, lana gaadhsiin lahaa heer cad oo sare waxay ku faahfaasan tahay qorshaha shanta sno laftiisa.

Iyadoo fulinta qorshahaasi yahy mid aan fududayn, loona baahan yahay in aan waxba lagala hadhin, waxaa qaayo weyn leh in aan soo bandhigno iyadoo kooban wixii ka qabssamay tan iyo haatan iyo wixii waajib ah in weli la qabto.

Marka la qiimeynayona fulinta qorshahan aan ku jirno waxaa lagama maarmaan ah in maskaxda lagu hayo dhowr xaajo. Bilowgii fulinta qorshaha waxa ku beegmay dhibaatooyincusub markii la diyaarinayey aan jirin. Waxa ka mid ah ascaartii sare u kacday adduunka oo dhan, alaab kassta oo la soo qaado ha ahaato qalab, cunno iyo shiidaalba; lacagaha adduunka hantigoosiga weli ganacsigeennu la xidhiidho oo sabbeeyey, wax lagagana tashadana aan la garaneyn; iyo abaartii kululayd ee dhibaatada iyo qalalaasaha ay dadkeenna, dalkeenna iyo dhaqaalaheenna u geyssatay weli diiftoodi inna hayaan. Arrimahaasoo dhammi waa qr aynnu aad uga war haynno oomarkii ay innala soo derseen tashi, dadaal iyo guclaroor badan aan kala hortagnay si wax looga qabto. Nasiib wanaagse waan ka lib helnay, oo sidii dadka qaar filayeen inna may dhabar jebin, iyadoo ay mahadda leeyihiin, Ebbe ka sokow, feejignaanta kacaanka ,dadweyenaha Soomaliyeed oo iskuduubnidoodi iyo naf-huriddoodii ku muujiyey in dhuuxooda aan xari ku jirine uu birlab yahay, iyo adduunweynihii sida abaalmaddoonka innoogu soo gurmaday. Inkastoo aan ka libkeennay dhibahaas, haddana raadkoodi si cad ayuu uga muuqdaa fulinta qorshaha, maxaa yeelay la dagaallankoodii wuxuu la yimid in awood badan oo maal, muruq maamul iyo waqtiba leh laga wareejiyo fulinta mashaariic qorshaha ku jirtay oo lagala hortago dhibaha cusub si loo badbaadhiyo nolosha Ummadda. Sidaa darteed ayaa, iyadoo aan natiijooyinka raalli laga wada noqon karin, haddana aanay yareyn waxa qabsamay.

Saddexdii sano ee 1974,1975 iyo 1976 oo lagu guda jiro marka qiimayntan la samaynayo waxa fulay 41% wixii aan doonayney inay hirgalaan muddadaas. Waxa la barbar dhigi karaa taas qorshihii seddeda sano 1971- 73 oo heer fulintu gaadhsiisnaa 65.7%,qorshahaas oo isaga aanay la beegmin dhibiihii kan ka hor yimid. Qorshayaashii Kacaanka ka horreyey kii ugu roonaa heerka fulintu wuxuu gaadhay 30.

Qaybaha hirgelintoodu fiicnayd waxa ka mid ah wershedeynta, waxbarashada iyo kalluunka. Wershedeynta, oo ah hagaha isbeddelka dhaqaalaha, hirgelintiisu ma xumayn oo waxay gaadhay 60 Si loo gaadhohimilada, sannadaha hadhayna heerka bartilmaameedka la gaarsiiyo waa in weli la geshaa maalgelin dhan 230 malyuun oo shilin. Raja weyn baa laga qabaa in lacagtaas dhaqso lagu hirgasho, hadii weliba la tixgeliyo mashruuca sonkorta ee Jubada dhexe. Waxbarashada hirgelinteedu wxay saddexdaa sano gaadhay 65. Muhimad gaar ah waxa la siiyey dugsiyada hooses iyo kuwa dadka waaweyn taasoo la xidhiidhta siyaasaddeenna ku fadhida ciribtirka aqoon-darrida, waxbarashada qasasbka ah iyo joogteynta ololaha horumrint reer miyig. Tacliintu waxay ka mid tahay waxyaabaha tarankooda la dareemo markuu waqti ka soo wareego. toddobadii sano ee kacaanku isbeddelka Tacliinta ku dhacay laguma koobi karo halkan. Iyadoo kolleyba warbixin iyo xisaabtan gaara mudan, haddana waxan afbuuxa ku odhan karnaa in qoridda iyo baahinta afka Soomaaliyga, Ol-olayaashii dheeraa, ballaadhinta dugsiyada, dhisidda iyo fidinta Jaamacadda Ummadda, ay ahaayeen kacaan dhaqmeed oo dalkeenna ka hirgalay.Ubadkeennuna u aayi doono.

Hirgelinta Kalluunka aad ayey u fiicnayd. gaar ahaan sannadkan. Iyadoo qorsheynta shanta sano loogu talagalay horumarinta Kalluunka 78 malyuun oo shilin ayaa dejinta dadkii abaaruhu waxyeeleeyeen aad u kordhisay maalgelinta qaybtan. taasoo ku kordhinaysa 230 malyuun oo kale, qaybta weynina ka imaneysa Midowga Sofiyeeti, oo lagu keeni doono qalabka Kalluunka, qolalka qabowga iyo maraakiibba.

Qaybaha hirgelintoodu liidatay waxa ka mid ah beeraha, caafimaadka, guryaha iyo isgaadhsiinta. Qaybta beeraha oo ugu liidatay waxa ka fulay 25 intii larabay. Sidaa darteed siyaasaddii isku-filnaanshaha dhinaca badarka, galleyda, khudradda, iyo kordhinta tacabka bariiska iyo sarreenka lagama yaabo in lagu gaadho qorshahan gudihiisa. Sidaasoo kale lagama yaabo in lahirgeliyo mashaariicda waraabka ee qorshahan ku jirtay idilkeed waqtigii loo qabtay. Waxan taa kaarkiarnaa maalgelinta loo baahan yahay in la gesho qaybta beeraha sannadaha hadhhay ee 1977 iyo 1978

si loo gaadhoqiyaastii lagu jaangooyey qorshaha shanta sano oo dhahn 850 malyuun oo shilin, lacagtaasoo ka badan wixii wadankoo idil la geshay 1974 iyo 1975 eeqorshaha.

Si dhibaatooyinka ka yimid abaartii dheerayd loo tirtiro, tacabka wax-soo-saarka cuntadana sare loo qaado, kana xorowno marka suuqa caalmaka hanti-goosiga ah ee isbeddelka badan waxa dhawaan guddiga siyaasiga iyo Golaha Wasiirradu qaateen go,aanno qaayo leh oo ku saabsan dhiiriigelinta tacabka beeraha. Iyadoo la fulinayo go,aannadii shirweynihii Ummadda eeNoofember 1975 waxa la gartay in la kordhiyo ascaarta lagaga gato beeraleyda midhaha ay soo saaraan in korsaarka amaahda loo fududeeyo, iyo in Muuska gaar ahaan in la dhiirriyo iyadoo deynkii horenalaga khafiifinayo, amaahda haatanna loo fududeynayo.

Labada qaybood oo kale maalgelintoodu aad u hooseysay waa caafimiidka oo ay ka fushay 16. iyo guryaha oo ahaa 12. .Inkastsoo miisaaniyadda loo huray aanay badnayn, oo xoogga la saaray dhinacyada wax-soo-saarka iyo waxbarashada, haddana raali lagama noqon karo.

waxqabashada caafimaadka. Waxa mudan markaa in sidii aan ka yeelnay waxbarashsadaba, daymo gaar ah la siiyo Caafimaadka qorshaha dambe. Maalgelinta guryuhu waxay ka mid ahayd kuwa dibedda ka iman lahaa aanse la helin. Dhismihii awooddeenna aan ku sameyneyna wuxuu u badnaa dugsiyo iyo xafisyo gumeysigii beylihiyey Sidaa darteed iyana waa in guryaha daymo gaar ah loogu noqdaa.

Dhinaca xoolaha maalgelintoodu labadii sano ee hore may badnayn, sababtoo ah la cagaallankii abaarta ayaa awood badan wareejiyey. Ha yeeshee 1976 way soo kabatay mashruuca lo,da ee «Trans-Juba» daraadiis. sannadaha dambena raja weyn ayaa laga qabaa maxaa yeelay mashaariic badan oo daaqa iyo digaagaba leh, oo uu keenay inchafurkii laga helay abaartii, ayaa la hirgelin doonaa.

Haddii baallaha dhhaqaalaha sida ay caada ahaan isu raacaan la isugu duwo, waxay hirgelintoodu ahayd sidaan soo socota:-

— Dhinaca wax soo saarka salka ah oo ka kooban beeraha, xoolaha, Kalluunka iyo dhirta waxay hirgelintu ahayd 32.%, taasoo aad uga hooseysa bartilmaameedkii.

— Dhinaca wax soo saarka salka ah iyo kuwa kaalmeeya sida warshadaha, macdanta,, biyaha korintada, jidadka iyo daixiiska marka la isku duududubo waxay hirgelintoodu ahayd 48.%.

— Dhinaca bulshada oo ah waxbarashrada, caafimaadka iyo guryaha waxaa ka hirgalay 36.9%

— Dejintu qorshaha gooni ayey ka ahayd. Maalgelintu waxay ka dhalatay abaartii. Bishii Juun iyo Luulyo 1975 ayaa dadkii abaaruhu tabaaleeyeen la soo wareejiyey, lana dejey webiyada iyo xeebaha. 127.000 qof ayaa la dejiyey oo 110,000 ka mid ah agagaarka webiyada la dejiyey inta kalena xeebaha. Saddexda mashruuc ee beeruhu waa 66.000 ah. Ilaa 1975 dhammaadkiisii dawladda waxa kaga baxday 3da beerood 57 malyuun oo shilin. Lacagtaas waxaa dheeraa cuntadii dadka la siinayey oo badideedu dibedda ka imaaneysay kaalmo ahaan laguna qiyaasay 37 malyuun oo shilin. Lacagta dejinta la gelindoono aad ayey u badnaan doontaa 10ka sano ee foodda innagu soo haya. Ballan-qaadka kaalmo dibadeed wuxuu gaadhayaa 390 malyuun oo shilin. 50 malyuun oo lacagtaas ka mid ah waxalagu dhisayaa biyo-xireenka Saakow oo waraabinaya beerta Dujuuma. Lacagaha digedda ka imaanaya waxa la kharash garaynayaa 3 ilaa 4 sano 1976 wixii dejnta ku baxa waxa xoogeedu ku dhacayaa Dawladda waxaana la filayaa inay gaadho 120 malyuun oo Shilin haddii laga qiyaas qaato 1975.

JAALLAYAAL,

Sidaas ayey guud ahaan ahayd fulintii qorshaha halka aan maanta marayno. Ilaa hadda waxa ku baxay 1,568 malyuun oo shilin. Si loo gaadho wixii aan doonayno waa in la gelshaa 2,300 malyuun oo shilin oo kale. Shaki ayaa ku jira in maalgelinta laba sano heerkaas la gaadhsiin karo. Waxa hortaagan (a) helitaanka lacagta gudaha iyo dibedda iyo (b) waxa la yidhaa awoodda kharajka (absorptive capacity). Mushkiladan dambe ma aha mid sahlan oo mar qudha laga bixi karo maxa yeelay mashaariic dersan oo lafagurani waa innagu yartahay, muddada deriskaas oo dheeraata, iyo aqoonyahannada iyo hay'adaha u darban fulinta dersika iyo dhismahaba oo haatan uun koraya Ha yeeshee waa in halganka la wadaa.

Hubaal waxa ah mashaariicda qaarkeed fulintoodu waxay gelaysaa qorshaha soo socda ee kan ku xiga. Kala hormarinta mashaariicdu waa inay cilmi iyo waayoaragnimo ku qotantaa. Maalkayar ee loo hayo horu-i marinta dhaqaalaha waa in la geshaa meesha ugu faa'iido badan ee ummadda ugu daran. Taa waxa la xidhiidha in la adkeeyo hab-maamulka oo awooda iyo karti u leh dabajoogga lacagta ku isticmaalkeeda iyo heerka mashaariicdu marayso hubiteeda. Tallaabyinka taa laga gaadhayo ee haatan la qaaday waxa ka mid ah abuuridda Guddiga Dhaqaalaha oo ka kooban warshadaha iyo Hoggaamada dhaqaalaha ku lug leh.

Waxa dhowaan la guddnshay Miisaaniyddii Sannadka 1977, oo muujinaysa dakhli iyo kharash guud

oo dhan 1.257,8 malyuun oo shillin, una kala baxa joogto iyo raasamaal, wuxuuna ka badan yahay kii kal hore 168.6 malyaan oo shillin.

Dhinaca mashaariicda horumarinta ah ku jira Miisaaniyadda waxa mudnaan la siiyey meelaha ay ka mid yihiin beeraha, Wershadaha, hawlaha guud xoolaha iyo kalluunka. Maalgelinta qorshaha dhinaca gudaha waxa suurageliyey dheeraadka joogtada ah ee lagu dadaalay in la kordhiyo. Dheeraadka joota ahi waa dakhliga dheer kharshka caadiga ah, kaasoo sannad walba sii kordhayey. Tusaale ahaan 1974 wuxuu ahaa 67.9 malyuun, sannadkaanna wuxuu yahay 100.8 malyuun. Dhakhligaas dheeraadka ahina wuxuu ka imanayaa siyaasadda cashuuraha iyo macaashka wakaaladdaha iyo iyadoo kharshka caadiga ah la dhaqaaleeyo. Maalgelinta qorshayta guud ahaan, Miisaaniyada Dawlada Dhexe waxa kaga soo hagaaagay 21%, ilaa haddana, marka lagu daro 1977ka, waxay dhantahay in Dawladda Dhexe maashaariicda ay kaga baxday 8%. Maagelinta gudaha oo idil waxa lagu qiyaasay32.6,% ta dibadda ka imaanaysana 67.4%.

## XISBIGA IYO DHAQAALAHA

Waqtigaan uu Xisbigu hoggaaminaayo dhinac walba oo nolosheenna ah: Siyaasad, Dhaqaale iyo Dhaqanba, waxa loo baahan yahay in wax walba dib loogu fiirsado. Hoggaaminta Xisbiga ee dhaqaalaha waa arrin aad iyo u muhim ah. z

Marka dadweynah xoogsada ahi haleelaan awoodda siyaasiga ah, waxaa cad in halgan ka furmay dhinaca dhaqaalaha si habka cusubi libin u gaadho. Siyaasadda dhaqaalaha ee Xisbiga marka, waa udub dhexaadka siyaasaddiisa guud ahaan.

Hor iyo horraan wuxuu Xisbigu ku hubiyaa Hoggaanka uu dhaqaalaha u hayo isagoo isbeddelka dhaqaalaha u dhiga istratejiya guud. Si loo xoojiyo dib u habeyska dhaqaalaheenna uu ku habsaday gumeysigu cusubi, horeyna loogu sii wado dhabbaha hantiwadaagga, waxaa lagama maarmaan ah in xisbigu u yeesho garasho buuxda qawaaniinta horumarinta hantiwadaagga, si adagna u darso baahida maadiga ah ee bulshada. Barnaamijka Xisbigu tilmaamo guud ayuu ka bixinayaa horumarkeenna ku socda hantiwadaagga. Hase yeeshee waxaa loo baahan yahay in Xisbigu si adag faraha ugu dhigo horumarkaas. Tusaale ahaan barnaamijka waxaa ka muuqda isbeddelka hantiwadaagnimo ee aan la rabno nolosha beeraleyda iyo miyiga. Himiladaasi kaga dhabeyskeedu wuxuu la imaanayaa in la qaado tillaabooyin fcil ah oo lagu abuurayo, beeraha Dawladda ka sakow iskaashatooyin cayn walba leh. Taasina waxay iyana u baahan tahay in la xoojiyo isku duwidda, kormeerka iyo ilaalinta si loo hubiyo in tillaabooyinkaas hantiwadaagga lagu hormarinaayo dhinaca reer baadiyaha iyo beeraleyda aaney ka horimaan kuwa kale oo dhiirri gelinaaya hannaanka hantigoosiga oo ay qaadaan hay'adaha Dawladdu. Tusaale kale waxaan u qaadan karnaa suuqa madow ee maanta aan dagaal kula jirno Hubaal waxaa ah in waxyeelo badan oo aan dibedda ka keennaa ceriiri geli karaan. Isla markii haddana waxaan ognahay intii la keenay, inkastaba halal ekaatee in lacag adag oo fara badan oo dhismaha dalka geli lahayd innagaga baxday. Sow ma haboona in markaa waxaynu haysanno la hubiyo inuu caddaalad ku baxo? Siyaasaddeennu ma oggolaanaysaa in dhibaha dhaqaalaha ay ka faa'iideystaan baayac-mushtar iyo hawlwadeenno dawladda u shaqeeya oo tuugeysanaya? Haddaanu Xisbigu arrintaa isha ku hayn, kormeerin, waddo u jeexin, yaa ilaalinaaya danihii dadweynaha? Waa su'aalo jawaabtoodu caddahay. Waxaa Xisbigeenna la aasaasay waqti qorshah shanta sano 1974-78 uu badhtamaha marayo. Waajibka ururrada Xisbiga oo idil heer kastaba ha ahaadeene, in ay dersaan qorshahan, fulintiisana daba galaan. Marka ay sidaas isugu hawlaan hirgelinta qorshahaan, ayey awood iyo waayo-aragnimo u helayaan hay'adaha Xisbiga oo idil sidii ay u diyaarin lahaayeen una dhaqaajin lahaayeen qorshaha shanta sano ee soo socota 1979-1983.

Hadda ka hor waxaa qorshaha sameyntiisa gacan buuxda ku hayey dad farsamo yaqaanno iyo maamulayaal ah. waxad moodeysaa inay ka qaybgalkeeda go'doon ka ahaayeen xoogagga bulshada, oo markaa loo arkaayey in ay tahay hawl aqoonyahan oo keli ah. Dhaqdhaqaaqa wax abuurka leh ee dadweynaha, ee uu dabooIka ka qaaday Kacaankii oktoobar, wuxuu isku muujiyey hawlihii iskaa wax u qabso, mashaariicda degdegga ah iyo ololayaashii faraha badnaa. Maanta, oo aynu qabno waayo-aragnimo toddoba sano oo Kascaan ah, waxaa inoo suura gal ah in aynu isu geyno dhaqdhaqaaqa wax abuurka leh ee dadweynaha iyo maamulka dhaqaalaha ee qorshaysan.

Xisbigu marka uu kormeerayo qorshaha' haatan socda kuwa imaan doona uu u diyaar garoobaayo waa inay hagtaa mabaadi'da soo socota:

I) Sidii loo heli lahaa bartilmaameedka ugu doorroon oo kuwa kale ee dhammina ku xidhan yihiin.

**II) Sidii kharajka ugu yar loogu gaari lahaa natiijada ugu weyn;**

III) Sidii loo hubin lahaa in dadweynaha xoogsatada ahi si wacan uga qayb galaan talada wax soo saarka iyadoo isla markaa la daryeelaayo mas'uuliyadda maamulka qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha.

Mustaqbalka soo socda, qorshayaasha marka la

qoro waa in si jamac ahaan ah looga doodaa intii uunan sharci noqon. Hay'adaha dhaqaalaha iyo maamulayaashoodu waxay u shaqaynayaan iyadoo dadweynuhu indhaha ku hayo, iyagoo warbixin joogta ah soo marinaaya xisbiga iyo urrada kale ee dadweynaha. Marka ay dadka shaqaalaha ahi awood u helaan inay xagga hoose ka kontaroolaan, waxaa u suuroobaaya inay ka libhelaan turunturooyin iyo gefaf hortaagan ama hakiya horumarka maamulka shaqaalaha.


Qorsha-samaynteenna soo socota waa inay tixgelisaa baahida loo qabo in qorshuhu hoos ugu dhaadhaco gobollada, degmooyinka iyo Tuulooyinka. Hay'adaha hoose ee heerarkaas ah, dawladda iyo Xisbigaba, waa inay dersaan meelahooda iyagoo tixgelinaya dhaqanka, awoodda, iyo baahidda oo ay markaa talooyin ka qaadan karaan mashaakilka waqtigan gaaban ku sugan.

Sidaa ayaa lagu fulin karaa go'aankii aha in la fududeeyo maamulka.

# Is- afgarad iyo kalgacayl



*Sawirkan waxaan ku aragnaa Jaalle Siyaad Xog hayaha Guud ee XHKS. iyo Madaxweynaha Tansaaniya «Nareere» iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Tansaaniya Cabuud Jumbe. Munaasibaddu waxay ahayd aasaaska Xisbiga Mideysan ee Tansaaniya.*



# Kal--Fadhigii 3aadee XHKS Go'aanno Dhaxalgal ah Taariikhdana ku Waaray

Golaha Dhexe ee Xisbiga HKS, wuxuu Kalfadhigiisii Saddexaad isugu yimid Xarunta XHKS markay taariikhdu ahayd 4.1.1977, waxaana lagu falanqeeyey arrimo fara badan oo la xiriira Siyaasadda, dhaqaalaha iyo amniga, iyo dhammaystirka xoojinta kaalinta Xisbiga iyo is-beddelka bulshada. Waxaa si tifaftiran oo mug leh Xoghayaha Guud ee Xisbigu u siiyey Golaha Dhexe xogwarran iyo warbixin ay ku cad yihiin tallaabooyinkii iyo hawlihii la qabtay muddadii ka dambeysay aasaaskii XHKS iyadoo saldhig looga dhigayo Barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga.

Kaddib markii falanqeyntii, dersintii dooddii dhammaatay kalfadhiga Golaha Dhexe, isagoo cuskanaya aragtida isbeddelka bulshada, waayaha dunida maanta taagan iyo duruufta gaarka ah ee Soomaaliya taalla wuxuu go'aan ku gaadhay:

1. ARRIMAHA XISBIGA.

Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waa Xisbi dhowaan abuurmay, xilweynna wuxuu ka saaran yahay horumarinta Siyaasaddii iyo dhowridda mirihii Kacaanka 21 Oktoobar 1969. Sidii uu Xilkiisaa ku fushado waxaa casho kasta soo food saaraya arrimo cusub iyo kuwo culus oo aan kaansho siinayn in lagu simo shirarka waaweyn, ama ciriiri gelin kara gudashada waajibaadkiisa cad — cad.

Saas awgeed waxaa lama huraan noqotay in mar labaad la caddeeyo hawsha dheeraadka ah ee hay'adahiisa qaarkood, xiriirka iyo habka wada shaqaynta uu Dawladda maamulka la leeyahay, iyo wixii khibradda muddada uu jiray ay ku soo biirisay.

A. XIRIIRKA XISBIGA IYO DAWLADDA.

Si mugdi marnaba u gelin habka wada shaqaynta Xisbiga iyo maamulka Dawladda, Golaha Dhexe waxaa u muuqatay in ay lagama maarmaan noqotay in halka lagu caddeeyo ayada oo laga turjumaayo xeerkii iyo barnaamijkii Xisbiga, mas'uuliyadda labadaa hay'adood.

XILKA XISBIGA.

. Xisbigu wuxuu dejiyaa Siyaasadda guud ee Dalka.

2. Wuxuu ka taliyaa guddoonshaana qorshaha dhaqaalaha, siyaasadda, bulshada iyo diifaaca.

3. Wuxuu ku sameeyaa **kormeer, toosin iyo tusaalooyin, hirgelinta** qorshahaas.

4. Xisbiga waxaa hawlahaas u fuliya muddada u dhaxaysa labada kalfadhi ee Shirweyne **hay'adaha soo socda;**

Golaha Dhexe, Guddiga Siyaasiga Hoggaammada iyo **Guddiga** Kormeerka, Guddiyada Gobollada, **Degmooyinka iyo Unugyada,** Guddiga Dhexe ee Baarista oo xus gooni ah u baahan.

5. Dawladda iyo maamulku waxay u hoggaansamaan farrimaha iyo tusaalooyinka uu baxsho.

B GUDDIGA DHEXE EE BAARISTA.

Guddiga dhexe ee baaristu wuxuu baaraa, si joogta ahna u kormeeraa hawlaha Qaranka, **khaas ahaan dhinaca maaliyadda iyo** dhaqaalaha ee Xisbiga, Dawladda iyo Qaranka oo dhan.

T. XILKA DAWLADDA.

Dawladdu waxay diyaarisaa maamushaa fulisaana Miisaaniyadda iyo qorshaha dalka ee dhaqaalaha, Siyaasadeed ee **Xisbigu dejiyey iyo barnaamijkiisa.** Si gaar ah waxaa Dawladda xil ka saaran yahay:

1. Hirgelinta mashaariicda dhaqaalaha, 2. baahinta tacliinta dadweynah, daryeelka caafimaadka dadka iyo Xoolaha.

3. **Sahminta iyo ballaarinta** ilaha dhaqaalaha.

4. Degganaanta iyo xasilloonida guud ee dalka.

5. Socodsiinta Hawlaha maamulka.

6. Xoojinta xiriirka iskaashi (heer Dawladeed) ee ka dhexeeya dalkeenna iyo dalalka kale.

7. Abuuridda shaqada iyo meelaha laga shaqayn lamaa ama dadweynuhu ka heli lahaa shaqo.

8. Waxay ku shaqaysaa Dawladdu xannaanada iyo daryeelka da'da soo koraysa iyo dadka gabooba.

9. Dawladdu waxay shaqo u rogtaa **ujeeddada iyo istaraajiyadda** Xisbiga ee ah: dhismo bulsho cusub ee hantiwadaag ah, nolosheeduna sarrayso dhinac kasta ka siisaa Xisbiga socodka hawlaheeda, iyo sida ay u gudanayso xilkeeda.

10. Waxay warbixin joogta ah J. Si Xisbigu u oofsado waajibaadkiisa oo dhan, waxaa lagama maarmaan ah in Madaxa hay'adaha qaarkood iyo jagooyin maamulka iyo Ciidammada ku lug leh ay toos u magacaabaan Golaha Dhexe ama caddii uu u wakiisho.

Hay'adahaas iyo jagooyinkaasi waa kuwa hoos ku qoran:

1. Wasiirrada

2. Guddoomiyayaasha: Maxkamadda Sare, Badbaadada iyo tan Ciidammada.

3. Maareeyayaasha Guud.

4. Agaasimayaasha Guud.

5. Danjireyaasha

6. Xeer Ilaaliyayaasha: Qaranka, Badbaadada iyo kan Ciidammada.

7. Guddoomiyayaasha Bankiyada.

8. Guddoomiyayaasha Jaamacadda.

9. Hantidhawrka Guud

10 Garyaqaanka Guud.

11. Madaxa Akedeemiyada Culuunta Siyaasadda.

12. Taliyayaasha Ciidammada.

**X. Khibradu, muddada Xisbigu uu jirey, waxay muujisay Xisbidhaqan geliyo** Barnaamijka Xisbiga, loo baahan yahay in qodobbada Xeerka qaarkood wax laga beddelo, taas oo uu cannaynaayo qodobka 11aad ee Xeerku. Saas awood, Kalfadhiga Golaha Dhexe wuxuu oggolaaday beddelada soo socda.

Qodobka 16aad

Markii hore wuxuu ahaa, bogga 14aad sadarka mid ka hooseeya «hadba inta laamo kala duwan loo baahoo» waxaa loo beddelay «hadba inta Hoggaamo kala duwan loo baahdo. Hoggaammada waxa madax ka noqonaya Guddoomiyayaal **rasmi ah, lagana dhex doortay Golaha Dhexe.** Tirada Guddoomiyayaasha waxa gooya Golaha Dhexe isaga oo tixgelinaya ra'yiga Guddiga Siyaasiga».

Qodobka 21aad

Qodobka 21aad sadarka Toddobaad wuxuu markii hore ahaa «Wuxuu doortaa Guddiga», waxaa loo beddelay «Wuxuu Guddoonshaa Guddiga».

Qodobka 22aad Markii hore

«Guddiyada **Xisbiga** ee **Gobolladu** waxay doortaan Hay'adaha fulinta; Xafiiska iyo Xoghayayaasha; waxay magacaabaan madaxda Laamaha iyo madaxda qo-

rayaasha Wargeyska Xisbiga; waxay doortaan guddiga kormeerka.

Xoghayayaasha iyo madaxa Laamaha Guddiyada Gobolada waxaa Guddoonsha, oggolaadana Golaha Dhexe ee Xisbiga. Fadhiga Xisbiga Gobolka waxaa la qabtaa saddexdii biloodba mar.

Guddiyada Xisbiga ee Gobolladu waxay Hoggaamiyaan Ururrada Xisbiga ee Degmooyinka iyo Tuulooyinka, waxay baaraan shaqada iyo hawsha, waxay dhegeystaan warbixinta Guddiyada Degmooyinka iyo Tuulooyinka ee Xisbiga».

Qodobka 22aad waxa loo beddelay sidan:

Qodobka 22aad.

«Golaha Dhexe ama Guddiga Siyaasigu wuxuu soo xulaa, soona jeediya xafiiska fulinta, Xoghayayaasha iyo madaxda Laamaha, waxaana oggolaada Guddiga Gobolka. Golaha Dhexe ama Guddiga Siyaasiga ee Xisbigu, haddii duruufta meeshaasi qasabta, wuxuu awood u leeyahay inuu xulo, magacaabana Xoghayayaasha iyo madaxda laamaha gobolka, iyada oo taas lagu daryeelayo danaha waddanka, Xisbiga iyo Mabda'a

Golaha Dhexe ama guddiga Siyaasigu wuxuu awood u leeyahay sidaa oo kale haddii ay duruuftu qasabto inuu xubnaha kor ku xusan ka wareejiyo xilkii saarnaa.

Guddiyada Xisbiga ee Gobollada waxay doortaan:

Guddiyada Kormeerka, waxayna magacaabaan qorayaasha Wargeyska Xisbiga Fadhiga Xisbiga Gobolka waxa la qabtaa saddexdii biloodba mar, ugu yaraan.

«Guddiga Xisbigu ee Gobolkudu waxay hoggaamiyaan Ururrada Xisbiga ee Degmooyinka iyo Tuulooyinka, waxay baaraan shaqada iyo hawsha, waxay dhegeystaan warbixinta Guddiyada degmooyinka iyo Tuulooyinka ee Xisbiga.

Laq. Qodobka 22aad

Markii hore qaybta 1aad ee laqbuhu waxay ahayd:

«Guddiga Xisbiga ee Gobolku si aan ahayn qarsoodi wuxuu doortaa Hay'adaha fulinta iyo Xoghayayaasha Guddiga». Waxaa loo beddelay «Guddiga Xisbiga ee Gobolgu wuxuu oggolaadaa Xafiiska Fulinta iyo Xoghayayaasha guddiga. Laqbaha qaybtiisa labaad, baaragaraafka 1aad, sadarka Afraad erayga Guddoomiyaan waxaa lagu beddelay xulo, haddii loo baahdana magacaabo.

Erayga murashax oo ku xusan meelo badan oo Xeerka, waxaa lagu beddelay Xubin-suge.

Qodobka 24aad Markii hore

Guddiga Xisbiga ee Degmada iyo Tuuladu waxay doortaan hay'adaha fulinta xafiiska iyo Xoghayayaasha, waxayna doortaan Guddiga kormeerka, Guddoonshaan Madaxda Laamaha, Xoghayayaasha Guddiyada Degmada iyo Tuulada iyo Guddiga kormeerka, waxa oggolaadaana Golaha Dhexe ee Xisbiga. Madaxda Laamaha waxaa Guddoomiya, oggolaadana, Guddiga Xisbig Gobolka. Guddiga Xisbiga ee degmada iyo Tuulada wuxuu abaabulaa, guddoomiyaana, Unugyada Xisbiga ee Iskaashatooyinka, Warshadaha, dugsiyada, Xafiisyada dawladda iwm; wuxuu hoggaamiyaa shaqadooda, wuxuu dhgeystaa warbixintooda, wuxuu baaraa arrimaha la xiriira gelitaanka Xisbiga. Fadhiga Guddiyada Xisbiga ee Degmada iyo Tuulada waxaa la qabtaa ugu yari hal mar labadii bilood.

---

QODOBKA 24aad WAXAA LOO BEDDELAY.

---

Guddiga Xisbiga ee Degmooyinka iyo Tuulooyinka wuxuu oggolaadaa Xubnaha Xafiiska fulinta, Xoghayayaasha iyo Madaxda Laamaha, kuwaasoo ay soo xuleen, soona jeediyeen, Golaha Dhexe ama Guddiga Siyaasiga ee Xisbigu.

Sida kuwa gobolka oo kale, Golaha Dhexe ama Guddiga Siyaasiga ee Xisbiga wuxuu awood u leeyahay, haddii ay duruuftu qasabto inuu xulo, magacaabana Xubnaha Xafiiska Fulinta, Xoghayayaasha iyo madaxda laamaha Degmada, ayada oo taas lagu deryeelayo danaha waddanka, Xisbiga ama mabda'a.

Golaha Dhexe ama Guddiga Siyaasigu wuxuu awood u leeyahay haddii ay duruuftu qasabto, inuu xubnaha kor ku xusan ka wareejiyo xilkii saarnaa.

Guddiga Xisbiga ee dagmadu waxa kale ee uu doortaa Guddiga Kormeerka; waxaanu magacaabaa qorayaasha wargeyska Xisbiga.

Markii la arkay baahida loo qabo in mabaadiida, dhaqanka iyo tusaalooyinka Xisbigu waddanka oo dhan ku faafaan, qof kastana gaaraan, waxaa laga fursan waayey in la abuuro Unugya hay'adda ka hoosaysa lana yiraahdo Gucun.

Qodobka 27aad
GUCUNKA XISBIGA

Gucunku wuxuu noqon karaa **hal Xubin ama laba xubnood oo** Xisbiga ah, oo haddii ay jiraan ay weheliyaan xubinsugayaal. Gucunku wuxuu ka furmi karaa meelaha shaqada, dugsiyada iyo degaanka joogtada ah.

Wuxuu isu ururiyaa kacaamiinta, dadweynaha, wuxuu ka dhex fulilyaa barnaamijka Xisbiga iyo farrimaha hay'adaha Sare, meeshuu ku sugan yahayna wuxuu Unugga Xisbiga ka siiyaa warbixin, Ururrada Bulshadana gacan

buu ku siiyaa fulinta barnaamijkooda.

Awoodda gucunku ma dhaafsiisna xannaanada iyo isu-duwidda dadka uu dhex joogo, xiriir toos ahna wuxuu la leeyahay Unugga ugu sokeeya, dhismo gaar ahna uma baahna. Hawshiisa, anshaxiisa iyo maamulkiisa waxaa xil ka saaran yahay Unugga uu ku taxan yahay.

---

XAALADDA XUBIN-SUGE IYO GUDDIGA BAARISTA.

---

Markii dhab loo dersay Xeerka Xisbiga iyo waayo-aragnimadii laga helay wada shaqaynta hay'adaha Xisbiga, waxaa muuqatay in ay lama huraan tahay:

1. In la ballaariyo Qodobka 5aad, Xarafka (X) ee Xeerka Xisbiga oo dhammaan Hay'adaha Sare iyo kuwa hoose ee Xisbiga loo wada sameeyo «Xubin-Suge» si Xisbigu gun iyo guudba, isku jaangooyo u lahaado.

2. Xobnaha Goddiga Dhexe ee baaristu ay ka mid noqdaan Golaha Dhexe ee Xisbiga, isagoo Guddigaasi uu wadan doono hawlihiisa u gaarka ahaa ee ku xusan qodobka 18aad ee Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Ugu dambeystii Xisbigu wuxuu xilka saaraaya in la fuliyo diyaarintii Dastuurka Dalka, arrintaas oo ku xusnayd Warqaaddii 3aad ee Kacaankii 21kii Oktoobar, kana mid ahayd kuwii uu Xoghayaha Guud tusaalooyin ka baxshay, kolkii uu yiri «diyaarinta iyo dejinta Dastuurka cusub oo kacaan ahi waxay ka mid tahay astaamaha Dimuqaraadiyadda hantiwadaagga ah».

Si loo billaabo dejinta Dastuurkaas, Golaha Dhexe wuxuu farayaa in la magacaabo Guddi u hawlgala.

D. Laga billaabo waqtiga la abuuri Xisbiga Hantiwadaagga nooca cusub ah waxaa lamahuraan ah in dagaal kharaar lala galo danaystannimada. Si keli-noolaadka iyo danaysatannimada looga gudbo, Xubnaha Xisbiga oo dhammi waa inay ku fikiraan in dadka laga simo miraha kacaanka, qof kasta iyo qoys kastana loo xapiijiyo hoy shaqo, waxbarasho iyo xannaano caafimaad. Maadaama ay waajib ka Xubnaha Golaha Dhexe tahay inay ugu hormaraan meeshii naf iyo nacfihurid looga baahan yahay, waxay goosteen:

1. In qof kasta oo ka mid ah Golaha Dhexe wuxuu Hanti leeyahay ku wareejiyo Maaliyadda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

2. Hanti waxaa loola jeedaa:
 — Guryo iyo Dhul
 B— Beero
 T— Baabuur Ganacsi
 J— Saami iyo maalgelin shirkado ku jira;
 X— Ganacsatannimo toos ah ama dadban iyo wixii kale oo hantigoostinnimo dhaxalsiin kara;

3. Hantida laga hadlayo waxaa ku jira midda carruurta ama xaaska lagu dhigay ama ay maamulaan.

R. Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu farayaa dhammaan Ururrada Xisbiga ee Degmooyinka iyo Gobollada inay dhammaystiraan abuuridda Unugyada Xisbiga ee ah aasaaska iyo saldhigga Xisbiga. Xilliga abuuridda Unugyada waa in fiiro gaara iyo mudnaan la siiyaa meelaha wax soo saaridda, gaar ahaan Warshadaha iyo Beeraha. Golaha Dhexe ee Xisbigu wuxuu ku guubaabinayaa dhammaan Xubnaha Xisbiga ilaalinta dhawridda iyo adkaynta anshaxa Xisbiga. Waa inaan anshaxa xisbika loo fahmin wax la isku khasbaayo ee waa inuu noqdaa noloi-Xisbiyeedka Xubnaha Xubin walba oo Xisbiga ka mid ah waxaa ku waajiba inay si garasho iyo fahan ku fadhida, u fulisaa farrimaha iyo tusaalooyinka Xisbiga. Waa in la iska ilaaliyaa, fogaadaana, dabeecsanaanta, jiljileeca iyo kala firidhsanaanta.

S. Golaha Dhexe si uu u adkeeyo ku xirnaanta dadweynaha Xisbiga, Si loo sahlo ifbaxa iyo hawlgalka dhallinyarada, haweenka iyo shaqaalaha Guud, wuxuu go'aan ku gaaray in la sharciyeeyo jiritaanka:

I Ururka Shaqaalaha,
II. Ururka Dhallinyarada.
III. Ururka Haweenka.

Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu farayaa Hoggaammada iyo Hay'adaha ku shaqada leh, inay si dhakhsa ah u dhammaystiraan arrinta abuuridda ururradaas cusub ee bulshada (shaqaalaha, dhallinyarada, haweenka iwm). Hay'adaha Xisbigu waa inay la yeeshaan xiriir adag ururradaas iyadoo ayan la wareegin xilkii saarnaa. Xiriirka Xisbiga iyo ururrada bulshada waa inuu ahaadaa mid sahlaaya fulinta hawlaha iyo hirgelinta barnaamijka Xisbiga. Ururrada bulshada, iyagana waxa la farayaa inay si firficoon uga soo dhalaalaan xilkooda ah abaabulidda iyo hanuuninta dadweynaha xoogsatada ah, iyo kordhinta tacab soo-saar ka meel kasta.

Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu dhammaan farayaa xubnaha Xisbiga inay kor-u-qaadaan garaadkooda siyaasiga ah; inay dersaan, dhuuxaanna barnaamijka iyo xeerka Xisbiga: inay si joogta ah u bartaan mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ah; inay hirgeliyaan, xoojiyaanna tartanka hantiwadaagga ee wax soo saarka.

II. ARRIMAHA BULSHADA

Marka arrimaha bulshada la lee-yahay waxa loola jeedaa wixii ku lug leh:

B— Waxbarashada;
T— Caafimaadka;
J— Arrimaha Haweenka iyi Carruurta;
X— Arrimaha shaqada iyo sha-qaalaha;
kh— Isboortiga iyo Ciyaaraha·
R— Caddaaladda.
D— Wada noolaadka iyo as-luubta bulshada.

Golaha Dhexe markii u aad uga dooday arrimahaas oo dhan, asaga oo tixgelinaya wixii dhismaha Xis-biga ka hor qaybahaas laga soo qabtay, xaaladdoodu sida ay had-da ku sugan tahay, iyo sida looga dhur sugayo, wuxuu goostay:

A. WAXBASHADA

1. In barnaamijka waxbarasha-da, weliba kan heerarka sare, loo habeeyey si barashada farsamooyin-ka iyo xirfadaha loogu duwo ar-dada.

2. Maadaama dugsiyada kha-sabka ah, iyo tirada ardada dugsi-ga sii wadanaysa ay aad u sii bal-laarisay baahida Macallimiin loo qabo, in haddaba la sii qorsheeyo, oo hay'adaha ku shuqul lihi sii diyaariyaan, barnaamijkii laguc car-biyi lahaa·

3. In la sii baahiyo lana xooji-iyo joogteynta OHRM.

4. in tacliinta dadban xididda-da loo adkeeyo.

5. In fiiro gaar ah loo yeesho heerka tacliinta Jaamacaddu ma-rayso, wacyiga siyaasiga ah ee ar-dada wax ka barata iyo tayada tac-liinta hadda laga dhigo.

B. CAAFIMAADKA

Wax badan baa lagu dhawaa-qay in caafimaadka loo guntado, haddana weli dhaliil xoog leh baa ka muuqda waxtarka caafimaadka, taas oy ugu wacanyihiin arrimo ba-dan oo Golaha Dhexe aad uga doo-day. Haddaba, waxaa loo baahan yahay in Xisbigu culays weyn saaro caafimaadka guud ee bul-shada iyo midka qofkaba, hal hayskiisuna waa inuu noqdaa. «bul-sho iyo qof caafimaad qaba ayaa wax soo saara, horena u mara»·

Gaar ahaan waxa Golaha Dhe-xe farayaa:

1. In shaqaale badan ee caa-fimaad Takhaatiir iyo Kaaliya-yaal) muddo gaaban lagu diyaa-riyo,

2. In si gaar ah loo tixgeliyo sanooyinka soo socda, shaqaala-ha caafimaadka hadda jira, kan abuurmayana la sii dhiirigeliyo;

3. In dib loo habeeyo saaca-daha xarumaha caafimaadka, si hawl waddeennada hay'adahaasi uga qaybgalaan daryeelka caafi-maadka degmooyinka iyo xaafa-daha la xiriira;

4. In wacyiga siyaasiga ah iyo asluubta takhaatiirnimo ee hawl kareennadaas kor loo qaado;

5. Dawladda Hoose oo dhami inay dhisaan Xafiis caafimaad Guud, oo ilaaliya nadaafadda iyo caafimaadka magaalooyinka;

6. In la dedejiyo dhismaha War-shaddii Daawada ee ku jirtay qor-shaha 5ta Sano;

7. Inta ka horreysa in la xaqii-jiyo oolka daawooyinka asaasiga ah.

8. In dadweynaha la baro sa-mafalka dhiig bixinat, magaaloo-yinka waaweynna Xisbigu ka hir-geiloy Bankiyada Dhiigga.

9. In daryeelka caafimaadka dumarka iyo Carruurta si dhab ah oo joogto ah loogu dhaqaaqo, la-gana jibakeeno.

T· ARRIMAHA HAWEENKA IYO CARRURTA

Ninna ma mooga kaalinta ha-weenkeennu kaga jiraan hirgelinta himilooyinka kacaanka, taasina waxay xil gaar ah Xisbiga ka saa-raysaa daryeelidda xaaladdooda sha-qada guriga iyo horumarkooda iyo midda Carruurta, oo dhab aha-antii aad ugu xiran.

SAAS AWGEED WAA IN:

1. La soo saaraa sharcigii jiri-taanka Ururka haweenka;

2. La hirgeliyaa mabda'a kala sooc la'aanta dumarka iyo ragga, meel kasta oo la joogo;

3. Waxbarashadooda caadiga ah iyo tan farsamadooda la dhiirri-geliyo

4. Shaqada, Ciyaaraha iyo mee-laha kulammada iyo maaweeladaba sinnaantooda la dhaqangeliyaa;

5. Dugsiyada barashada farsa-mada, xannaanada guryaha iyo ku-wa carruurtaba waa in gobol kasta laga hirgeliyaa;

6. Nafaqada iyo xasilloonida hiyiga haweenka iyo carruurtaba waa in aad loo tixgeeliyaa;

7. Waa in lagu boorriyaa, lagu-lana xisaabtama qaybta ay ka qaa-danayaan tacab soo-saarka, habayn-ta iyo hantiwadaageynta dhaqan-kooda, habkooda shaqada iyo muu-qaalka noloshooda.

J. ARRIMAHA SHAQAALAHA

Waxaad mooddaa in shaqaala-heennu uu maanta halis u yahay inuu jahawareero, taas oo ay ugu wacantahay:

1. War-xun sheegga iyo beenta imberyaaliyadda iyo dibu-socodku dibedda iyo gudahaba la dhex wa-reegayaan, oo ilaa xad saameeyey;

2. Barwaaqada taal dhulalka aan deriska nahay oo hiyikicisay, ayanse u dhug lahayn dhibaatada, ciriiriga iyo dhaqanka qalaad ee ka dambeeya;

3. Hanuuninta iyo aqoontaba

oo aan si hagaagsan oo joogto ah loo daryeelin;

4. Caddaalad xumo ay maamulka ka tirsanayaan

5. Suuqa madow iyo macaashadda oo korodhay, oo dhaawacday masruufkoodii. Waxaase oo dhami waxay keeneen:

(1) Niyad jab iyo in qaneecaad la bido ka tegidda shaqada iyo waddankaba.

(2) Danaystannimo dheeraad ah iyo kalsooni la'aan wax-soo saarka waddanka oo yaraaday, xatooyi xoog lihina ku jirto.

Haddaba ayada oo Golaha Dhexe ku qanacsan yahay inuu shaqaaluhu yahay muruqii iyo madaxii waddanka dhisayey, gogoldhiggii hanashada ka taliskiisana Xisbigu u sugay, waxaa lagama maarmaan ah in wacyigiisa siyaasiga ah la kordhiyo, lana dareensiiyo muddada kulul ee loo marayo dhismaha bulshada hantiwadaagga ah iyo curyaaminta uu maalin walba halis u yahay. Taa ka sokow waa in daryeelka iyo xannaanada shaqaalaha dhugmo gaar ah loo yeesho, arrimaha soo socdana la qabto:

1. Go'aammadii Shirweynihii Koowaad ee Ummadda iyo wixii sharciyo iyo wareegtooyin GSK ka soo baxay ee shaqaalaha ku lug lahaa, waa in degdeg loo hirgeliyo.

2. Wareegtadii dambe ee ka soo baxday Madaxtooyada tiradeeduna ahayd MJDS/C|83|D/ 499 ee 13.9.76, waa in dhaqso loo dhaqangeliyaa;

3. Waa in ururkii shaqaalaha si joogto ah uga bixin lahaa xogwarran, waxay taraan iyo waxay tabanayaanba, la sharciyeeyo jiritaankiisa;

4. Intii la awoodo waa in la isku xiro maciishadda iyo mushaarka shaqaalaha.

5. In Fasaxii hawlyahan kasta xaq u lahaa la dhawro;

6. Maamulka iyo xukunka waa in shaqaalaha si dhab ah looga qaybgeliyo, si fulinta farrimaha Xisbiga, qorshaha waddanka u yahay iyo kharajka hay'adaha ay ula socdaan, xilka hantibiirsiga ka saaranna u gutaan. Ka qaybgalka maamulka waxaa loola jeedaa xukunka, dhaqaalaha, Maaliyadda iyo qorshaha hay'adaha kala duwan ee qaranka. Arritaasi waa inay si toos ah, kama dambeys ah, leexleex aan lahayn u hirgeshaa.

7. Caddaalad iyo xaq soorku waa inuu shaqaalaha oo dhan gaaraa, ayna dareemaan, ee ayan noqon wax afka lgu hayo, amase aan la dhaqangelin; caddaaladdaasi waa mid siyaaso, waa mid shaqosiin, waana mid maamul. Waxayna ku lug leedahay: dallacaadda, fasaxa, beddelaadda, hurdoomooyinka iyo gujo-hoosaadka shaqaaluhu marar badan ka cawdo, lagana sheegto madaxda maamulka qaarkiisa.

8. Waa in la dejiyo sharci hahaynaya xannaanada iyo xaqsiinta shaqaalaha iyo dadka ku dhaawacma ama ku dhinta hawlaha iska-wax-qabso. Xannaanadu waxay waajib ku tahay hay'adda loo shaqaynayo. Qofkii dhinta ama dhaawac weyn oo awooddiisa shaqada wax weyn u dhimaaya gaasho, ayaa jid u leh xaqsiinta. Waa in meesha dhibaatadu ka dhacday markaaba hubsasho qoraal ah laga sameeyaa, qofkana xannaano degdeg ah loo fidiyaa.

9. Waa in gaar looga kifiro meelaha bukad-shaqadu ku badantahay, caafimaadka shaqaalaheedana la ilaaliyo, lana xaqiijiyo dhawritaankiisa;

10. Waa in aqoonta xirfadeed iyo wacyigooda siyaasiga ahba si fiican kor loogu qaadaa.

11. Waa in dhismihii guryaha shaqaalaha lugu goostay Shirweynihii Koowaad ee Ummadda, Wasaarad Wakaalad iyo Hay'ad kastaba ku shaqaaqdo samayntooda; haddana kirada guryaha jira kormeer aaag lugu sameeyo;

12. Waa in Xisbiga iyo Dawladdu tixgeliyaan sidii lugu naaxin lahaa sanduuqa shaqaalaha, halkaas oo la doonayo in dakhligii ka soo galaa uu kaalin weyn ka qaato daryeelka danaha shaqaalaha.

13. Si arrıtaa dambe loo taabba geliyo, Xisbigu wuxuu dawladda farayaa inay haddaba ugu qeeqdo ururka shaqaalaha:

I. Aqallada loo yaqaan Africaan Village;

II. Wixii guryo ijaar ah ee Wakaaladda dhismuhu ama Wasaaraddu maamuli jirtay.

Hirgelinta arrintaas, Golaha Dhexe wuxuu u xilsaaray Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Ururka Shaqaalaha.

Dhinaca kale shaqaaluhu:

1. Waa nuu sare u qaadaa kordhinta iyo kobcinta dhaqaalaha dalka;

2. Waa inuu dagaal cad ku qaadaa, asaga oo xooggiisa iyo xeelihiisa isu geynaya, xatooyada, dayaca, hoollaalka hantida dadweynaha;

3. Waa inuu si xilkasnimo iyo feejignaan leh u daafaca miraha Kacaanka hantiwadaagga ah, bushana u ritaa Waajibaadka ka saaran taabbagelinta mabaadiida hantidawaagga ah.

4. Waa inuu ka gudbaa fikradda ah shaqayso oo hanti yeelo, una gudbaa midda hanashada iyo hoggaaminta qarankiisa. Si himiladaas gobta ahi u xaqiiqowdo, waa inay si urursan, qorshaysan isuduwan, ilaalo iyo kormeer leh, dagaal cad ugu qaadaan gumeysiag caalamiga ah, dibusocodka, iyo dabadhilifyadooda.

5. Waa inuu garto dabaqinnimadiisa shaqaalaha ah iyo cadowga ka soo horjeeda danaha dabaqaddiisa iyo tan dadweyna-

ha ay isku maslaxad yihiin.

6. Waa inuu kala diriro dhexdiisa fikradaha u janjeera dhadhanøiga habka hantigoosiga, kalana sooca inta aaminsan dabaqaddooda iyo inta u hanqaltaageysa hanti gaar ah.

7. Waa inuu ka diriraa, kana soo horjeestaa, asluub-xumada ku lid ah wada noolaadka caafimaadka qaba, kalsoonida iyo bulshonnimada, ayna ka mid yihiin: Beenta iyo beenfarriinka, xinka iyo xasdiga, dhagarta iyo hagarta Arrintaasu waxay gogol dhig u tahay midnimada, isu-hilowga, iskaashiga iyo wadajirka shaqaalaha, si xooggiisu meel mar u noqdo

Intaa waxaa dhaafsiisan in Guddi loo saaro deersidda arrimaha shaqaalaha guud ahaan, gaar aanna baaridda dhaliilka iyo saluugga maanta jira sidii loo saari lahaa.

Guddigaasi waa inuu warbixintiisa iyo talooyinkiisa Xoghayaha guud soo gaarsiiyo, xogwarranna keeno kalfadhiga soo socda ee Golaha Dhexe.

X. CADDAALADDA

Golaha Dhexe, isagoo dareensan in caddaaladdu ka mid tahay tiirarka waaweyn ee ay ku dhisan tahay bulsho u halgamaysa xaqiijinta nolosha hantiwadaagga, isagoo ogsoon in caddaalad-xumo badani ka dhici jirtay dalka kacaankuna u dagaal galay inuu tirtiro guulo xoog lehna ka soo hooyey, wuxuu farayaa hay'adaha Xisbiga iyo Dawladdaba ee ku lug leh inay sii kordhiyaan dadaalka loogu jiro xaqiijinta caddaaladda dhinac walba iyo meel walba.

Waa in laga dhabeeyaa in caddaaladdu hoos u daadegto, dadweyenuhu ka qayb qaato · Hoggaanka Shuruucda, Wasaaradda Caddaaladda iyo Hay'adaha sharcigu waa inay hubiyaan in wixii sharci gaboobay jira la waafajiyo habka hantiwadaagga.

kh. ISBOORTIGA IYO CIYAARAHA

Hoggaammada iyo hay'adaha ku lug leh Isboortiga waxaa la farayaa inay si adag u hirgeeliyaan arrimihii ku xusnaa wareegtadii uu soo saaray Xoghayaha guud tiradeeduna ay ahayd XHKS 46-978-1976.

D. WADA NOOLAADKA IYO ASLUUBTA GUUD EE BULSHADA

Si loo dhiso bulsho hantiwadaag ah, waa in la abuuraa qof ku sifooba asluub iyo anshax hantiwadaag ah. Hirgelinta arrintaasi waxay u baahan tahay in la ciribtiro wax aliaale wixii u adeega asluub iyo dhaqan-xumida, ayna u horreeyaan:

Qabiilka, Qaadka iyo sakhraannimada, been iyo dhalanteed ku noolaadka, xatooyada iyo mashaqaystannimada, dhilleysiga iyo dawarsiga.

Arrimahaas oo dhami waxay u baahan yihiin fiiro gaar ah iyo billaabid qorshee sidii bulshada looga ciribtiri lahaa, hay'adaha iyo xubnaha Xisbigana waxaa la farayaa inay aad ugu dhug yeeshaan.

Gaar ahaan waxaa halka ku xus leh:

QABIILKA

Fadhiyo iyo habab bulshadu ku dhaqanto ayaa in badan fududeeya kullammada, muuqaalka iyo wax-ku-qaybsiga qabiilka kaas oo dibu-socodku ka dhigtay hub iyo aydiyolojiyad ay kula dagaalaan, bulshadana ku jahawareeriyaan.

Si arrintaas bulshadeenna kacaanka ahi isaga moosto, daboolkana looga qaado meelaha lugu maamulo, waxaa Golaha Dheexe farayaa:

1. In gogosha arooska gaarka ah la joojiyo, ruuxii ama qoyskii arrintaasi soo gashaana uu ku qunsado degmada ama xaafadda uu ka tirsan yahay;

, 2. Aasidda dadka geeriyooda, in ay isla kaashadaan marxuunka qoyskiisa iyo degmada ama xaafaddiisa Xus gaar ah iyo wixii quraan loo niyoonaayaba waa in masaajidka lagu maamulaa, halkaas oo duco iyo xurmaba ku dhan tahay.

3. Kulammada siyaarooyinka, abtirsi ku foorara waa in la joojiyaa.

4. Fadhiyada qaadka ee loogu dugaalo maamul iyo xoojin qabiil, laguna abaabulo kacaandiidnimo waa in la hor istaagaa, lana mamnuucaa. Taas waxaa soo raacda wada socodka u ekaankara dad gaar u soocmay, dad gabbanayeyna hinaas iyo dhiirigelin siinaysa oo laga digtoonaado.

5. Qofkii iyo kooxihii lugu caddeeyo inay wadaan ama dhiirigelinayaan hab qabiil ama gobolaysi waa inay mutaystaan ciqaab culus, Xisbiguna ilaaliyo gaarna ka hayaa.

III. DHAQAALAHA

**Golaha Dhexe** ee XHKS markuu dersay istaraateejiyada Guud ee u dhigan horumarka dhaqaalaheenna, qorshaha shanta sano ee haatan lagu guda jiro, dhibaha maanta innala soo beegmay, iyo warbixintii Xoghayaha Guud ka dhiibay fadhigan 3aad, wuxuu gartay in waqtigan aan joogno mudnaan lasiiyo arrimaha soo socda:

1. Cunto soo Saarka.

Sida uu tilmaamayo Barnaamijka XHKS, marka la fulinaayo barnaamijyada iyo mashaariicda dhaqaalaha la xiriira waa in mudnaanta koowaad la siiyo wax-soo saarka. Dhinaca wax-soo-saaridda waxaa ahmiyad gaar ah sii leh tacab-kordhinta beeraha, khaasatan cuntada dadweynaha quuto.

Haddaba iyadoo la tixgelinaayo

istaraateejiyada dhaqaale ee kor ku tilmaaman Golaha Dhexe wuxuu ayidayaa go'aankii guddiga Siyaasiga iyo Golaha Wasiirada ee ku saabsanaadhiirrigelinta beeraleyda iyo tacabka muuska wuxuuna farayaa in:

(b) Hay'adaha Qaranka ee arrinta kuhawl lihi degdeg u soo diyaariyaan barnaamij shaqo oo tifaftiran oo muujinaya sida 1980 lagu gaari karo himiladeenna ah isku-fillaansho dhinaca cuntada iyo tabihii lagu gaari lahaa oo si cilmi ah ku dhisan. Diyaarinta Barnaamijkaasi waa inaanu marnaha ka dambayn shirka soo socda ee Golaha Dhexe.

(t) Isla markaas waa in hay'adaha ku shuqul lihi dedejiyaan fulitaanka mashaariicda iyo tal laabooyinka kale ee u qorshaysan wax-soo-saaridda cuntada.

(j) Xisbiga, hay'adaha dawladda oo idil iyo dadweynaha Soomaaliyeed Olole joogto ah oo aan nasasho lahayn ku qaadaan tacab kordhinta iyo cunto soo saaridda.

.2 ASCAARTA IYO HELITAANKA ALAABTA LAGAMA MAARMAANKA AH.

In la daneeyo nolosha dadweynaha waxay ugu horreysaa himilooyinka bulshada hantiwadaagga ah. Ascaarta Alaabta lagama maarmaanka ahina waa meelaha nolosha dadweynaha aad u saamaysa, khaasatan bulshada teennoo kale ah ee awoodda xagga jeebka ee shaqaalaha iyo dadka kale ee danyarta ah aad u gaaban yahay. Si. daa darteed waxa loo xilsaaray Hoggaammada Golaha Dhexe ee XHKS iyo hay'adaha dawladda ee arrintaa ku shuqul leh in dib loo habeeyo Siyaasadda qiimeynta iyo sicir goynta ee la xiriira alaabta lagama maarmaanka ah sida cuntada, daawada, dharka iwm. Iyana waxaa taas la mid ah in si fiican loo qorsheeyo helitaanka iyo qaybinta alaabtaas iyadoo isla markaa la tixgelinayo awoodda dalka dhinaca lacagta adag iyo baahida loo qabo maalgelinta waaxyaha kala duwan ee dhaqaalaha.

3. SARRIFKA LACAGTA ADAG IYO ALAABTA GANACSIGA DADBAN (FARANCE VALUTA)

Suuqa xaaraanta ahi meelaha uu qiimo weyn ku leeyahay waxaa ka mid ah sarrifka lacagta qalaad, kaasoo dhinaca kalena kaga xidhan ganacsatada nidaamka ay wax kaga keento ayadoon lacag adag la gudbin ee loo yaqaan «France Valuta». Nidaamkaasi waa hab ganacsi oo qalloocan, haddana heer sare maray, siina fidaaya.

Harse haddii aynu soo soconno hantiwadaageynta buuxda ee ganacsiga, habka (fance Valuta) duna dhibaatooyinka uu yeelan karo siyaasaddeenna iyo dhaqaalaheenna qaran, wuxuu Golaha Dhexe ee XHKS amrayaa Hoggaammada iyo hay'adaha Dawladda ee ku shuqul leh inay si dhab, degdegna ah u dersaan arrimaha la xidhiidha sarrifka lacagta qalaad iyo (France Valuta) oo talooyin wax ku ool ah u soo jeediyaan Guddiga Silyaasiga.

Isla markii Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu ugu baaqayaa ururradiisa,, xubnihiisa, Dawladda, gaar ahaan Ciidammada Nabadsugidda, Booliska iyo Guulwadayaasha, iyo dadweynaha Xoogsatada oo idil in si indha furan loo wado dagaalka lagula jiro suuqa xaaraanta ah. Innago oo ogsoon sabaha uu ka dhalan karo sida ka faa'iideysiga ganacsatada iyo xaaraan-quutayaasha alaabta yaraata marmar, sicirka dunida oo kacay daraadii, haddana waa inaan u garannaa inuu ka mid yahay ifafaala yaasha halganka dabaqiga ah ee ka imaanaya dhalan-roogga dhaqaalaha. Abuurista hantida guud ee dadweynuhu leeyahay waa halgan muddo dheer soconaya. Inta halgankaasu socdana **iska-horimaad** waa jirayaa, **weji kasta oo uu** qaataba. Innaga oo sidaa u garanayna waa inaanu damin dagaalka aan kula jirno suuqa la tilmaamay iyo musuqmaasuq oo idil, wixii dembiila ahna waa inaan loo naxariisan.

4. ISKAASHATOOYIN.

Golaha Dhexe markii uu arkay baahida loo qoba in la dedejiyo hantiwadaageynta dhaqaalaha, iyo dhibaha haatan haysta ganacsatada yaryar iyo dadweynaha badan hab nololeedku yahay kii hore, waxaa u sii caddaatay in dhibaatooyinka fara badan ee dadka haysta aan laga bixi karin, noloshooda iyo dhaqaalahoodana kor loogu qaadi karin, habka keli keli ahaanshaha ee aan ka dhaxalnay nidaamyadii duqoobay.

Sidaa darteed, wuxuu Golaha Dhexe ee XHKS gartay inay lagama maamaan tahay, in ayadoo la xoojinayo culays aadana la saarayo Iskaashatooyinka beeraha, Kalluunka iyo kuwa kale ee hore u jirey, laga abaabulo habka iskaashatada dhinacyo aan hore loo taaban sida hoosooyinka makaanikada iyo xoogga korontada, wixii ganacsato ku xoogsada oo ay ka, mid yihiin dukaanleyda, makhaayadaha, Farmashiyayaasha, tagsiileyda iyo ganacsatada dhoofisa Xoolaha, nool, iyo raacatada.

Wasaaradaha iyo Wakaaladah ku lug leh oo dhammi waa inay ka abaabulaan dhaqdhaqaaq iskaashatooyinka meelaha kor ku xusan, Hoggaanka Iskaashatooyinka ee Golaha Dhexena daba galaa hawsha.

5. HABXISAABEEDKA WAKAALADAHA.

Iyadoo la ogsoon yahay in maamul xumo iyo xatooyo badani uga dhacdo sababtoo ah hab xisaabeedkooda oot aad u hooseeya, kalana geddisan iyo buugaagta lacagta oo aan bixintooda nidaam u dejisnayn awel, waa in si degdeg ah loo hirgeliyaa nidaam xisaabeed midaysan oo cusub.

Si Walaaladaha dawladdu waxtarkii laga filayey u yeeshaan, habmaamulkooduna u tooso, wuxuu Golaha Dhexe ee XHKS farayaa in lagu dhaqaaqo sidii deynka bankiyada ay ka qabaan loo rogi lahaa raasamaal.

Waxaa si gaar ah loo amrayaa in hadda kaddib wixii kharaj ah uusan qof keli ahi saxiixi karin. Ugu yaraan laba qof waa inay saxiixaan, kolleybana mid ka tirsan yahay Guddiga Shaqaalaha (Guddoomiyaha ama xubinta uu wakiisho). Sidoo kale wixii qandaraasa waa in dad ka tirsan Guddiga Shaqaalaha ka qayb qaataan.

6. WAX KA BEDDEL DHISMAHA QAABKA DAWLADDA.

Ayadoo la aqoonsan yahay in dhismaha guud ee dawladdu ahmiyad gooni ah u leeyahay fulitaanka Siyaasadda Qaranka, Dhismahaasuna habda la socdo marba duruufta taagan, waxa la gartay in dib loo habeeyo dhismaha Wasaaradaha iyo Wakaaladaha.

7. QORSHAYNTA.

(b) Habka hantiwadaaggu waxyaalaha uu kaga geddisan yahay habka hantigoosiga ee waji iyo aragti cilmi ah u yeela waxa ka mid ah qorshaha dheellnitirka ee uu sameeyo si bulshadu u gaadho horukac degdeg ah oo waxtar iyo faa'iido u leh Xoogsatada. Sidaas darteed, ayaa Kacaanka Soomaaliyeed u sameeyey labadii Qorshe ee saddexda sano iyo shanta sano. Maanta waxaynu badhtanka ugu jirnaa qorshihii shanta sano 1974-1978, Guulo iyo libo waa laga gaadhay qorshahaasi, inkastoo dalka ay dhibaatooyin fara badan oo xoog lihi la soo gudboonaadeen oo ay ka mid yihiin kuwo siyaasi iyo dabiiciba ah. Siyaasadda Guud ee qorshaha waxaa si fiican loogu xusay Barnaamijka XHKS. Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu dhammaan xubnaha Xoogsatada iyo dadweynaha Soomaaliyeed ku guubaabinayaa inay heegan iyo diyaar u ahaadaan sidii loo fulin lahaa qorshaha shanta sano 1974-1978. Hirgelinta Qorshaha shanta sano waxay u baahan tahay shaqo joogto ah, naf-hurid iyo dadaal badan, sidaas awgeed waxa Xisbigu farayaa:

— In si wada jir ah oo dimuqraadi ah lana socota ruuxa Barnaamijka iyo xeerka Xisbiga loo fulinayaa qorshaha.

— In waqti yar iyo kharash yar lagu gaadhaa natiijada ugu wanaagsan.

— In xoogga la saaro mashaariicda wax-soo saaridda si looga haqab beelo waxyaalaha maalin walba dadku u baahan yahay.

— Golaha Dhexe ee Xisbigu wuxuu farayaa dhammaan hay'adaha ku shaqo leh inay diyaariyaan qorshihii saddexaad ee soo socda, qorshahaas oo lagama maarmaan ah inuu xambaarsado ruuxa Barnaamijka, salna looga dhigo guulihii iyo waayo-aragnimadii qorshayaashii hore.

(t) Mashaariicda maalgelinta lacageed loo hayo ama hirgelintoodu billaabantahay, waa in Guddiga qorshaynta Qaranka uu sameeyaa Barnaamij fulitaan oo cad laguna kortarooli karo hay'adaha gacanta ku haya. Isla markiina warbixin joogto ah laga siiyaa Golaha.

(j) Golaha Dhexe wuxuu oggolaaday samaynta Guddiga ah dhaqaalaha oo ka kooban hoggaannada iyo wakaaladaha dhaqaalaha isaga la kaashanaya hay'adaha kale, u sameeyo duruus cilmi oo jiigto ah arrimaha dhaqaalaha oo idil.

Go'aannadan dhaqaalaha ku saabsan hirgelintooda xil ka saaran yahay Wasaaradaha Wakaaladaha iyo hay'adaha kale ee ay khusayso arrintu, iyo Hoggaamada dhaqaalaha ee Golaha Dhexe.

---

IV. SIYAASADDA DIBEDDE

1. Golaha dhexe ee XHKS isagoo kalsooni buuxda siinaya Siyaasaddii uu Guddiga Siyaasiga ahi ku waajahay qadiyadda gobannimada Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto, wuxuu taageerayaa dhaqdhaqaaqa Gobannimodoonka Xeebta wuxuuna ku guubaabinayaa Dawladda Faransiiska inay gobannimo buuxda oon shuruud lahayn siiyo dad Xeebta Soomaaliyeed. wuxuu ka digayaa, kashifayaana idaacadaha iyo Warfaafinta beenta ah ee looga dan leeyahay marka hore in leyska horjeediyo dadka Xeebta ee iyagoo isku duuban u diriraya gobannimi, marka xigana dad Geeska Afrika oo dhan gaadha laga huriyo si loo baajiyo gobannimada xaqa ah, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeedna waxyeello loo geysto. Golaha Dhexe ee XHKS isagoo u heegan nabadda, iyo gobannimada xaqa ah ee Xeebta Soomaaliyeed, wuxuu ku baraarujinayaa dadka Xeebta, shicibka Soomaaliyeed oo

idil iyo dadyowga Geeska Afrika oo dhan, inay feejiga u yeeshaan shirqoolkaa ka soo ifbaxay gumeysiga Caalamiga ah.

2. Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu ku baaqayaa una dagaalamayaa baahinta nidaamka nabad ku wada noolaanshaha, wuxuu si aada ucambaareynayaa siyaasadda foosha xun ee imberyaaliyaddu ka waddo Qaaradda Afrika gaar ahaan Geeska Afrika, wuxuu si adag uga hortegayaa saldhigyada militeriga ah ee Badweynta Hindiya. Wuxuu uga digayaa dalalka aan deriska nahay hoollaalka, hudhudnimada, iyo diro-direynta isticmaarka. Kaasoo damacsan inuu iska horjeediyo dadyowga iyo dalalka Geeska Afrika si uu u fushado danihiisa.


Isagoo sii xoojinaya baaqii kacaanka Soomaaliyeed wuxuu Golaha Dhexe ee XHKS ku guubaabinayaa dadyowga iyomadaxda dalalka aan deriska nahay inay si xilkasnimo iyo madax-bannaani ah u waajahaan arrimaha Geesqa Afrika, dhibaatooyinka dhex yaalna u dhammeeyaan, si dadyowga meeshaasi ugu wada noolaadaan is-afgarad iyo nabad waarta, xuquuqdooda iyo himiladooda oo buuxdana u helaan.

3. Golaha Dhexe ee XHKS isagoo taageera buuxda, hiil iyo hooba, ula diyaara walaalahooda Koonfur Afrika oo ka dhiidhiyaya midab-takoorka, gumeysiga iyo imberyaaliyadda isagoo isla markii u guuxay mawqifka cad ee ay aririntaa ka taagan yihiin dawladaha horushocodka ah ee foodda ku haya nidaamyada midabtakoorka, wuxuu mar labaad sii adkaynayaa baaqii Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, uu ugu baaqay in Wasiirrada Dibedda ee Afrika ay shir gaar ah oo degdeg ah isagaga yimaadaan xaaladda Koonfur Afrika si ay uga taliyaan habkii wax looga qaban lahaa. Waxaa kale ee XHKS si culus u soo jeedinayaa in xaaladda Koonfur Afrika lagaga hadlo, iyadoo qiimaha ay leedahay la siinayo, shirka Madaxda Afrika iyo Carabta ee foodda innagu soo haya.

4. Golaha Dhexe ee XHKS markuu si cad u dersay ugana dooday xaaladda maanta ka taagan Bariga Dhexe: Dadka reer Falastiin ee dhibaatooyinka iyo cadaadiska joogtada ah lagu hayo, kibirka iyo dhul-ballaadhsiga sahyuuniyadda, khtarta joogtada ah ee ku habsanaysa Bariga Dhexe Guud ahaan, iyo lagama maarmaannimada Midnimada Carbeed si nabad waarta oo xaqa loo gaadho, wuxuu ku baaqayaa adkeynayaana in fadhigii nabadraadiska ee Jeneefa degdeg loo abaabulo, ururka Gobannimodoonka Falastiinna uu uga qayb qaato si sinnaan ah oo buuxda.

5. Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu ku nuuxnuuxsanayaa siina adkaynayaa mabda'ii Kacaanka Soomaaliyeed ee ahaa in taageero buuxda, hiil iyo hooba, la siiyo dadyowga gobannimadooda u halgamaya meel kasta ha joogeene, kana soo horjeeda dulmiga, gumeysiga, iyo imberyaaliyadda.

Go'aannadan Siyaasadda dibedda waxa fulintooda xil gaar ahi ka saaran yahay Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe iyo hay'adaha uu u xilsaaro, gaar ahaan Hoggaanka iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda.



# JAALLE SIYAAD: KACAAN LABAAD WAA LAMA HURAAN

— «Waa inaan ku dhaqaaqnaa Kacaan labaad, isla markaana aanu cirib tirnaa dabadhilifyada iyo kuwa hakinaya halganka Ummadda, iyadoo aanu balian qaadayno Caddaalad Kacaan ah». sidaa daxaa daboolka ka qaaday Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Isagoo kula hadlayey Beerta Daraawiishata ee ka soo horjeedda Golaha Ummadda ee magaalada tan Muqdisho, Kumanyaal qof oo u soo banbaxay inay ayidaan go'aannadii dhaxalgalka ahaa ee dhowaan ka soo baxay Kalfadhigii Saddexaad ee Golaha Dhexe XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Madaxweynaha JDS, wuxuu ugu baaqay guud ahaan Ummadda Soomaaliyeed inay midoobaan si loo xiqiijiyo himilooyinka bulshada.

Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu dadka halkaa isugu yimid si weyn uga warramay himilada iyo aragtida ka dambeysa go'aannada loo aayo ee ka soo baxay Golaha Dhexe ee XHKS, wuxuuna ka codsaday Ummadda Soomaaliyeed inay si dhab ah u hirgeliyaan go'aannadaasi, mar haddii ay qirsan yihiin in ay yihiin kuwo loogu danaynayo Bulshada Soomaaliyeed.

«Waa hubaa in hirgelinta go'aannadaasi ay idin kala soo gudboonaan doonaan dhibaatooyin ay abaabuleen kuwa danaystayaasha ah, Biiriqaatayaasha ah, balse waxaan ku kalsoonnayhay, kuna niyad sannahay, in quwaddiina nadiifka ah ay weligeed, kuwa noocaas ahi ka gacan sarreyso», ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo faahfaahinayey ujeeddada ka dambeysa guddoonka ah in wixii hanti ah ee ay leeyihiin *Golaha Dhexe ee Xisbiga* Xubnaha ka tirsan, lagu wareejiyo Maaliyadda Xisbiga, wuxuu sheegay in arrintaasi loo arkay inaan sinnaba laga dareemin Xubnaha Golaha Dhexe, hanti-bursimo iyo lexe-jeclaysi, wuxuuna intaa raaciyey in durba Afmiinshaariintu ay ka fidiyeen go'aankaasi dacaayad been ah oo ay halqabsi ka dhigayaan, maahmaahda ah «Weysha gowrac, Didigu haku quustee».

Xoghayaha Guud ee Xisbiga HKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu si qayaxan u beniyey Nuhnuhdii ahayd in dawladdu ay boobayso Hantida gaar ahaaneed ee dadweynaha wuxuu caddeeyey in Xisbigu uu ku kalsoon yahay qu-

wadda isku dhafan ee ururrada shaqaalaha, Haweenka dhallinyarada ardayda Ciidammada Qalabka Sida iyo Guulwadayaasha, kuwaasoo tacbashada xalaasha ah ku xaqiijin kara Bartilmaameedka Kacaanka oo ah in la gaaro Horumar, Caddaalad, Sinraan. Midnimo iyo tabaabusho.

Isagoo tilmaamayey Istaamaha Waddaniga Hantiwadaagga ah, Jaalle Siyaad wuxuu sheegay in qof kaasi uu yahay mid had iyo jeer niyeysta amase ku fakara inuu dhisayo. ama buuxinayo kaalintiisa meel kastaba ha kala soo gaaboonaatee, hawlaha horumarinta Dalka wuxuuna qofkaasi ku tilmaamay inuu yahay qof aan marnaba ka suurtoobin danaysi gaar ahaaneed iyo u hanqal taag dhalanteed ah.

Xoghayaha guud ee XHKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo khudbaddiisu ay hakinayeen sacab aan kala go'aahayn iyo heeso Kacaan ah, wuxuu weydiistay Ummadda Soomaaliyeed inay la diriraan beenta xasadka iyo dhagarta, wuxuuna ugu baaqay inay u hiiliyaan qofka kaxtarka ah oo ay ka muuqato waxqabad iyo anshax suubban,

Isagoo tilmaamaya dhibaatooyinka cadawga koowaad ee Ummadda Soomaaliyeed oo ah qabyaaladda Jaalle Siyaad wuxuu sheegay, Qabyaaladdu inay tahay xirfadda iyo farsamada Jaahilka, isla markaana ay ku soo hirtaan waxyaabaha foosha xun oo la halmaala, oo ay ka mid yihiin Mucuqa iyo suuqa xaaraanta ah.

Jaalle Siyaad oo ka faalloonaayey ifbeelka iyo aakhirabeelka ay leedahay qabyaaladdu, wuxuu xusuusiyey Ummadda Soomaaliyeed cawaaqibxumadii ay geyisiisay Ummadda Soomaaliyeed waqtigii Kacaanka ka horreeyey wuxuuna ka codsaday inay weligood-a dagaal joogta ah ku hayaan.

Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo ka hadlaayey xeeladaha iyo dibindaabyada Isticmaarka wuxuu sheegay in isticmaarka uu samaystay wakiillo u adeega oo u fuliya danihiisa gaar ahaaneed ee foosha xun.

«Wakiilladaasi gaar ahaaneed waxa had iyo jeer ku dadaalaan inay dadweynaha Kacaamiinta ah dareensiiyaan caddaalad xumo aan sal iyo baar lahayn, abaabul qabiil iyo cunaqabatayn xag dhaqaale ee dadweynaha, iyadoo cunnadii uu Kacaanka ka bixiyey lacagta adag isku dayey inay dadweynaha horusocodka ahi inay ku dhiigmiirtaan», ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, wuxuu kaloo ka warramay waajibaadka ballaaran ee ururrada Bulshada ka saaran la dagaallanka iyo ciribtirka wakiillada gaar ahaaneed ee isticmaarka uu ku adeeganayo, waxaana hubanti ah ayuu yiri jaalle Siyaad, xoogagga isku duuban haddii ay iskaashadaan isticmaarka inuusan ka dhex faa'iideysan karin Bulshada.

Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu caddeeyey in Dalka Soomaaliyeed uu yahay Waddan Hodan ah, hase ahtee loo baahan yahay muruqa huban iyo maskax toosan, taasoo lagu gaari karo himilada ah tacbasho xalaal ah, wuxuuna weydiistay Ummadda Soomaaliyeed inay ku tallaabsadaan kordhinta tacabka wax soo saarka.

«Hantiwadaaggu waa tabcadaa tacbasho ka horna ma niyeysto dhereg dhalanteed ah iyo inuu hawl la'aan ku gaaro horumar salka ku haysa sinnaan, caddaalad iyo midnimo» ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ahna Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadig Soomaaliya wuxuu si niyadsami ah ku aqbalay dhambaallada taareerada oo is-dabajoogga uga imaanayey qaybaha kala duwan ee Ururrada bulshada Gobollada iyo Degmooyinka uu ka kooban yahay dalka J.D. S. wuxuuna ugu hambalyeeyey Ummadda Soomaaliyeed guul iyo farxad.


Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalla Maxamed Siyaad Barre iyo madaxdii kale ee xuskaas ka soo qaybgashay waxaa hadal soo dhoweyn ah ka jeedisay Sii-hayaha Guuddoomiyaha Hoggaanka abaabulka Jaalle Faadumo Cumar Xaashi.

Khubadaha ka hor waxa halkaasi wakiillo ka tirsan Ururrada dadweynaha ka akhriyeen dhambaallo taageero ah oo ay caddeenayeen sida ay u garab taagan yihiin go,aannadaa u jeeda dhismaha qaranka Soomaaliyeed iyo xilka ka saaran fulintooda.

Ururrada dadweynaha ee banaabaxaa dhigaayey iyagoo gaashaan urur walba dharka u gaarka ah waxay kor u sideen looxaan ay ku qoran yihiin hal ku-dhagyo taageeraayey go,aannada ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaa- Kacaanka soomaaliyeed waxaynna ku dhawaaqayeen heeso ku saabsan sida xoogsatada soomaaliyeed ay ugu miigan yihiin ilaalinta miraha Kacaanka iyo sida ay ugu kalsoon yihiin iyagoo ku hiranaaya Xisbiga, in Soomaaliya ay waqti aan fogeen gaareyso halkii ay ugu abbaarnayd dunida horey u marta.

# TAAGEERO BUUXDA EE XHKS

## Xisbigu gaabin Maayo' Gumaysi Raaci Maayo Gunno Ka Qaadan Maayo



— «Maal, Maamul iyo mas'uuliyada marna meel qura ma wada geeli karaan,sidaa darteedna, Xildhibaannada golaha Dhexe ee Xisbiga HKS,waxay Kal-fadhigoodi saddaxaad ku goosteen in hantidooda gaar ahaaneed ay ku wareejiyaan Maaliyadaa Xisbiga, taasoo astaan cad u ah dayeelidda danta guud ee ummadda», sidaa waxaa sheegay Madaxweeyne Ku-xigeen-1aad eeJDS Jaalle Sorreeye Guud Maxamed Cali Samatar.

Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar, Wasiirka Gaashaandhiga, wuxuu ka hadlayey Fagaaraha Daljirka Dahsoon ee magaalada Muqdisho, Ururrada Shaqaaaha, Ciidamada Qalabka Sida, Haweenka Dhallinylarada, Guulwadayaasha iyo dadweyne iid u fara badan oo ka kala socday 14ka Degmo ee Gobolka Banaadir oo isugu soo baxay xaflad lagu gunaanadayy barnaamijyadii aqoon isweydaarsiga ahaa ee ku saabsanaa faahfaahinta iyo fulinta go'aannadii wax ku oolka ahaa ee ka soo if-baxay Kalfadhigii dhawaan ay Golaha Ummada ku yeesheen Xildhibaannada Golaha Dheexe ee XHKS.

Madaxweye ku-xigeenka wuxuu hadalkiisa ku soo qaaday inbartilmaameedka iyo himilada Xisbiga ay ugu horreeyso in Ummada Soomaaliyeed la gaarsiiyo barwaaqo iyo nolol aayatiin lh ee ka sarreeysa heerka maanta uu marayo nolosha bulshada, taasoo uu Jaalle Samatar ku tilmaamay in lagu gaari karo shao, dadaal iyo daacdnimo.

Isagoo ka waramayay duruufta iyo sababaha dhaliyy XHKS, ee nooca cusub ah, wuxuu Jaalle Samatar caddeeyey in curashadii Xisbigu ay tahay mid salka ku haysay bal'anqaadkii Warqaddii 1aad ee uu soo saary Kcaankii 21kii Oktoobar 1969kii taasoo qoraysay in nidaam siyaasi ah la abuuro marka

ay Ummadda Soomaaliyeed u bislaato.

«XHKS,waa mid aad iyo aad uga duwan Xisbiyadii faraha badnaa ee dalka hore uga jiri jirey intii ka horreysay curasadii Kacaanka caweysan, waana mid leh mabda, xeerar iyo ahdaaf ka turjumeysa shucuurta dhabta ah ee Ummadda Soomaaliyeed oo ah in ay gaarto isku filnaasho dhan kastaba ah» ayuuyiri Jaalle Samatar.

Madaxweyne Ku-xigeenka 1aad, Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar, wuxuu sheegay in taariikhda Soomaaliyeed marka loo eego xagga Axsaabihii badnaa ay soo martay marxalad aad u madow, taasoo dhalisay in dalku uu yeesho 88 Xisbi oo ku dhisan qabyaalad iyo gobolaysi.

Mar uu ka hadlayey xubinta Xisbiga ka mid noqon karta, Jaalle Samatar, wuxuu caddeeyey in Xisbiga ka mid noqon karayo qof kasta oo buuxiya shuruudaha u dhigan Xisbiga, kuwaasoo ay ka mid yihiin Kacaannimo Daacadnimo iyo aaminsanaan mabda,a xalaasha ah ee Hantiwadaaga cilmiga ku dhisan.

«Ummadda Soomaaliyeed waxay ka gudubtay, waqtigii istuska, daba orodka, sacab been tumidda, waxayna haatn maraysaa marxaladii kala guurka, iyadoo si dhab ah loo fahmayo fulitaank barnaamijka iyo dastuurka inuu yahay mid sidii la rabay u mleel maraya, una horseedaya baraare iyo horumar degdeg ah bulshadiisa», ayuu yiri Jaalle Samatar ku caddeeyey.

Jaalle Samatar wuxuu sheegay in Xisbiga nooca cusub ee dalkaan Soomaaliya uu ka mid noqan karo ruuxii naftii hure ah, diyaarna u ah fulinta maslaxadda dadkiisa iyo dalkiisa.

Madaxdii iyo dadweynihii fagaaraha isugu yimid waxay wada jir u ballanqaadeen inay si dhab ah u hirgelin doonaan una dhaqan gelin doonaan go,aannadii waxtarka ahaa ee ka soo baxay Kal-fadhigii saddexaad ee Golaha Dhexe ee XHKS.

Sii-hayaha Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka, Jaalle faaduma Cumar Xaashi oo ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS, oo halkaasi khudbad gaaban ka jeedisay waxay fagaarahaasi ku soo dhaweysay Madaxweyne Ku-xigeenka 1aad ee JDS, Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar iyo madaxdii kale ee sharafta lahayd ee xuskaasi ka soo qayb gashay.

Jaalle Faaduma Cumar Xaashi, waxay fagaarahaas ka sheegtay hamidii uu u socday barnaamijkii aqoon isweydaarsiga iyo qiimaha ay doodaha noocaasi ahi u leeyihiin horumarinta nolosha ummadda Soomaaliyeed iyo sida ummaddu ugu tabaabushasanayso dhaqan gelintooda ficeleed.

**Maamulaha** Machadka Culuunta Siyaasadda, Jaalle G.le Dhexe Maxamed Cabdi Maxamed oo munaasabadaasi ka hadlay wuxuu si guud ahaaneed uga hadlay xubnihii ugu waaweeynaa talooyinkii ka soo baxay doodihii ku saabsanaa sidii loo fulin lahaa go,aannadii Kal-fadhigii saddexaad ee Golaha Dhexe ee XHKS.

Xubnihii uu Jaalle Maxamed wax ka tilmaamay waxaa ka mid ahaa: talooyin ku saabsan Arrimaha Xisbiga dib u habaynta Ururrada Bulshada, Dhaqaalaha, la dagaalanka suuqa xaaraanta ah, arrimaha bulshada waxbarashada iyo caafimaadka, shaqaalaha caddaaladda, iyo talooyin ku saabsan iinaha siloon ee bulshada.

talooyinkaa oo faahfaahsan waxaa lagu soo qori doonaa Wargeysyada, waxaana lagu baahin doonaa Idaacadaha Soomaaliyeed.

# HORUMARKA DHAQ AALUHU WAXA UU KU XIRAN YAHAY MIDNIMADA BEERALEYDA IYO SHAQAALAHA



Xoghayaha GUUD ee XHKS, Madaxweynha JDS, Jaalle Maxamed Siyaal Barre, wuxuu si rasmi ahaan ugu xiray Xarunta Ceel-Jaalle oo ka tirsan degmada Marka 150 qof oo ka kala socday Beeraleyda yar-yar iyo Iskaashatooyinka dalka, tababar muddo bil ah uga socday halkaas.

Beeraleyda oo ka kala socotay guud ahaan Gobollada iyo degmooyinka uu ka kooban yahay dalka JDS, waxay muddadii uu socday tababarkaasi halkaa ay ku qaateen duruus ku saabsan kordhinta tacabka beeraha, barnaamijka iyo xeerarka XHKS, iyo la socodsiinta qorshaha dawladda ee xagga beeraha, waxaana ka qayb qaatay casharradaa lagu bixinayey tababarkaa Xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS, Wasiirro iyo madax kale.

Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo xiritaankii tababarkaa khudbad dheer oo ay ku dheehnayd xikmad iyo waayo-aragnimo leh ka jeediyey, wuxuu ugu horreyntii mahad naq iyo ammaan ballaaran u jeediyey guud ahaan dadkii ka hawlgalay isku dubbarridka hawlaha la xiriira tababarkaa u dhammaaday wakiillada ka socday beeraleyda Soomaaliyeed, gaar ahaan shaqaalaha oo qayb libaax ka qaatay baraarujinta iyo kicinta beeraleyda, taasoo daliil u ah inay garteen inay yihiin lafdhabarka Bulshada hantiwadaagga ah.

Jaalle Siyaad, Madaxweynaha JDS, isagoo ku hadlaya magaca Xisbiga, kan Dawladda iyo kan Ummadda JDS, wuxuu kaloo hambalyo iyo mahadnaq kaa la mid ah u jeediyey guud ahaan beeraleyda Soo-

maaliyeed oo haatan u guntatay inay dalka gaarsiiso isku fillaansho xagga cuntada iyo Gobolka Shabeelada Hoose ee isna suurta gelisay in lagu guuleysto ujeeddooyinkii laga lahaa isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda, taasoo ay astaan u tahay guulaha laga gaaray tababarkii laga lahaa isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda, taasoo gaaray tababarkani oo u xirmay.

Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu si qayaxan uga murmay hadafkii laga lahaa tababarkan, taasoo uu sheegay inay sidii beeraleyda Soomaaliyeed oo ku kala nool Gobollada iyo Degmooyinka aad u kala fog ay isku bran lahaayeen isla markaana ay isu weydaarsadaan waayo-aragnimadooda si ay uga kala faa'iideystaan dhibaatooyinka Gobol kasta u gaarka ah ugana tabaabushaystaan siyaabihii ay ugu gaashaaman lahaayeen « Waxaa kaloo ka mid ahayd ujeeddooyinkii laga lahaa tababarkan beeraleyda inay ka dooraan arrimaha la xiriira kordhinta wax soo saarka iyo tacabka beeraha si looga gaaro guddoonka ah isku fillaansho xagga, cutada iyo in la siiyo casharo ku saabsan ka hortagga cudurrada, sare u qaadidda garaadka siyaasiga ah si looga dhaadhiciyo danahooda iyo hadafka Kacaanku uu ka damacsan yahay xagga horumarinta tacabka beeraha »,ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Madaxweynaha JDS, Jaalle Siyaad oo hadalkiisi sii wata wuxuu yiri:«Waxaan huubaa muddadii uu socday tababarkan inaad ka faa,iideysateen waxyaabo badan oo la xiriira siyaasadda, dhaqaalaha, ka hortaga cudu rada iyo khibrad dheeraad ah oo la xiriira cilmiga beeraha,, waxaana intaasi oo dhami loogu gol lahaa inaad gaartaan nolol ka wanaagsan tan aad maanta ku nooshihiin ayuu yiri Jaalle Siyaad, wuxuuna weydiistay dadkaa uu u xirmay tababarkaasu inay u gudbiyaan waxyaabaha ay ka kororsadeen tababarkaa beeraleyda kale ee danyarta ah ee ku nool tuulooyinka iyo beelaha dalka.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo ka warramay faa'iidooyinka ay leeyihiin iskaashiga iyo wax wada qabsiga, wuxuu sheegay in waxtarka bani,aadamku uu qiimo leeyahay marka uu yeesho iskaashi, wax wada qabsi iyo isku kalsoonaan iyadoo isla markaana lagama maarmaan ah inuu yeesho bartilmaameed iyo hadaf uu ku hiranayo.

« Shaki iigama jiro inaad gaareysaan himilooyinka aad higsanaysaan oo ah nolol aayatiin leh haddii aad si lillaahi ah isu kaashataan muujisaan isgarabsi kalgacaltooyo leh idinkoo muruqiinna iyo maskaxdiinna maalaya», ayuu yiri Jaalle Siyaad.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Xooghayaha Guud ee XHKS, oo ka waramay falsafadda mabda,a hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, wuxuu caddeeyey in hantiwadaaggu uu yahay mid daryeelaya maslaxadda dabaqadda caryarta ah, kuwaasoo uu ku tilmaamay inay yihiin xa laal quudatada muruqa maasha ah wuxuna xaaraantimeynyaa ayuu yiri Jaalle Siyaad «nolosha ku dhisan kadeedka iyo kala sarreynta iyo isku dul noolaadka» oo ah tiirka saldhiga u ah mabda,a hantigoosadka ah».

Jaalle Siyaad wuxuu sheegay in hantiwadaaggu uu farayo ummadda tacbasho tiirarkiisuna ay yihiin sinaan, caddaalad iyo midnimo iyadoo si wada jir ah loo wadaagayo khayraadka dalka, wuxuuna ka soo horjeedaa qayb qayb iyo hantibuursinnimo.

Xooghayaha Guud ee XHKS, wuxuu sheegay in hantiwadaaggu uusan ahayn dhagax meel la dhigay balse uu yahay hab siyaasadeed oo loo doortay in bulshada lagu gaarsiiyo horumar iyo caddaalad.

«Waxaana la idinka baahan yahay inaad si cilmi ah u baartaan dhuuxdaanna macnihiisa qotada dheer si aad ugala soo baxdaan qalabkii aad kula dagaallami lahaydeen cudurrada, gaajada iyo aqoondarrida», ayuu yiri Jaalle Siyaad .

Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu sheegay in hantiwadaaggu uu yahay cilmi ballaaran oo uu leeyahay xirfad, tacab iyo xeelad, wuxuuna

farayaa in la dhawro ummad kasta dhaqankeeda, caadaaladeeda dabeecaada iyo duruufta gaar ahaaneed

«Barashada hantiwadaaggu Macna yeelan mayso haddii aan si ficil ah loo dhaqan gelin loona qaddarin dhaqan dhaqaalaha bulshada gaar ahaaneed», ayuu caddeeyey Jaalle Siyaad .

Xoghayaha Guud ee XHKS, oo hadalkiisii sii wata wuxuu yiri: «waajibaadka hantiwadaagga oo na saaran ma aha oo keliya in aan isku koobnaano ee waa inaan ummadaha weli la gumaysanayo aan ka saarno gunnimada, isla markaana aan la yeelanno ummadaha horusocodka ah iskaashi iyo isgarabsi hiil iyo hoobaleh».

Madaxweynaha JDS, Jaalle Siyaad wuxuu sheegay doorashada uu Kacaanku doortay mabda,a hantiwadaagga cilmiga ku dhisan waxay tahay ujeeddadeedu in

loogu daneeyo dabaqadda dan yarta ah oo ay ka mid yihiin shaqaalaha, beeraleyda, haweenka, dhallnyarada iyo Ciidammada Qalabka Sida, darteed ayuu yiri Jaalle Maxamed Siyaad Barer. «Dagaalkeennu waa inuu noqdaa mid dabaadeed oo ay ka qayb galaan xoogagga horusocodka ah».

Jaalle Siyaad wuxuu ku boorriyey dabaqadahaasi inay dagaal aan cib u noqosho lahayn ku qaadaan sidii ay ummadda Soomaaliyeed uga xoreyn lahaayeen aqoodarrida, gaajada iyo cudurka. Madaxweynuhu wuxuu caddeeyey inay lagamma maarmaan tahay in ummadda laga xoreyo suuqyada hantigoosadka ah oo maalinba maalinta ka dambeysa sicirkoodu sabeeynayo, wuxuuna sheegay in ayan dow ahayn ummadda Soomaaliyeed dhulkoodu uu yahay mid hodan ah inay lacagteeda adag ay ku bixiso cunno dibedda laga soo iibiyo.

Isagoo ka warramay Jaalle Siyaad cawaaqib xumada ay leedahay qabyaaladdu wuxuu sheegay inay tahay mid kala firdhinaysa midnimada Ummadda Soomaaliyeed, dhaawacaysa ujeeddada himilada ay higsanayso, wuxuuna ku tilmaamay inay tahay hubka fuleyga, hantigoosadka iyo keligii noolaadaha.

Ugu dambeystii Xooghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Siyaad wuxuu kala dardaarmay beeraleyda inay sidhab ah u fuliyaan una hirgeliyaan Wareegtadii ka soo baxday Guddiga Siyaasadda ee Golaha Wasaaradda oo ku saabsanayd isku fillaansha xagga cuntada. wuxuuna ugu hambalyeeyey dadkaa tababarka u dhammaaday inta aan ku jirin Xisbiga in loo aqoonsaday inay yihiin xubin sugayaal (Musharraxiin).

Madaxweynaha ka hor waxaa halkaa hadal ka jeediyey Madaxweyne Ku-xigeenka JDS, ahna kaaliyaha Madaxweynaha xagga arrimaha Madaxtooyada, Jaalle Sarreeya Gaas Xuseen Kulmiye Afrax oo wax ka taabtaabtay taariikhda beeraleyda Soomaaliyeed, dhibaatooyinkii ay la soo kulmeen waqtigii gumaysiga iyo sidii Kacaanku haatan u daryeelayo danaha beeraleyda yayar.

Madaxweynaha ku-xigeenka Jam. Dimuqraadiga Soo. Jaalle Xuseen Kulmiye wuxuu sheegay in Dawladda Kacaanka ahi ay si weyn ugu dhiirri gelisay beeraleyda Soomaaliyeed xagga tacabka, wuxuuna sheegay in taageero lacageed iyo qalabka beeraha lagaga shaqeeyo la fidiyey sidii ay u kordhin lahaayeen wax soo saarka tacabka beeraha.

Jaalle Kulmiye wuxuu ku boorriyey beeraleyda inya ka faa,ideystaan biyaha webiyada Shabeelle iyo Jubba iyo togagga faraha badan ee durdura gobollada uu ka kooban yahay qaarkood, taasoo uu sheegay inay guud ahaan dalka laga beeri doono saraca, hase yeeshe loo baahan yahy maskax iyo muruq uruursan. Waxaa kaloo xafladdaa lagu maamuusay xiritaanka tababarkaa khudbado qiimo leh ka jeediyey Guddoomiyaha Hoggaanka Iskashatooyinka ee Golaha Dhexe XHKS Jaalle Warsame Cabdullaahi Cali, Wasiirka Madaxtooyada Jaalle G.sare Cabdi warsame Isaaq iyo Guddoomiyaha Hoggaanka beeraha Jaalle Axmed Maxamed Ducaale oo ay guud ahaan ka waramееn ujeeddooyinka iyo waxtarka uu leeyahay tababarkaasi, habka uu u socday iyo sida ay lagama maarmaanka u tahay kordhinta tacabka iyo wax soo saarka. Madaxdu waxay caddeeyeen in horumarka iyo barwaaqaynta dalku ay ku xirantahy dadaalka iyo wax soo saarka isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda:waxayna qireen madaxdaasi in tacabka beeraha ee xagga iskashatooyinka uu sii kordhayo fasalba fasalka ka dambeya, iyadoo ay isla markaa ay sii tarmayaan tirada Iskaashatooyinka dalka.

Madaxdaasi waxay kaloo sheegeen in fikradda ah isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda ay ka soo fushay maskaxda Xooghayah Guud ee XHKS Jaalle Siyaad oo uu mar ku bixiyey in la abuuro iskaashi ka dhexeeya beeraleyda iyo shaqaalaha bishii Setember 1973kii islamarkaana dadweynaha si weyn looga dhaadhiciyo micnaha iyo ujeeddooyinka ka dambeeya isbahaysigaasi.

«Soo noolaynta tababarrada, kordhinta tacabka ilbixinta beeraleyda iyo sare u qaadidda garaadka siyaasiga ah waxa soo rogaalcelisay laba kacaleyntii Kacaanka iyo dhismaha XHKS »ayey yiraahdeen madaxdaasi. «Dhalashada Xisbiga waxay guul weyn u ahayd dadka horusocodka ah dhimasho iyo guul darrana waxay u ahayd dib-u socodka iyo rajeiyadda ayey ku soo gabagabeeyeen khudbaddoodi».

Xafladdii lagu maamuusayey xiritiinka tababarkaa waxa madaxdii ka soo qayb gashay halkaa goosgoos isgu jira heeso gabayo iyo majaajillo ku maaweeliyeen kooxo ka tirsan beeraleyda haatan tababarka ugu dhammaaday xarunta Ceel Jaalle.

# ISBAHAYSIGA SHAQAALAHA IYO BEERALEYDU WUXUU LAGAMA MAARMAAN U YAHAY HORUMARKA UMMADDA

Toddobaadkii Isbahaysiga Shaqaalaheenna iyo Beeralaydeenna oo lagu xusay Shirweyne Ummadeed oo lagu qabtay Xarunta Ceel-Jaalle ee degmada Marka bishii Jannaayo 10dii ilaa iyo 17dii, wuxuu lahaa ahmiyad micne leh wuxuuna mar kale ka marag kacay in xukunka shaqaalaha ee curtay 21kii Oktoobar 1969kii uu ku tiirsan yahay midnimada shaqaalaha iyo Beeralayda oo ay weheliyaan kooxaha kale ee xoogsatada oo horaan ku jiri jirey kadeedka ay ku haysay dabaqaddii dhiigmiiradka.

Si buuxda loogu garto ahmiyadda uu leeyahay isbahaysiga xoogagga waaweyn ee dhismaha bulshada cusub waxaa lagamamaarmaan ah in si cad loo muujiyo habka cusub ee waxsoo saarka uu kacaanka hantiwadaagga ah dhisayey in ka badan toddoba sano: Habka cusub ee wax soo saarka waa mid ku fadhiya hantidaageynta qalabka wax soo saarka taasoo ay micnaheedu tahay in maanta qalabka wax soo saarka gacanta ugu jiro xoogsatada — Shaqaalaha iyo Beeraleyda yaryar oo markii hore xooggooda hanti-buursadka ka gadan jirey iyagoo dhulgoosadku si xun u dhiigmiiranayey.

Sidee bay ku noolaayeen Beeraleydeenna waxaan ulajeednaa Beeraleyda yar yar ama kuwa leh goof iyo Shaqaalaheenna intii ka horresay Kacaankii Miiskiinnimada iyo saboolnimada Shaqaalaweynaha iyo Beeraleyda intii ka horreysay Soomaaliyada Kacaanka ah? Ha noqdeen Shaqaale ama Beeraley yaryar waxaa khasab ku ahayd inay u shaqeeyaan hantigoosadka ama dhulgoosadka, xataa kuwa goofafka leh waxaa marmarka qaarkood khasab ku ahayd inay ku cararaan ooy naf ka raadiyaan dhulgoosadka ama dullaaliinta iyagoo isla markaa noqda kuwa la dhiigmiirto. Waxay noqotay dabiici in siduu u curtay Kacaanka Hantiwadaagga ee 21ka Oktoobar, loona baabi'iyey Hantida gaarka ah ee hantigoosadka dhinaca qalabka wax soo saarka inay xoogsatadu hesho Shaqaalaha keliya ma aha ee xataa Beeraleyda yaryar iyo kuwa goofka leh awood ay iyagu isugu shaqeeyaan. Isbahaysiga Shaqaalaha iyo Beeraleyda wuxuu runtii yahay sidan: in la aqoonsado inay yihiin xoogagga Ummadda oo wax see saara, laakiinse tacabka bulshada hantigoosadka ahi tarmiyo hodannimada dabaqadda dhiigmiiradka. Isbahaysiga kan wuxuu ku xoogeysan karay uuna ku adkaan karay habka cusub ee wax soo saarka uu abuuray Kacaankeenna Hantiwadaagga ah oo salka ku haya Hantiwadaageynta qalabka wax soo saarka. Shaqaalaheenna iyo Beeraleydeenna oo ahaa dabaqado isbahaysto iyo ku wada jiray kadeedka dhiigmiiradka Hantigoosadka iyo dhulgoosadkaba ah, isla sidaas ayey maantana iyagoo isku duuban uga qayb qaadanayaan xoojinta xukunka Hantiwadaagga iyo abuuridda, xiriirka cusub ee wax soo saarka oo baabi'inaya dabaqadaha dhiigmiiradka ah xoogsatada markan ma aha Shaqaale aan lahayn qalabka wax soo saarka, Iskaashiga hantiwadaagga xagga Beerahana oo uu Kacaanku barbaariyey horeyna u mariyey waa mid beddelaya dabeecaddii hore ee beeralayda maaddaama ay isugu yimaadeen Iskaashatooyinka Hantiwadaagga ah eyna leeyihiin qalabka lagama maarmaanka u ah tacabka Beeraha Xiriiryadan cusub ee wax soo saaridda iyo habka cusub ee dhaqaalaha oo ku saleysan Hantiwadaageynta qalabka wax soo saarka waxay abuurayaan dhismaha Bulshada Hantiwadaagga oo ka kooban laba dabaqadood oo isbahaystay Shaqaalaha iyo Beeraleyda.

Kobcinta hantiwadaagga wa-

xaa la dhalanaya lana barbaaraya nooc cusub ee indheer-garadka oo asalkiisa iyo dabcigiisa dabaqadeed ku xiran yihiin Shaqaalaha iyo Beeraleyda oo markuu soo qaato Shahaadod Sare ama Jaamici ah, qabanaya hmawl maskaxeed. Midnimada labadan dabaqadood waxay dhidibbada u aasaysaa xukunka Hantiwadaagga ah.

Waa taas sababta keentay inuu Kacaankeennu hoos xarriiqo Ahmiyadda Isbahaysigu leeyahay isagoo abaabulay toddobaadka taas lagu xusay: Isbahaysiga wuxuu adkeynayaa dhismaha hantiwadaagga ah. shaqada ay u hayaan bulshada Hantiwadaagga aynu dhisayno ma aha mid markan u faa'iideyso Hantigoosadka iyo dhulgoosadka dhiigmiiradka ah. Shaqadoodu waa shaqo qaran dhinac kastoo ay kaga jiraan Warshadaha dawladda qalabkooda( wax soo saarka la hantiwadaageeyey, beeraha dawladda ama Iskaashatooyinka. Maanta shaqaalaheenna iyo Beeraleydeenna maadaama ay Shaqaday qabtaan ay tahay mid u faa'iideyneysa iyaga laf ahaantooda, qoyskooda iyo mujtamacooda, iyagaaba ahmiyad weyn siinaya kor u qaadidda Tacabka.

Isbahaysiga Shaqaalaha iyo Beeraleyda wuxuu kaloo ka yimaadaa samaynta farsamada makiinadeed oo lagama maarmaanka u ah taranka Tacabka beeraha iyo warshad-gelinta miraha beeraha ay beeraleydu soo saartay. Haddii beeraleydu haysanin wax ku filan oo u gooya qalabka tacab kordhinta lagama maarmaan u ah ayna taas ka dhalato in miyigu awoodu u yeeshaan waayo inuu Dhaqaaluhu ku kordhiyo miraha iyo khayraadka cayriinka ah ooy Warshaduhu u baahan yihiin, waxaa hoos u dhacaya cuntada dalka looga baahan yahay wuxuuna khatar ku sugayaa qorshaha warshadeynta loogu tala galay farsamo.

Taas Kacaankeenna si dhaqso ah ayuu u gartay markaana xoreyn buuxda siiyey si mar kale loogu habeeyo beeraheenna, isagoo dhiirrigelinayo horayna u marinayo, iyadoo laga takhalusayo goofafka ama beeraha yaryar qofka keli ahaan uu leeyahay, tacabweynaha beeraha oo ku saleysan hantiwadaagga taasoo lagu gaarayo Iskaashi xagga beeraha iyo abuurista beero dawladeed oo waaweyn kuwaasoo suurtagelinaya ku isticmaalka alaabadda farsamadeed. Jaalle Lenin waxay la ahayd in wax wadaqabsiga xagga beeraha ay tahay qayb ka mid ah Qorshaha dhismaha Hantiwadaagga ah. XHKS, oo higsanayo Lenin, wuxuu wax wada qabsiga u arkayaa habka beeraleyda loogu soo dhaweyn karo hantiwadaagga laguna xoojin kari isbahaysiga shaqaalaha iyo beeraleyda.

Runtii wacyiga ay ku jiraan Beeraleyda intooda badani aqoondarri iyo garaadkooda siyaasadeed oo yaraa — waxay dabaqadda Shaqaalaha ku dhalisay inkastoo iyaguba ay yaraayeen kacaanka billowgiisa, inay gacan siiyaan xoogsatada miyiga iyagoo xoogsatadaas u ah saaxiib iyo garab iyo isha horumarka farsamadeed. Dabaqadda shaqaalaha ku caawini jireen welina ku caawinaan ku iscticmaalka iyo hagaajinta makiinadaha, wxayna qayb kala qaataan shaqada beeraha iyagoo ku dadaalayey inay beeraleyda si dhab ugu diyaariyaan xagga xirfadda.

Maanta beeraley badanoo waagii hore aqoon la'aan ayaa noqday shaqaale la mid ah kiwii iyaga caawini jirey, waxayna ka shaqeeyaan beeraha Dawladda iyo Iskaashatooyinka. Intay bulshada Hantiwadaagga ah koreyso, Shaqada beeraheenna waxay isu beddelaysaa hawl Warshashadeed.

Markuu khayraadka dabiiciga ah ka dhigay hanti dadweynuhu leeyahay, dhulkana u oggolaaday qofkii ka shaqaynayo, markuu abuuray beero, dawladeed oo waaweyn, markuu dhiirrigeliyey wax wadaqabsiga xagga beeraha iyadoo la oggoonyahay in kala googoynta dhulka oo goofaf loo qaybiyo u lahayn faa'iido horumarka beeraha, Kacaanku Beeraleyda yar yar faa'iido dhaqaale keliya uma dhallinin ee wuxuu abuuray guruufta ayaga u oggol inay iskaga xoreeyaan gaajada iyo dhiigmiiradka kala duwan ooy qarniyaal ku jireen. Beeraleydeennu waxay noqdeen shaqaale dhisa, sida xoogsatada kale, aayahooda dambe. Sanooyin iyo sanooyin kaddib markay dad kale u soo shaqeynayeen, shaqaalaha iyo beeraleyda waxay markii ugu horreysay heleen fursad ooy iskood ugu shaqaystaan, iyagoo ku midoobay, himilada ay wadaagaan oo ku saabsan dhismaha Hantiwadaagga. Sidan ayuu xiqiiqo ku noqonayaa kuna adkaanayaa isbahaysiga Shaqaalaha iyo Beeraleyda, isbahaysi fasiraya wax wadaqabsiga Jaallanimo iyo isgarabgalka ka imanaya Shaqaalaha ka madaxbannaan dhiigmiirad.

# WARQAD MURTIYEED



JDS iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Jekoslafaakiya waxaa kaloo ay caddeeyeen in ay ku faraxsan yihiin guulihii dhaxalgalka lahaa ee laga soo hooyey qaaradda Afrika gaar ahaan xoogaggii gobannimadoonka ee Musambiik, Angoola, Cade Verde, Soa-Tome Prin Cipe, iyo Giunea Bisau kuwaasoo ku hoos jirey gumeysigii Burtuqiiska. Waxayna isla markaa labada dhinac soo dhoweynayaan Gobannimada ay gaareen dalalkaasi.

«Gaaridda gobannimo taam ah ee ay gaareen dalalkaasi ka baxay gacanta gumeysiga iyo kuwa kalaba waxay muujiyeen doorka horreeya ee qaaradda Afrika dalalka Hantiwadaagga ah iyo xoogagga horusocodka ah dagaalka ay ugu jiraan in la gaaro gobannimo iyo ciribtir guud ee midabtakoorka iyo xididda u siibioda nidaamka gumeysiga» ayey caddeeyeen labada dhinac.

JDS iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaagga Jekoslafaakiya waxay si lixaad leh u cambaareeyeen midab takoorka Koonfur Afrika siyaasaddiisa foosha xun oo uu ku cadaadinayo malaayiin Afrikaan ah. Waxaa kaloo ay cambaareeyeen gumeysiga iyo imberyaaliyadda oo had iyo jeer hii. iyo hooba siiya midabtakoorka Koonfur Afrika gaar ahaanna kuwa siiya hubka khatarta ah.

Arrinta Simbaabwe, waxay labada dhinac ku heshiiyeen iaan iyadoo aan lagu xireyn wax shuruud ah lagu wareejiyo xukunka dadka tirada badan ee Afrikaanka ah, waxayna isla markaa u riyaaqeen iyagoo tixgelinaaya dhaqdhaqaaqa cusub ee jabhadda waddaniga ah oy ka waddo halkaasi, taasoo suurtagal ku dhibaysa burburka dawladda yar ee caddaanka ah ee haatan ku amar taagleysa dalkaasi.

Xagga Namiibiya, Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya waxay sheegeen inay ka xun yihiin sida sharci darrada ah ee ay weli u haysato dalkaasi dawladda Afrika, waxaanna isla markaa isku raaceen baahida loo qabo in laga qaado tallaabo caalami ah si looga saaro Koonfur Afrika dalkaasi Namiibiya; isla markaana xukunka gacanta looga geliyo wakaallada xaqa ah ee Ummadda Namiibiya ku dhaqan (SWAPO).

Dhinaca Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku Gumeysto Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya waxay caddeeyeen in la siiyo gobonnimo taam ah oo haba yaraatee wax shurud ah ku xirneyn si dhaqsa ah.

Labada dhinac waxa warqad murtiyeed ku caddeeyeen in ay ka xun yihiin xiisadaha iyo dagaalka haatan ka aloosan Bariga Dhexe, taasoo halis ku ah nabadkeliyada caalamiga ah. Waxaa kaloo ay qireen in sida qura ee xal loogu gaari karo dhibaatada Bariga Dhexe ay tahay iyadoo Yuhuuddu ay ka baxdo gebi ahaan dhulkii ay ka qabsatay dawladaha Carbeed 1967.

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Jekoslafaakiya waxay wadajir u soo saareen warqad murtiyeed ku saabsan wadahadalladii rasmiga ahaa ee ku dhexmaray magaaladani Muqdisho intii uu booqashada ku joogay Dalka JDS Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Jekoslafaakiya Jaalle Bohuslav Chonupek iyo wafdigii uu hoggaaminayey intii u dhaxaysey 16 ilaa 20ka Bishani.

Wadahadalladaas dhex maray Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya oo ku socday jawi saaxiibtinnimo iyo isfaham waxaa lagu soo qaaday horumarinta xiriirka saaxiibtinnimo ee ka dhexeysa Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya, iyo arrimaha ka taagan dunida maanta.

Warqad murtiyeeddaa ay soo saareen Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya waxay labada dhinac ku xuseen inay saldhig adag u sameeyaan iskaashigooda xagga

dhaqaalaha, Cilmiga, Farsamada, Dhaqanka, Qalabka war is-gaarsiinta iyo dhinacyo kale ee ay ku sii xoojinayaan iskaashigaasi.

Labada dhinac, waxay kaloo ku caddeeyaan warqaddaasi ay u wada dhan yihiin in ay taageersan yihiin horumarinta, iskaashiga ka dhexeeya Ururrada Shaqaalaha, Dhallinyarada, Haweenka iyo ururrada kale ee bulshada labada dal.

«JDS iyo Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Jekoclafaakiya oo saaxiibtinnimadoodu qayb weyn ka qaadanayso xoojinta nabadda iyo horumarinta bulshada adduunka waxay si gooni ah fiira gaar ah u siiyeen debcinta xiisadaha adduunka, xoojinta nabadda iyo nabadgelyada adduunka iyo wax wadaqabsiga caalamiga ah oo horey loo mariyo» ayey ku yiraahdeen warqaddaasi.

Labada dhinac waxay kaloo caddeeyeen in ay soo dhaweynayaan oo ay ku faraxsan yihiin horumarka ay gaareen dalalka hantiwadaagga ah iyo xoogagga horusocodka ah marka laga eego dagaalka ay ugu jiraan in dunidu ay ku waarto nabad iyo xasillooni iyo in ay oggol yihiin siyaasadda ah wax wada qabsi nabadeed.

Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya waxay kaloo warqaddaasi ay ku caddeeyeen in ay ku heshiiyeen in la ciribtiro nidaamka iyo xeeladaha uu ku adeegto isticmaarka caalamiga ah iyo cibibtirka sharciyada ku xad gudubka aadamiga ee ay ku dhaqmaan talisyada midabtakoorka oo ka mid ah xiisadaha maanta dunida soo food saaray.

Waxaa kaloo labada dhinac ay isla soo qaadeen siyaasadaha ay halista ugu yihiin nabadda, xornimada iyo sinnaanta ummadaha, siyaasadda gumeysiga, gumeysiga cusub iyo isku dul noolaadka iyo cadaadinta.

Labada Dhinac waxay kaloo aqoonsadeen xuquuqda Reer Falastiin iyo in la dhiso dawlad ay u taliyaan Falastiiniyiinta oo aayaheeda ka ta tashata, taasoo ay ku tilmaameen arrin saldhig u ah nabada ka waarta Bariga Dhexe. Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya waxa kaloo ay ku soo qaadeen Waraaqaddaasi inay ka xun yihiin loolanka hubeed ee dunida maanta kuwaasoo ay sheegeen inay lab iyo walaac geliyeen ka heshiinta iyo xalinta arrimaha Siyaasadda dhaqaalaha iyo kuwa kaleba waxaana isla markaa ay ku taliyeen in arrintaasi laga qaado Tallaabo wax-ool ah oo lagu joojiyo boollankaasi.

«Iyadoo la daryeelayo maslaxadda caamka ah ee nabadda adduunka waxaa lagama maarmaan ah in la xanibo oo la xaaraantimeeyo Saldhigyada Militeri ee Imbeeryaalistaha ee Badweynta Hindiya isla markaana ay noqoto Badweynta Hindiya Gobol nabadeed», ayey isku raaceen labada dhinac.

Labada dhinac ee Soomaaliya iyo Jekoslafaakiya waxay kaloo sheegeen iyagoo ka shiidaal qaadanaya Siyaasasdda dhex-dhexaadka ah inay u riyaaqeen go,aannadii ka soo dibad baxay shirkii shanaad ee ay isugu yimaadeen dawladaha dhex dhexaadka.


Warqaddaasi bayaanka ah waxa kaloo ay labada dhinac ku xuseen inay ayidsan yihiin hindisooyinkii ay soo jeediyeen JDDK oo ahaa in si nabad ku jirto lagu mideeyi dalkaasi, isla markaana laga saaro wixii ciidammo shisheeye ah ee Koonfurta Kuuriya.

Wasiirka Arrimaha Dibedda Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ee Jekoslafaakiya Bohuslav Chopek iyo wafdigii uu hoggaaminayey intii ay joogeen waxay soo booqdeen Mashaariicda Horumarinta dalka qaarkood waxaana ay wadahadallo kala duwan la yeesheen Madaxda dalka JDS.

# YAA LOO DAJIYEY XEERKA QOYSKA?

*Maqaalkan waxaan ka soo qaadanay Wargeyska Himilo codka Ururka Haweenka Soomaaliyeed.*

*Haweenka Soomaaliyeed taariikhdoodu baal Dahab ah ayey kaga jirtaa buugga halganka ee Ummadda Soomaaliyeed. Waa lama illoobaan waana wax waaraya dhiiggii daahirka ahaa ee ay Gobannimada dalkeenna u qubeen Xaawa Cusmaan iyo haween kaloo daljirayaal dasoon ah.*



Horraantii bishii Jannaayo ee ina dhaaftay guriga shaqaalaha ee magaalada muqdisho waxaa lagu qabtay shir aqoon isweydaarsi ah oo looga dooday ammuuraha la xiriira xeerka qoyska, waxaana lagu soo beegay sanad guuradii labaad ee ka soo wareegtay markii la soo saaray xeerka oo ahayd bishii Jannaayo 1975kii, Doodaas oo ay qaban qaabisay Laanta haweenka ee hoggaanka abaabulka XHKS, waxaa ka soo qayb galay Ururka haweenka iyo guddiyaasha kala geddisan, Guddiyaa-



sha dhaxdhaxaadinta qoyska ee degmooyinka Xamar iyo garsoorayaasha ku shuqul leh arrimaha qoyska.

Dooddaas waxaa khudbad qiima weyn leh ku furay wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta Jaalle Cabdisalaam Shiikh Xuseen, kaddibna waxaa la dhax dhigay dooddii oo sida runta ah ahayd xisaabtan cad oo lagu xisaabtamay xeerka qoysku labadii sano ee uu jiray wixii ka hirgalay, wixii aan hirgelin, waayay iyo sababaha hakiyey, Habka ugu wanaagsan ee xeerkaas looga faa'iideysan karo iyo guud ahaanba dhuuxa ku jira.

Jawigii galabtaa hoolka shirarka ee guriga shaqaalaha ka muuqday haddaan ku yara hakanno waxaa aad ii dhaqaajiyey haweenkii boqolaalka ahaa da'kasta laka ee halkaa isugu yimid sidii xammaasadda la hayd ee ay doodda u xiisaynayeen iyo qotodheeraanta fikradaha ay soo jeedinayeen, taasoo ku tusaysa heerka sare ee uu gaaray wacyiga siyaasiga ah ee haweenka Soomaaliyeed, heerkaasoo shaki la'aan uu gaarsiiyey halgankii kacaannimada ahaa ee ay safka hore uga jireen muddadii uu soo jiray kacaankeenna barakaysan;;; waa hagaag, hadaaba inagoo ka shidaal qaadanayna dooddaas iyada iyo waayo-aragnimadii kale ee aragtida iyo baraatikaduba ayna tuseen, aynu isweydiino: xeerka qoyska muxuu ku hubaysan aydoloojiyadda han-ee uu u danaynayaa?

Falsafadda ka dambaysa maxay tahay? dhaqan gelintiisa maxaa lagala kulmay?

haddase maxaa loo baahan yahay si xeerkaasi u hirgalo loogana faa'iideysto?.

Kacaanka Soomaaliyeed isagoo ku dhisan yahay? yaa loo dejiyey tiwadaagga cilmiga ah ee u caafimaad qabka caddaaladeed iyo sinnaan ku dhisan, iyagoo rumaysan qoysku in uu yahay asaaska bulshada, sidii uu caddeeyey macalinka Kacaanka Jaalle Siyaad, isagoo u dhabagalayey habkii qaabka darnaa ee uu ku dhisnaa xeerka qoysaska Soomaaliyeed, ama qaarkood, isagoo dareemay dhaqanka gaboobay ee aan waqtigan la socon karin, oo ay dadkeenna qaarkii haysteen, dhaqankaasoo ah haweeneydu in ay tahay ruux ninka ka hooseeya oo uu asaga adoonsado isagoo intaasoo dhan tix gelinaya, ayuu kacaanka Soomaaliyeed ka fursan waayey in uu xeer u dejiyo carrageddinta iyo cusboonaysiinta dhaqanka bulshada Soomaaliyeed.

Kaddibna waxaa la billaabay baaris qoda dheer oo muddo sanooyin ah socotay, si weyna looga baaraandegay iyadoo bulshada Soomaaliyeed ee Kacaanka ah dhinac kasta looga tixgeliyey, xag dhaqan, xag, diineed, xag mabda'a xag dhaqan iyo aqooneed intaba.

Mirihii baaristaas dheer ka soo baxay waxay noqdeen xeerkii qoyska ee soo shaac baxay Jannaayo 1975kii.

Waxaa xusid mudan fikrad khalad ah oo ay dadka qaarkii xeerkaas u fahmeen, dadkaas badidooda warxumatashiil khalday; fikraddaasi waxaa weeye xeerka qoyska in uu yahay mid loogu danaynaayo haweenka oo kaliya;

Xeerka qoyska runtiisa sida uu Wasiiraka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta caddeeyey, waa mid loogu talagalay haweenka oo kali ah ma ahee guud ahaanba qoyska Soomaaliyeed in uu noqdo mid caafimaad qaba iyo iskaashi ku dhisan; waa in qof kastoo qoyska ka mid ahi uu helaa xuquuqda iyo xushmadda aadaminimo ee uu mudan yahay, qofkii qoyskaas ka mid ah ee hore kadeed iyo cadaadis uu qabayna laga daayo cadaa-

dintaas, maxaa wacay mabaadi'da xalaasha ah ee aynu ku dhaqano (Hawl iyo hantiwadaagga cilmiga ah) ayaa ku dhisan in bulshada looga dhammeeyo iskadeedka iyo is-addoonsiga.

Haddii haweenka Soomaaliyeed ay yihiin kuwii uu ku dhacayey kadeedkii ijtimaaciga ahaa ee jiray xooggiisu, marka dhankaas la eego waa la oran xeerka qoyska, waa xeer daryeelaya haweenka Soomaaliyeed, daryeelkaasoo faa'-iideed, waayo oosoa

dadiisu ay u soo noqonayso bulsho weynta dhammaanteed, waayo qoyskaas iskadeed iyo isxaqrid ku dhisan bulsho caafimaad qabta kama dhismi karto.

Xeerka qoysku sida la ogyahay wuxuu xallinayaa dhibaatooyinka ijtimaaci ah, dhibaatooyinka ijtimaaciga ah ee xagga dhanka la xiriira dadka maskaxdoodana ku xidhantay si sahlana laguna ciribtiri karo waxay u baahan yihiin dadweynuhu in ay gartaan dhibaatooyiska ugu jira dhaqammadaas gaboobay kaddibna ay ku qancaan inay lagama maarmaan tahay in la daryeelo.

Sidaa awgeed xeerka qoyska fulintiisii dhibaatada ugu weyn ee ka hortimid waxay noqotay:

Dad badan oo weli dhaqankii gaboobay maskaxdooda ku xabag ahaan ugu dheggan yahay xeerka qoyskana u qaatay balaayo cirka ka soo dhacday, sidaa awgeedna ku dadaala in ay ka dhuuntaan, waxaa iyaguna jira dad xeerka qoyska ka dhigtay hub ay ku danaystaan oo si qalloocan uga faa'iideystaan, ka soo qaad naago intay nimankoodii oo meel fog jira ka soo carareen ku andacooda in uu ninkii nacay sanooyin fara badan ka maqnaa ee Maxkamadda weydiista in laga fasaqo, kaddib markay marqaatiyaal been ah urursadaan, arrintaas iyo arrimo la mid ah oo dhacay waxaa doc-ddii aan kor ku soo xusnay ka sheegay Garsoorayaal xog ogaal ah.

Waxaa kaloo iyana nasiib darro ah dadkii xeerku u danaynaayey ee xurriyaddooda u soo baxay qaar ka mid ah inay ka carareen ama kaba war hayn aqoon la'aan ama warxumayn loo warxumeeyey awgeed.

Waxyaalahaas oo dhammi waxay ka mid ahaayeen arrimihii lagu falanqeeyey dooddii guriga shaqaalaha ee jannaayo.

Su'aasha dhimani haddana, waxay tahay sidee baa looga gudbaa dhibaatooyinkaas? ama sidee ugu habboon ee lagu hirgelin karaa xeerka qoyska? Maaddaama dhibaatooyinka xeerka qoyska ka hor yimid ay yihiin qaar la xiriira Garaadka dadweynaha sida shirkaasi u arkayey, waxaa muuqatay sharcigaan falsafadda ka dambeysa iyo arrimaha ku heeran oo dhan midba in ay u baahan yihiin fasiraad iyo ka dhadhicin qotodheer oo dadweynaha laga dhaadhiciyo.

Jaallayaashii dooddaas goob joog ka ahaa waxay aad ugu riyaaqeen talo dhaxal gal ah ee uu soo jeediyey Jaalle Cabdisalaam Shiikh Xuseen Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta taladaas oo ahayd in la qaado olole ballaaran oo lagu hirgelinayo dadkana looga dhaadhicinayo xeerka qoyska sidii hooo reba caado noqon lahayd marka la hirgelinayo tallaabo kacaanimo ummadda wax tar weyn u leh.

Jaalle Cabdisalaam wuxuu haweenka horusocodka ah ku guubaabiyey in ay xil gaar ah iska saaraan dhalan rogidda iyo cusboonaysiinta bulshada Soomaaliyeed hirgelinta go'aannada loogu talagalayo in ujeeddadaas lagu gaaro kuwaasoo uu ka mid yahay xeerka qoyska, isla markaas wuxuu Wasiirku farta ku fiiqay arrin muhim ah taasoo ah marka halgan dabaqi ah lagu jiro, haweenku in ayan u qaadan in ay dhammaantood isku dabaqad yihiin runta waxay tahay haweenku dabaqad kasta way ku jiraan xagga horusocodka ah iyo dibusocodka ah way u kala jaban yihiin, sidaa awgeed waxaa loo baahan yahay haweenka horusocodka ahi in ay xaqiiqdaas indhaha ku hayaan xil gaar ahna iska saaran difaaca iyo hirgelinta mabaadi'da horusocodka ah. Isla markii uu haweenka horusocodka ah kaalintooda tilmaamaysa, Jaalle Cabdisalaam wuxuu diirka ka qaaday arrin in carrabka lagu adkeeyo mudan taasoo ah hirgelinta iyo difaaca xeerka qoyska in uusan ahayn xil saaran haweenka horusocodka ah oo kali ah, ee uu yahay xil saaran dhammaan dadka aaminsan mabdi'da xalaasha ah ee uu xeerkaasi ku dhisan yahay iyo inta daacadda u ah daryeelka iyo horumarinta bulshada Soomaaliyeed.

*HAMBALYO HAWEENEYEY.*



# WAXBARASHADU WAA ASAASKA HORUMARKA

W. Q. Cali Xaaji Aadan



Intaynaan mawduuca gudagelin waxaa inala habboon inaan horta wax ka taataabanno siday xaaladdu ahayd xagga waxbarashada intii ka horreysay Kacaanka barakaysan ee 21kii Oktoobar 1969, Soomaaliya, sida waddamada Adduunka saddexaad badidooda oo kale, waxay muddo dheer ku jirtay gacanta gumeysiga oodhismihii dhaqaale-bulsheedka u sameeyey si uu u noqdo mid horjoosada horukaca dhaqaalaha waddanka iyo horumarka bulshada ee dadweynaha markaasna ciriiriya baahinta waxbarashada dadka.

Gumeysigu wuxuu si wacan u ogaa in owooddiisu ku fadhido dib u dhaca iyo aqoondarrida dadweynaha, wuxuu kaloo ogaa in awooddaas ay ku tiirsan tahay kala goynta dadka Sidaas awgeed ayuu gumeysigu markastaba u nooleynayaa una dhiirrigelinayey qabaa'ilka.

Markii gobannimadii la haleelay. kaddib markii tobaneeyo sano dagaal kharaar gumeysiga lagu qaaday, dadweynaha wuxuu dadkii xukunka Soomaaliyada xorta qabtay ka filanayey inay burburiyaan bulshadii hore iyo dhismihii bulsho siyaasiga uu gumeysigu abuuray; wuxuu filanayey in la qaado tallaabooyin siyaasi ah waddanka u dhaliyey isbeddel kaamil ah xag dhaqaalae bulsheed iyo xag siyaasadeedba. Laakiin Ummadda waxay filaneysay ma helin: muddo ku dhow sagaal sano iyo bar bay wax sugtay. ummadda iyo kooxda taliska gacanta ku haysay, intii kacaanka ka horreysay waxaa ka dhex dhismay gidaar weyn oo weliba ku sii xoog weynaa miyiga ay ku noolyihiin dadka inta badan. gaar ahaan, reer miyiga waxay iskaga dhex noolaayeen dhaqaale yarida si dhib ah ugu oggolayd inay helaan waxyaalaha lagama maarmaanka, iyagoon taageero iyo mucaawino toona dawladda dhexe ka haysanin, weliba xagga waxbarashada xaaladdu waxay ahayd mid halis ah.

Aqoon la'aantu way badnayd wax qorsho haaa oo loo diyaarsad ay in aqoondarrida lagula dagaallamana ma jirin. waxaa matalan gebigiisuba maqnaa hab qorsho. oo laga helo inta fasallo sannad waliba loo baahan yahay, tirada dhallinta da'da dugsiga, gaartay iyo inta macallin oo loo baahnaa inay dhallintaas wax barto.

Waxbarashada xaggeeda, waxaa innagu filan inaan xusuunano in intii ka horreysay kacaanka, dugsiyada sare laga heli jirey oo keliya magaala — madaxda iyo gobolka waqooyi — Galbeed. xagga degmooyinka, waxbarashada waxay ku koobnayd oo keliya dugsiga hoose, magaala — madaxda gobollada qaarkood oo keliya ayaa lahaa dugsiyo dhexe, waxaana wax laysku bari jirey afaf qalaad maadaama markaas afka Soomaaligu qornayn.

Waxbarashada sidan loo ciriiriyey waxay qoysasa badan ku khasbaysay inay carruurtooda dugsiyada ka joojiyaan markay awooddooda dhaqaaleed u suurtagelin — weydo inay waxbarasho meel meeshay deggan yihiin ka fog ugu diran. sidaas awgeed dhallinyaro badan ayaa sidaas Waxbarasho ku geftay kuwaa ugu nasiib roon waxay ka dhasheen qabto, kuwa kaloo badanna magaalada ayaa soo jiidan jirtey, halkaasoo ay ku biirayeen dadka shaqada la'. xaaladda bulsho — siyaasadeedka markaas jirtay waxay fursad siinaysay oo

kelia carruurta dadka ladan amaba xiriir la—dhalasho ama xiriir kale la leh kooxda danaystada ahoo xukunka haystay. Carruurtaas waxay ahaayeen kuwo si gaar ah loo daneeyo oo albaabada waxbarashada oo dhan u furan yihiin ilaa ay ka gaaraan heer joomacadeed iyagoo weliba ka faa'iideysanaya barasho deeq dibadeed. Caddad yar oo carruurta xoogsatada ka mid ah ayaa nasiib u helay inay aqoon kordh's taan iyadoo taas laakiinse la socota dhibaatooyin gaar ahaaneed ay iyaga ama qoyskay ka dhasheen la kulmeen.

Laakiinse xataa qofkii wax bartay, hadduusan si adag ugu xirnaan dabaqadda xukunka haysa, ma heli karin shaqo ku habboon oo badiba waxaa dhici jirtay inuusan helin shaqo dhan kastaba ha noqotee. waa wax la hubiyey in iyadoo dhallinyaro Jaamaciyiin ah amaba sita shahaadooyin dugsi dhexe ama sare ay shaqo la'aayeen haddana dad jaahil ah oo aan wax-qadab iyo karti lahayn loo dhiibi jiray jagooyin xil weyn leh taasoo ku dhacday xiriirka ay kooxda danaysatada la lahaayeen. xaalad sidaas ah waxay dadkii ku dhalisay inay il-xun ku eegaan waxbarashada lafteeda maadaama ay arkeen in aqoontii waxba noiosha u taraynin: Dadweynihii waxay arkeen in afmiinshaarnimada, qabiilnimada, eexda iyo laaluushka ka qiimo badnaayeen aqoonta.

Nasiib wanaag waxaa 21 Oktoobar 1969, curtay kacaanka ay dhalashadiisu sabab u ahayd xumihii bulsheed oo batay oo isku biiray oo waddanka gaarsiiyey meel halis ah.

Kacaanku wuxuu ictiqaadsanaa in bulshada isbeddel weyn lagu samayn karin haddana marka hore lagu dadaalin oon la hormarinin waxbarashada sidaas darteed wuxuu xaashidii koowaad ku gooyey in dagaal lagu qaado aqoondarrida tixgelinta iyo ahmiyadda kacaanku waxbarashada u aqoonsaday ma ahayn wax afka ku sheeg ah — Tallaabooyinka ugu horreeyey oo uu kacaanku qaaday waxaa ka mid ah inuu xubno dawladeed iyo madax maamuleed ku magacaabo dad Jaamaciyiin ah amaba ka soo baxay dugsiyada sare, muddo gaaban gudaheed shaqo lagu siiyey ayaa dadkii shahaado jaamici dugsi sare iyo dhexeba haystay; taas waxay dadweynihii ku soo celisay kalsoonidii iyo kalgacaylkii ay aqoonta u hayeen kacaanka intaasoo keliya iskuma koobin: qoraalkii af soomaaliga ayuu hirgeliyey taasoo u suuragelisay inuu ku dhaqaaqo barnaamijka weyn oo loogu talagalay in waddanka aqoondarrida lagaga baabi'iyo. Iyadoo ku isticmaalayo habka iskaa wax qabso kacaanku wuxuu sannadba sannadka ka dambeeya dhisay fasallo, isagoo waxbarashada ka dhigay khasab oo lacag la'aan ah ilaa iyo dugsiga dhexe.

Shaxdan ayaa muujinaysa isbeddelka weyn oo ka dhacay xagga waxbarashada toddobadii sano ee kacaanku jirey.

Arday sanadka 1960-70 sannadka
Fasal 55.023
Macallimiin 979
1.873
1976-77 korka boqodkiiba
293.330 43%
5.250 43%
8,840 371%

Waa in la xusuusnaado in tirada macallimiinta ee sannadka 1969-70 ay ku jiraan macallimiinta dugsiyada dadka qalaad maamulan jireen; tan kalena, in tirada macallimiinta sannadka 1976-77 lagu darin saddex kun dhallinyaro oo dugsiga xalane haatan tababar ugu jirto, kuwaasoo baraal ka noqon doona dugsiyada hoose.

Intii kacaanka ka horreysasy waddanka ma lahayn Jaamacad, waxa jirey oo keliya Machad Jaamici ah oo ku eg waxbarasho laba sano ah oolagu barto sharciga iyo dhaqaalaha. Arday badan waxaa marka khasab ku ahayd inay dibedda cilmi u raadsan, Taas waxay dhalin jirtay mashaakillo badan oy ka mid yihiin dhallintoo hiddihii iyo dhaqankii Soomaaliyeed ka 'age iyagoo soo qaadanaya dhaqan iyo Aydiyoloji burjuwaasi ah. Si dhibaatooyinkaa looga hortago. loona **baabi'iyo, loona horumariyo** hiddaha Soomaaliyeed, loogana takhasuso laamaha waxbarashada oo kala duwan iyo si dhalaanka looguna barbaariyo aydiyolojiyada hantiwadaagga ah, kacaanku wuxuu 1971 aasaasay Jaamacadda Ummadda, isagoo baabi'inaya barasho-deeqyada dibedda laga reebo kuwa lagama maarmaanka u ah takhasus iyo aqoon gaar ah.

Maanta Kulliyadaha Jaamacaddeena waa sagaal: Sharciga dhaqaalaha tababarka barayaasha, beeraha, daawada, xoolaha kiimikada, Jeolijiyada, iyo Injeriiniyadda. Sannadkan waxbarashada ee 1976-77 waxaa kulliyadaha kala duwan isku qoray 670 arday ay qaarkood yihiin shaqaalaha dawladda, imminka waxa la wadaa dhismihii xarunta cusub ee Jaamacadda iyadoo dhismihiisa ay isku garabsanayaan Soomaaliya iyo sayladda Yurub.

Sidii loo hirgeliyey qoraalka

EEG BOGGA 48

# XIRIIRKA QIYAASTA MIISAANIYADDA 1977 IYO HORUMARKA DALKA




W.Q. Cabdullaahi Salaad

Miisaaniyaddu, haddii si kooban loo tilmaamo, waa aaladda siyaasadda dhaqaalaha ay ku isticmaasho dabaqadda xukunka gacanta ku hayso si ay ku kontaroosho dhaqaalaha, ay ugu qayb — gasho horukaca dadka, ay u geyso ujeeddooyinka waaweyn ay bulshadu tahay inay gaarto.

Siyaasadda dhaqaalaha oo waddanka u degsan iyo micnaha Siyaasaddaas, waxaa laga garan karaa miisaaniyadda. Miisaaniyaddu dhinacna waxay caddaynaysaa hawlaha la doonayo in muddo gaaban lagu fuliyo, dhinac kalena waxay ku saabsan tahay u r u u r i n t a d a k h l i g a . l a b a d a n dhinac waxay kala yihiin laba madax oo midna ku saabsan yahay raasamaalka, midna hawlaha socda iyo dakhliga. oo u kala baxa xisaabta raasumaalka iyo xisaabta hawlaha socda.

Faaqidaadan waxa ku saabsan tahay Miisaaniyadda dalka ee sandankan 1977, maadaama ku — talagalka Miisaaniyadda ku xiran yahay horumarka dhaqaalaha oo imminka waddanka laga wado, waxay ila tahay inay habboon tahay inaan horta wax ka sheegno horumarka dawladda kacaanka waxay durba ku dhaqaaqday inay dejiso dadka iyo dhibaatada dabeeciga ahayd dhaawac gaarsiisay, iyadoo ka qayb gelinayso qaybta beeraha iyo tan Kalluumeysiga ee Sablaale, Kurtun-waarey, Dujuuma, Cadale, Eayl iyo Baraawe Hawlaha dejinta waxay ku kaceen qiime dhaqaaleed oo weyn oo saameeya Miisaaniyadda dalka dhinac kalena dawladdu waxay isku taxallujisay inay fuliso mashaariicda horumarinta ee qorshaha shanta sano 1974—1978. Qaybinta awoodda maamulka guudna wuxuu Miisaaniyadda ku kordhiyey madax kharaj kale. Dawladdu waxay qara-



maysay wax dibed ka keenidda iyo hawlaha qaybinta badeecadaha lagama maarmaanka ah. taasi waxaa looga dan lahaa (b) in la qorsheeyo badeecadaha dadweynuhu u baahan yahay, (t) in la kordhiyo dakhliga si maalgelinta raasamaaliga ah u taranto. tallaabadan waxay noqotay mid Dawladda kacaanka ah u suurta gelisa daafacaadda danaha dadweynaha.

Haddana u soo jeesanno Miisaaniyadda dalka sannadka 1977 waxaan oran karnaa in Miisaaniyaddaasi ku dhisantahay lacag gaaraysa Sh. SO. 168.640.642. Dakhliga ka soo galay xagga xisaabta hawlaha joogtada ah iyo xagga xisaabta raasamaalkaba waxay yihiin Sh. SO. 1257.892.012 iyadoo dakhligii sannadkii ka horreeyey ahaa Sh. SO. 1089.188.370. haddii la eego dakhliga xagga hawlaha socda waxaa dakhliga raasamaaliga ah ku siyaaday Sh. SO. 21.171.587. oo u dhiganta 6/2 %

Ujeeddooyinka aasaasiga ah ee Miisaaniyadda Sannadkan 1977 waxaa ka mid ah ka qayb galka horumarinta dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada ee dalka oo xoogga saaray sidii lagu gaari lahaa isku filnaasho xagga cuntada intaan 1980 la dhaafin. si ujeeddadaas looga rumeysiiyo, dawladda kacaanka ah waxay ahmiyad weyn u aqoonsatay qaybaha saldhigga u ah horumarinta dhaqaaleed ee dalka, iyadoo ugu talagashay maalgelin mar waliba sii siyaadeysa. siyaasaddaas waxay tixgelinaysa kordhinta maalgelinta qaybaha hoos ku taxan oo ku barbar qoran inta lacag ee loogu tala galay.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Qaybta Beeraha | Sh. SO. | 28.000.000 | 55.500.000 |
| » Warshadaha | Sh. SO. | 30.000.000 | 47.170.000 |
| » Xoolaha | Sh. SO. | 20.350.000 | 26.360.000 |
| » Hawlaha Guud | Sh. SO. | 11.860.000 | 30.000.000 |
| » Kalluunka | Sh. SO. | 10.130.000 | 14.840.000 |

Sannadka 1977 Waxaa lagu talagalay in al kordhiyo maalgelinta qaybaha lagu horumarinayo. sanadka hore qaybahaas waxay heleen beeraha Sh. SO. 27,5 Malyuun; hawlaha guud 17,17 Malyuun; xoolaha 6 Malyuun; hawlaha guud 18,14, Malyuun, iyo kalluunka 4,71 Malyuun. kordhinta.

KA Yimid Bogga 46aad

Afka Hooyo waxaa dhaqaaqay laba olole aqoondarrida lagula dagaalayey oo guul weyn laga gaaray. Ololuhu waxay kala ahaayeen Ololihii la qaaday 1973 oo magaalooyinka looga tirtirayey wax-qoris iyo wax-akhris la'aanta iyo OHRM. oo la qaaday 75, intaasna waxaa dheer go'aankii waxbarashada ilaa iyo heerka dugsiga dhexe, go'aankaasoo ay dantiisu tahay in dhallinta laga xoreeyo aqoondarrida.

Waxaa waajib ah in la xusuusto in tallaabooyinkaas oo uu kacaanku qaaday si uu ugu horumariyo uuna u baahiyo waxbarashada waxba tari lahayn haddaan kuwaas la raacinin in la soo saaro iyo deegaanka Soomaaliyeed, sidaas awgeed Macallinka Soomaaliyeed wuxuu ku dadaalay, dhibaato kasta ha kala kulmee, inuu diyaariyo buugaag dugsiyeed oo dhan 135 oo af Soomaali ku qoran. Waxaa lagu talo jiraa in sannadka waxbarashada 79-80 dugsiyada loo soo saaro buugaag lagu isticmaali karo laga billaabo fasalka koowaad ee dugsiga hoose ilaa iyo fasalka ugu dambeeya ee dugsiga Sare.

Soomaaliyeynta barsaamijka waxbarashada oo ku suurtowday qaadashada buugaag dugsiyeed oo af Soomaali ku qoran waxay leedahay laba faa'iido. Tan labaadna, waxay suurtagelisay in sannadaha waxbarashada la yareeyo, min 12 sano ilaa 10 sano.

# HEER KAMA DANBEYS AH AYUU MARAYAA HALGANKII REER SIMBAABWE

W. Q. Cabdi Idiriis



Inkasta oo sanadahan dambeba arrinta Simbaabwe dhegaha **dadyowga adduunka ay aad ugu** soo dhacaysey, inkasta oo dalalka Afrfika iyo dadyowga horusocodka ahi ay fagaarayaasha Adduunka ku soo bandhigi jireen dawdarrada lagu hayo Ummaddaasi haddana gumeystayaashii caddaanka yar dalkaa ku abuurtay dani umay run sheegin kal hore wixii ka horreeyey.

Amuurtaasi waxay ku timid dhawr arrimood oo isbiirsaday:

1. Ummadda Reer Simbaabwee oo hubka qaaday.
2. Taageerada Afrika iyo dunida horusocodka ahi ee halganka Ummaddaasi.
3. Gumeysiga oo gabalkiisu sii dhacayo.
4. **iyo Foolxumooyinkii Imberyaaliyadda caalamiga ah ka gaadhay Angoola, Mosambiik, Kamboodiya iyo Fietnaam.**

Arrimahaasi waxay daboolka uga qaadeen nimankii dantooda ku fushanayey caddaanka yar ee Rodiisiya in sandulle looga fara maroojindoono Simbaabwe ceeb **iyo foolxumona ay kala huleelidoo** taan.

Sidaa awgeed waxay ugu muuqatay xaaladda dhinac nabadgelyo inay uga wareegaan taasi ayaana keentay in Maraykanku arrinta ay soo dhexgalaan ka dibna Ingiriisku shir gobannimo uu ku qabto magaalada Janeefa 28 Oktoobar ee 1976dii. Shirkaasi oo ay ka soo qayb galeen 4 wafdi oo gobannimadoonka ka socoda, mid qawleysatada u jooga iyo Ingiriiska oo guddoomiye ka ah bishii Diisambar 20keedii ayaa dib loogu riixay dabayaaqada Jannaayo markii la isku mari waaycy.

Si aynu u gararno runta xaalada haatan laga wada hadalayo ee **Simbaabwe waxa lama huraan ah** in aynu dib ugu noqono taariikhda. Dhulka gumeysigu Rudiisiya uu ula baxay oo 15.010 mayl oo wareeg ah ka kooban hodanimadaiisa xagga Beeraha iyo macdanta ayaa u soo jiiday in Nimankii wax gumeysan jirey ay qorsheystaan in laga dhaxal wareejiyo dadkii madoobaa ee u dhashay. Dadka Reer Simbaawe dhulkooda ninka loo magac daray oo la odhan jirey «Cecil Rhodes» waxa uu ahaa Ninkii ka Madax ahaa Shariikad Ingiriis oo cuqaashii «Lobengula» **ay fasax u siiyeen inay macdan ka** baadho dalkaasi.

Shirkadaasi waxa la xaqiijiyey in 1889kii boqoraddii Ingiriiska «Victoria» inay 25 sano Qandaraas ku siisay xukunka dalkaasi. 1914ki ayaa hadana Shirkaddaasi 10 sano oo kale loogu daray. Shirkadaasi markii ay timiba waxay ku dhaqaaqday in dadkii dalkaasi u dhashay **ay ku qasabto inay ka guuraan** dhulka macdanta iyo Beeraha.

Wixii ka dambeeyey dagaalweynihii 1aad ee Adduunka ayuu Ingiriisku u soo gonda degsaday maamulka woqooyiga iyo koonfurta Rudiisiya.

Koonfurta Afrika Caddaankii haystay ayaa damac ka galay in ay Rudiisiya ku darsadaan sidaa aw-

geed1922kii ayuu Ingiriisku caddaankii dalka Simbaawe deganaa cod uga qaaday inay gooni u taagnaadaan iyo inay ku biiraan Koonfurta Afrika.

15.000 ku dhawaadkii caddaanka ahaa waxay badidoodu goosteen in ay gooni u joogaan sidaa ay awgeed ayaa 1dii Oktoobar 1923kii Rudiisiya Dawlad Daakhili ah oo cadaan ahi ka dhalatay iyadoo aan waxba laga weydiin dadkii madoobaa ee dhulka u dhashay.

1926kii ayuu Ingiriisku guddi u saaray sharci dhulk u soo dejisa guddigaasi 1933kii waxa hawlahoodii ka soo baxay sharci dhulka inta nafciga leh oo ka badan kala badh qormada dhulkaasi caddaanka loogu qaydayo. Dadka madow waxa loo seeray 94 xero oo u dhigma 1/3 bedka dhulkaasi.

Hodannimada xagga beeraha waxa dalkaasi u dheer macdanta, 1937ki dahabka 25 tan ayaa laga qoday, macdanaha Asbestos iyo «Chronium» iyagana 57 sano ayaa haatan laga joogaa markii laga bilaabay manaafacaadsigooda. Dadka madawga ah ee dhulkaasi u dhashay macdantooda la dhuranayo xataa shaqo cuntanta lagama siin jirin.

Dadka ceelasha macdanta loo shaqo keeno xeryo taar ku wareegsan yahay bileysna dusha kaga xeeran yahay ayey nolol xun ugu jiri jireen inta ay shaqada ka soo maqan yihiin.

Hantigoosataddii caddaanka ahayd ee gumeystuhu soo dejiyey dalalka Malaawi oo Nayaasalaand ahayd Saambiya oo woqooyiga Rudiisiya la odhan jiray iyo Rudiisiyada maanta hadlkeedu taagan yahay ayaa waxay qoodeysteen inay isu geeyaan Koonfurta Rudiisiya oo wershadduhu u badnaayeen, Macdanta Saambiya iyo muruqa Malaawi. Waxa kale oo ay arintaa uga dan lahaayeen inay isu gaashaanbuuraystaan cadaadinta iyo



duudsiga dadka madow ee dalalkaasi ku kala dhaqnaa.

«Godfrey Huggis» oo Ra'iisal Wasaare ka ahaa dawlad ku sheegii daakhiliga ahayd ee caddaanka Rudiisiyada haatan, iyo «Sir Roy Welensky» oo hogaamiye u ahaa caddaankii Saambiya markaa deganaa ayaa ka soo shaqeeyey caddaankii saddexdaa dal madaxdoodu inay isugu yimaadaan biya dhaca Fiktooriya (Victoria Falls) 1949kii.

Shirkaasi oo la doonayey in lagu alkumo xidhiidhkii dalalkaasi Ingiriiska oo sharci ahaan markaa dalalkaa u gumeysanayey waxba kamuu weydiin dadka madow oo dalalkaasi laysku qoofalanayey Inkasta oo dadka madowi xiriirkaa ay ka dacwoodeen hase ahaatee Ingiriis isagoo aan dheg u jalaqsiin ayuu xeerkii xidhiidhkaasi dhaqan geliyey 3dii Sebtembar 1953kii, ka dib markii caddaankii Waqooyiga iyo Konfurta Rodiisiya, Nayaasaland iyo Barlamaanka Ingiriisku ay oggolaadeen. Xeerka xiriirkaasi haddaynu eegno waxba kama aanu bedellin sharciyaddii midab-kala-sooca ee dalalkaasi yiillay, weliba 80% kuraasida Gola ku-sheegiisii wuxuu siinayey 300,000 caddaanka ahaa ee saddexdaa dal ku kala firidhsanaa. Waxa weliba xeerkaasi ku jirey halku dhegii Aabbihii gumeysigii Ingiriiska ee Koonfurta Afrika oo ahayd «Waxa isku xuquuq ah dadka wixii ilbax ah». Ilbaxnimada codka lagu yeelan karaana waxay u yiqiineen saddex shuruudood in mid uun la

buuxiyo.

1. In sanadkii ay ku soo galaan £300 iyo waxbarasho 8 sano gaadhsiisan;

2. In sanadkii £480 ay ku soo galaan iyo dugsiga hoos waxbarashadoodu inay ku simantay.

3. Ama dakhligaagu ugu yaraan sanadkii inuu yahay £720.

Shuruudahaasi markii la raacay doorasho ku-sheeg saddexdaa dal laga qaaday 1953kii bishii Diisembar 420 madow ayaa Rodiisiya da hada laga helay, Saambiyana 3 ruux, Malaawina cidnaba. Dadka madow ee saddexdaasi dal oo markaa 7 malyuun lagu qaderay sharciyada Barlamaan ku-sheegaasi uu soo saaray wax kale oo nafci lehba daayoo madowga xaaraan ayey ka ahayd tigidhada tareenka inay jaraan.

Xidhiidhkaa Rodiisiya ay ka mid ahayd waxa uu aad u dhirigelin jirey caddaanku inay u soo guuraan dalkaasi.

Ra'iisal Wasaarihii xidhiidhkaasi «Sir Welenskaa» isagoo tirtirsiyaya madaxda iyo dadka reer galbeedka ah bishii Jannaayo 1959 waxa uu yiri: «Haddii reer galbeedku ay rabaan Khayraadka qaaradda Afrika in ay waddo u helaan waa inay ka shaqeeyaan Dhawrista xasilloonida Caddaanka».

Dhaqdhaqaaqii Afrika markii uu soo kululaaday ayaa xidhiidhkaasi aad ugu dhowaaday midabtakoorka Koonfurta Afrika iyo Boortuqiiska oo markaa gacanta ku hayey dalalka u dhow.

Welensks, Salasaar iyo Verwoed waxa dunida horusocodka ahi ay u tiqiinay gashaanbuurtii xumaha.

Dadka Madaw ee isbahaysigaa loo sameystay halganka kulul ayey u galeen sidii ay xidhiidhkaasi u burburin lahaayeen. 1959kii bilawgiisii ayey xiisadaha ugu kululi ka dhaceen saddexdaa dal. Bishii Maarso xukun deg-deg ah ayaa dalkaasi lagu soo rogay. Nayaasaland dad arintaa ka dacwoonayey 120 ayaa laga dilay 1,400 waa laga xidhxidhay. Dhinaca Rudiisiya faraha ayaa laga qaaday biyo xidheenka kariba waxana guud ahaan jeelasha loo taxaabay 400 oo ka mida Hogaamiyayaashii dhaqdhaqaaqa.

Arintu waxay socotoba 28 Juun ilaa 3 Julay 1960kii shir lagu qabtay Biyadhaca Fikrooriya oo Ingiriiska, iyo Madaxdii cadaanka Rudiisiya iyo Nayaasaland ay ka soo qayb galeen waxa go'aan lagu gaadhay in 13 Diisambar 1963kii xidhiidhkaasi uu burburo.

Markii uu burburay xidhiidhkii 2dii Rudiisiya iyo Nayaasaland, waxa xukunkii Daakhiliga ahaa uu gacanata u galay koox cadaan ah oo ka sii garmaqaateysan kuwii hore. Horaantii 1964kii ayuu xukunkii «iyan Smith» kala wareegay «Winston J. Field» markaasi ayeyna sii xoogeysatay cadaadiskii lagu hayey Afrikaanka. Waxa xabsiga loo taxaabay «Joshua Nkomo» iyo Madax kale, qaar badana waa la laayey, kumaankun ruuxna Jeelasha iyo xeryo lagu silciyo ayaa laga buuxiyey.

Dabayaaqaddii 1964kii ayaa dalka Simbaabwe markii uu dami waayey dhaqdhaqaaqii gobanimadoonku ayaa lagu soo rogay xukun deg-deg ah. Waxa la masaafuriyey Madaxdii ugu kululayd Ururada ZANU iyo ZAPU oo uu ka mid ahaa «Sithole» dulucda arintaasina waxay ahayd in cadaanka yari dawlad xaaraan ah ay ku dhawaaqaan.

Bishii Noofambar 1964kii ayuu iyan Ismith doorasho ku-sheeg dadka cadaanka ah ka qaaday waxayna arintu ku dambeysay in cadaanku ay goostaan inay helaan dawlad iyaga u gaar ah oo uu xeer u yahay Dastuur 1961kii ay sameyysteen oo talada iyaga ku soo gantoobaya. Arintaasi aad ayey uga gilgisheen gobanimadoonka dalkaasi. Bishii Feeberwtri 1965kii ayey dawladda Ingiriiska oo sharci ahaan iyadu ilaa hada dalkaasi taladiisa uga masuul ahi ay u soo dirtay Simbaabwee Ergo ka koobnayd «Mr, Bottomley» oo Wasiirka Arimaha «Common wealth» ahaa iyo Lord »Chancellor». ergadaasi waxay la kulmeen qawlaysatada iyo Madaxdii gobanimadoonka dalkaasi oo laga keenay meelihii ay ku xidhnaayeen. Intii Ergadaa Ingiriis ay joogeen Simbaabwe dadka madaw ee dalkaasi u badani banaanbaxyo ay ku muujinayaan shucuurtooda ah in xukunka dadk intiisa badan loo gacan geliyo ayey sameeyeen.

Hase ahaatee, baaqii dadka reer Simbaabwe, dalalka Afrika, dunida horusocodka ah iyo Shirweynihii 16aad ee Golaha loo dhan yahay waxba kama aanu qaban Ingiriisku maxaa yeelay waxa looga fadhiyey inuu xukunka dadka intiisa badan ku wareejiyo.

Bishii May 5dii 1965kii Hororka Ismith doorasho ayuu ka qaaday cadaanka arrintuna waxay isugu soo biya shubatay in dawlad aan sharci ahayn cadaanka yari ay ku dhawaaqaan, dawladda Ingiriiskuna talaabaddii ku haboonayd kamay qaadin ee gacmaha ayey ka laabtay.

Hadaba sidaasi ayaa Ummadda Reer Simbaabwe 87 sano xuquuqdooda Aadaminimo looga duudsiyey welibana quudhsi, dil, cadaadis iyo Fool xumooyinka bahalnimo ah loogula kacayey, waxay hadaba soo halgamaanba iyagoo garab sanaya Afrikaanka, dunida horusocodka ah iyo dadyowga nabada jecel ayey maanta soo gaadheen heer kama dambeys ah oo aan xaqooda la haysan karin. Kaarkaasi ayaa ka keenay Imberiyaaliyada caalamiga ahi inay wada hadallo

nabadeed ula timaado Madaxdii gobanimadoonka iyadoo horeba looga aqbali waayey iyaga.

Shirkii xornimada Simbaabwe ee haatan markii la isugu soo noqon lahaa la wadwado markii ugu horeysayba waxa la isku mari waayey taariikhdii gobanimada Simbaabwe la siin lahaa.

Afarta wafdi ee gobanimadoonka oo ay kala Hogaaminayaan «Rober Mugabe», «Abel Muzorewa», Joshua Nkomo», iyo Nadabaningi Sithole» iyagu waxay ku kululaayeen dawlad ku meel gaadh ahi 12 bilood oo ka bilawda dhamaadka shirka inay dalka gobanimo buuxa ku sinto.

Wafdiga cadaanka yar ka socodaana waxay ku dheganaayeen 23 bilood inuu noqdo xilliga kala guurka ahi. Ingiriiska oo isagu shir gudoomiye ka ah goobtaasi ayaa isaguna ku taliyey 15 bilood gudahood in xornimo siintu ay qaadato.

Mudadaasi la isku mari waayey, oo qaybtii hore ee shirkana waqtigeedii afka u dhigtay waxa la isku Af garanwaayey mudada ay ku dhamaanayaan dhismaha dawladda ku-meel gaarka ah, sameyntii xeerkii gobanimada, tusmeynta meelihii wax la soo dooranayey Diiwaangelinta dadka wax dooranaya, iyo Doorashaddii gobanimada ka horeysay. Hawlahaasi gobanimadoonku waxay qabaan in lagu dhameys tiri karayo 12 bilood gudahood ama weliba in ka yar. Hase ahaatee Qawleysatada caddaanka ah oo weli hunguri ka hayo xukunka ay boobeen way ka soo maageen mudadaasi. Arintaasi waxa loo qaadan karaa dhawr waxyaalood:

1— In ay doonayaan in aanay shirkan waxba ka hagaagin haddii aan tooda loo yeelin.

2— In ay doonayaan in mudadaasi xagga hubka iyo ciidamada ay uga tabaabulshaystaan gobanimadoonka, haddii ay intaa ka dhex faa'iideysan kari waayaan.

3— iyo guud ahaanba qawleysatada Hantigoostaddii danahooda ku dhawranayey inay u suurgeli karo inay ku tuuntuunsadaan taliskaa cadi inuu jiro. Arintu si kastaba ha ahaatee markii dambe Ingiriisku wuxuu sheegay in gobanimada ay bixinayaan ugu dambeyn 1da bisha Saddexaad ee 1978 haddii arimaha gogol dhiga u ah xornimadu 12 bilood gudahooda ay **ku dhamaadaana waxay noqonaysaa 1da Disember sannadkan.**

Hindisahaasi qudhiisa way ku gacan saydheen gobanimadoonka maxaa yeelay waxa dhici kartaa in cadaanku ay ka hakiyaan 12ka bilood gudahooda in hawluhu ku dhamaadaan, markaana Ingiriiska oo shardigiisii aan la buuxini uu mudada dib u dhigo. Waxa kale oo ay gobanimadoonka doonayaan in ay helaan taariikh go'an oo gaaban oo aan shaki ku jirin inay talada Hantiyayaan.

Xaajadaa hore intoo dhinac la iska dhigay ayaa looga gudbay qaabka dawladda ku-meel gaadhka ah. Arintaasi oo aad u muhiim ah aad ayaa loogu kala tagsan yahay. Qawleysatadu qaabka dawladaasi ay la doonayaan wuxuu salka ku hayaa Hindisayaashii Xoghayihii hore ee, hawlaha debeda ee Maraykanka Dr. Heneri Kisinjar.

Hindisahaasi sidii uu ku fasiray Hororka Iyan Ismith Bishii Sibtambar ee kal hore dhismayaasha ugu dereja roon dawladaasi waxay noqonayaan Gole qaran oo cadaanka iyo Madawgu tiro isku-mid ah loo soo magacaabo, Gudoomiyena cadaan uu ka noqdo iyo Gole Wasaaradeed (Subordinate Council of Ministers) oo Madawgu ay u badan yihiin Ra'iisal Wasaarahana ay leeyihiin. Waxa kale oo uu sheegayaa gaashaandhiga, sharciga iyo nabadgelyada jagooyinkooda inay cadaanku fadhiistaan. Qodobadaasi iyo waxyaabihii kale ee ku jiray Hindisayaashii Maraykanka iyo Ingiriiska gobanimadoonku gaashaanka ayey ku dhfteen.

Arintaasi oo aad umuhiim ah marka laga hadlayo talo ku wareejinta dadka dhulkaasi u badan ee madawga markii la isku mari waayey ayaa bishii Diisambar 2-dii shirka dib loogu dhigay dabayaaqadii Jananweri (1977).

Isugu soo noqodka shirkaasi Janeefa si ay wuxuun uga qabsoomaan ayaa Gudoomiyihii shirka oo Ingiriiska ahaa «Mr. Ivor Richard» Hindisayaashii dawladiisa uu ula tegay horaantii Janaweri hororka Foostar, qaybshaha Qawleysatada Rudiisiya Iyan Ismith iyo Madaxda Wadamada Botuswaana, Musaambiik, Taansaaniya iyo Saambiya, Angoola oo shirkaa dalalkoodu goob joogayaal ay ku lahaayeen.

Madaxda dalalkaasi markay is arkeen Ninkaasi ayey shir kaga yeesheen arinta Rudiisiya magaalada Lusaaka ee dalka Taansaaniya 8dii Jananweri. Shirkaasi waxay Madaxdu ku taageereen Jabhada wadaniga ah ee ay isku habaysteen Mr, Roobert Mugaabeiz Ziismo.

Hadaba inkasta oo Madaxda **Afrikaanku ay u cadeeyeen Ingiriis**ka in degaalku joogsandoono mar-

ka dawladaasi ay dhisanto hase yeeshee Isugu soo laabadkii shirkii Janeefa 17kii Jananweri ee lagu waday dib ayuu uga dhacay.

Hadaba hadaynu isku-soo minguurino xaaliddii dalka Simbaabwe oo heer kama dambeys ah maraysa, inkasta oo cadaanka ay dani soo keliftay markii Hantigoosataddii meesha ku abuuratay danahoodii Koonfurta Afrika ay halista galeen, hase ahaatee gobanimadoonka iyo inta garabka siisa ee Soomaaliya ka mid tahay toona may filayn markiiba in lagaga helo shirkaasi qawleysatada iyo awooda meesha ku haysaa inay sida dawgu yahay ogolaadaan inay talada ku wareejiyaan dadkii ay 87 sano inta ka badan xuquuqdooda duudsiyayeen.


Hase ahaatee gobanimadoonka oo aanay himiladoodu ahayn inay dhiig uun daadiyaan waxay shirkaasi u tageen in haddii xuquuqdii Reer Simbaabwe nabadgelyo ay ugu soo helaan ay u keenaan haddii kalena dagaalkooda ay sii wataan.

Hadaba iyadoo ay lama huraan tahay haatan Reer Simbaabwe talada dalkooda inay sandulle ku helayaan hadana waxa aanu shaki ku jirin qawleysatada iyo kuwii danahooda ku fushanayey in aanay ka daalayn tab iyo xeelad sidii cadaanka yari talada u sii haysan lahaa ama dawlad dabadhilif ah ay xukunka ugu dhiiban lahaayeen.

Hase ahaatee gobanimadoonka oo aanay himiladoodu ahayn inay dhiig uun daadiyaan waxay shirkaasi u tageen in haddii xuquuqdii Reer Simbaawe nabadgalyo ay ugu soo helaan ay u keenaan haddii kalena dagaalkooda ay sii wataan.

Sidaa awgeed Kacaanka Soomaaliyeed oo had iyo jeerba taageero buuxda la barbar taagnaan jirey lana safnaan doona gobanimadoonka wuxuu ku guubaabinayaa reer Simbaawe inay ka feejignaadaan wixii lagu hakinayo ama lagu leexinayo himilada halgankooda. Ummadda Hantiwadaaaga ah ee Soomaaliyeed oo la safan xornimo u dirirka Adduunka, waxay u rajenayaan wallaalahooda Reer Simbaawe midnimo iyo wadajir inay gobanimo buuxda oo deg-deg ah ku gaadhaan.

# ARAGTI IYO UJEEDDO MID AH



*Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre had iyo jeer wuxuu isku taxallujiyaa in midnimo iyo wadajir ay ka dhex dhacaan Dalalka Afrika Intii uu joogay dalka Tansaaniya Jaalle Siyaad wuxuu gooni ula kulmayey madaxdii ka soo qayb gashay midaynta labada Xisbi ee Tansaaniya.*

# Heer sare ayay marayaa Kubadda cagta ee dalkeena

W.Q. Ariyoos



*Billawga sannadka 1977ka, kubadda Cagta ee dalkeenna wuxuu maray marxalad farxad weyn leh taasoo keentay kooxdaada «HORSEED» oo guul weyn ka soo hoysay tartankii (Horyaalka) Afrika da Bari iyo tan Dhexe.*

*Waa markii ugu horreeysay ooy jaraa'idka iyi Raadiyaha Ajnebiga ah si xammaasad ku jirto uga hadleen iyagoo ammaanaya Cayaarta Kooxdayada Teknikada iyo xagga Hannaanka hufan.*

*Horyaalka ka hor ma dhicin in kooxdayada ka gudubto marxaladda hore ama jaraa'idka Caalamiga ah ay Cayaartayada (Kubadda Cagta) soo magac qaadaan maaddaama aan mar kastaba noqon jirnay kuwa liita Waxaa taas la xiriirta in Cayaartoyda Soomaaliyeed mar kasta la kulmi jireen Himmad jab.*

*Markaan laakiinse kooxdayada sharaf ayey noo soo jiidday iyadoo weliba ku dhowaatay inay soo qaaddo koobka taasoo muujisay in heerka Cayaarta Kubbaadda cagta ee Soomaaliya aysan ka hooseynin kuwa waddammada kale, markii laga fiiriyo xagga teknikada inkastoo ay wax yar uga dhinnaayeen oo keliya xagga tabaha.*

*Runtii markii cayaarta gagabada ahayd lagu qaabtay Dar Es Salaam, taasoo ay isaga hor imaanayeen kooxda keeniya, oo mar labaad koobka qaadatay, iyo tan Soomaaliyeed, waxay u ekeyd oo la filayey in kooxda Soomaaliyeed, guusha qaadato.*

*Waxaa lays lahaa kooxda keeniya, inkastooy si habsan u diyaarsan ay isticmaalaso tabaha ANGLO SAKSONKA ee Cayaarta oo xoog ku kacdo si ay u daaliso Cayaartooyda Soomaaliyeed oo cayaarta xag teknika ku wanaagsan oo laakiinse itaal yar.*

*Waxaa hubaad noqday waxaan horeyba u sheegi jirney oo ah in Kooxi si kaamil ah diyaar ciyaar ugu ahayn haddaysan sabeynta jirkana ku dadaalin, taasoo marka lagama maarmaan ka dhigayso in tababarka cayaarta la raahore la fileyn. Marka haddii heerwaajib sharafeed ah in lagu dakaasi la gaaray waxaa marka jada koowaad markaasna lagu daalo sidii lagu gali lahaa daraheli koobka horyaadka, taasoo marka keenaysa in diyaarin adag ciyo tababar jirka.*

*Kolleyba waxaan maanta muhiim ah in kooxdayada gashay darajada labaad taasoo dadweynaha cayaarta jecel farxad weyn ku dhalisay iyadoo taasi marka oo joogta ah. loo sameeyo.*

*Dadweynaha Soomaaliyeed, isagoo mar keliya waliba u caada ah inuu kooxda si buuxda u taageero, wuxuu doonayaa in cayaartoydiisa noqdaan kuwo si firfircoon uga dagaallamaan sidii ay ku gaari lahaayeen guusha kama dambaysta ah.*

*Tan sidii ay ku rumeysmi lahayd waxay ku xirxiran tahay dadaalka maamulayaasha iyo cayaartooydaba. Darajada labaad waa inay noqoto mid tan sare si fudud loogu gudbo. Marka dib u noqosho ma jirto.*

*Intay «HORSEED» dibedda ku maqnayd, waxaa Soomaaliya timid koox ka socota Jamhuuriyadda Dadka Shiinaha oo la cayaartay saddex koox Soomaaliyeed iyadoo laba iyaga ka mid ah kooxda Shiinaha is bar bar dhaceen midina laga reeyey.*

*Dheesha cayaartoyda martida ah waxay ahayd mid habsan oo loo bogo sidii u caadada ahayd Shiinaha waxay u dhalsheen si ay dadka ugu qancin lahaayeen iyagoon ujeeddadoodu ahayn inay u dheelaan si kastaba guul ku gaaraan, taasna dadweynaha u daawasho tagey waay ka heleen sida saddexdaa Cayaarood u dheceen.*

*In dibedda kooxo cayaartooy ah laga soo martiqaado waa wax laba faa'iido ku jirto maaddaama cayaartoyda Soomaaliyeed wax ka kordhisan karaan kooxaha horey u maray iyo dadweynahoo arkayo cayaaro wacan. Kooxo isweydaarsiga waa waxyaabaha lagu isticmaali si loo wanaajiyo tayada cayaarta kubadda Cagta.*



# WAXA LA IIDEY

# 8DII MAARSO MAALINTII HAWEENKA DUNIDA

# ◦ JAALLE SIYAAD OO FURAY KAL-FADHIGII

# ◦ TAAGEERO DADWEYNE EE GO'AANNADII KAL-FADHIGA



